
GARBADUUBKII
GUMEYSIGA
qore: Faarax Maxamed J. "Cawl"

Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare

———oOo———

## AKADEEMIYAHA DHAQANKA

# GARBADUUBKII GUMEYSIGA


Waxaa Qoray:

Faarax Maxamed Jaamac «Cawl»



MUQDISHU 1978



Qoraha buuggan, Faarax Maxamed Jaamac «Cawl», wuxuu ku dhashay gobolka Sanaag, degmada Laasqoray, markay taariikhdu ahayd 1937. Tacliintiisa hoose wuxuu ku qaatay magaalada Cadmeed, hase ahaatee wuxuu ka soo dhoofay 1952kii, wuxuuna magaalada Hargeysa ka galay Dugsiga Farsamada Gacanta. Markuu ka baxay dugsigaasna wuxuu tacliin sare, ee farsamada gacanta u aaday dalka Ingiriiska magaalada London (1959-1961) halkaasoo uu shahaado Injineeriya ah ka soo qaatay «Chelsea college of Automobile, and Aerounatical Engineering».

Ma'aha buuggani kii u horreeyey, ee Jaalle Faarax Maxamed qoray, ee wuxuu hore u qoray buugga Magaciisu yahay «Aqoondarro waa u Nacab jacayl», ee soo baxay 1974kii.

# MAHADNAQ


Waxaa inaan u mahadnaqo iga mudan, oo buuggan igu dhiiri geliyey Jaalle, Maxamed Aadan Sheekh, Cumar Carte Qaalib iyo S/G. Cabdillaahi Maxamuud Xasan.

Waxaan kaloo u mahadnaqayaa, oo gacan hagar la'aaneed igu siiyey buuggan qorriinkiisa, ha ahaato xagga fikradaha, ama ha ahaato xagga buug-kaashiga, iyo xag kaleetaba'e Jaalle Cabdullaahi Saciid Cusmaan, Sciid Maxamed Cali «Sheef», Cumar Cusmaan, Daahir Afqarshe, Maxamed Maxamuud Faarax «Oday», Jibriil Cali Nuux, Maxamed Cumar Xaashi, iyo Maxamuud Cabdi Cali Bayr.

Waxaan isna lib weyn, iyo abaal aan la gudi kareyn u hayaa, Laba Alifle Maxamed Jirde Axmed, oo si hagar la'aanneed buuggan daraafkiisii marxaladuhu soo maray makiinnadda ku qoray, dadaalkiis la'aantiisna aanu innaba qormeen, iyo Saddex Alifle Maxamed Hilowle, oo isna garaacidda gacan igu siiyey dhammeystirkiisii. Waxaan kaloo u mahad naqayaa Rikardo Komas oo xagga taswiiraha gacan igu siiyey.

Iyana, waxaan u mahad celinayaa, abwaanada aan murtidoodii halqabsi, iyo tix raac ka dhigtey, waxaana ka mid ah abwaanadaas Xaaji Aadan Afqalooc, Qaasim, iyo Cabdulqaadir Yamyam, oo isagu gacan dheeraad ah i siiyey.

**Ugu danbeystii waxaan iyagana u Mahadnaqayaa Maamulka Wakaaladda Madbacadda Qaranka** iyo shaqaalahaba siiba mahadgaara waxaan u celinayaa Linotaybista Jaamac Cabdi Samantar «Taliko» & Kombositore Cali Cabdi Nageeye, oo si wacan, gacan iigu siiyey hawsha buuggaan dhinaca farsamada gacanta.

# HORDHAC

Qorriinsho la'aantii afka Soomaaliyeed sababaha ha ka mid ahaatee, waxay Ummadda Soomaaliyeed yar, iyo weyn-ba tebeysaa taariikhdeedii oon qoraal badan laga hayn, iyo tix raacyo kaydsan, khaas ahaan taariikhdeedii ka warrami lahayd sidii gumeysigu u saxariirshey, amase u qaybqaybshey, iyo goobihii lama illaawaanka ahaa, ee lagu dhaawacay aayaheeda, sida shirqoolkii «Berlin» ka dhacay 1884kii.

Waxaa kaloo, yana kaalintoodii taariikh ahaan ban-naan tahay halgannadii gobannimodoonka ahaa, iyo halyeya-dii Soomaaliyeed ee hoggaaminaayey, sida Axmed Gurey iyo Seyid Maxamed oo kale. Halganadaasoo sida taariikhdu muu-jisey aan noqon kuwo Soomaaliya keliya ku kooban, ee caan ku noqday dunida.

Haddaba inkastoo, buuggani u qoran yahay sidii hab sheeko weriso ah, haddana waxay dulucdiisu tahay, ama uu ka warbixinayaa taariikhda ummadda Soomaaliyeed. Sida ka muuqatana, magaciisa ah «Garbaduubkii Gumeysiga» wuxuu gaar ahaan uga warramayaa dhibaatooyinkuu gumeysigu gaa-rsiiyey Ummadda Soomaaliyeed.

Wuxuu si anfici karta, aragti hor leh ka siinayaa, bulshada Soomaaliyed, ee cusub, oon xog ogaal u ahayn taa-riikhdeedii is-dabajoogga ahayd, oo maalinba heeray joogta-ba, ay kaga soo horjeeddey gumeysigii caddaa, iyo kan ma-dow ee Xabashida, oo isu soo bahaystey intey heshiisyo kala qorteen ku saabsan qaybqaybinta, iyo burburinta midnimada iyo is-haysadkeedii Ummadda Soomaaliyeed. Wuxuu kaloo jaahil bixinayaa dadyowga kale, ee adduunka, oon ka warqabin gefafka waaweyn, ee gumeysigu qarnigii 19aad Geeska Afrika ka dhigay, eelkoodiina bixi waayey.

Ugu danbeystii, isagoo qof walboo Soomaaliyeed buuggan siyaabo badan uga faa'iideysan karaayo, ha ahaato xagga taariikhda, suugaanta, ama ha ahaato xagga qoomiyad-daba! e, si gaar ahna waxtar u leh dadka taariikhada u kuur gala, ama uruursha, baan waxaan ku hambalyeynayaa qorihii-sa, oo horena u qorey buugga la yiraahdo «Aqoondarro waa u nacab jaceyl» dedaalka dheer, iyo geesinnimada uu ku kacay, si uu u muujiyo intii karaankiisa ah, taarikhda qotada dheer ee Ummaddiisa, ee qoraal li'ida inteedii badneyd ku luntey.

**Jaalle Cabdullaahi Saciid Cusmaan**

Waxaan xus uga dhigayaa buugaan carruurteyda magac-yadoodu yihiin Deeqa, Daahir iyo Cabdiraxmaan Faarax.

# Tusmada Buugga


1) ARAR . . . . . . . . . . . . . . 1-4

2) GOOBDOON OO FASAX AH . . . . . . . 5-21

3) DOOD ISWEYDAARSIGII GOOBDOON IYO AABIHIIS SAMAKAAB . . . . . . . . 23-33

4) SOOMAALIYA IYO IMAATINKII GUMEYS-TAYAASHA REER YURUB KA HOR . . . 35-37

5) HALGANKII 1aad, EE AXMED GUREY . . 38-62

6) SOOMAALIYA IYO SHIRQOOLKII GUMEY-STAYAASHA REER YURUB . . . . . . 63-72

7) HALGANKII 2aad IYO SEYID MAXAMED CABDULLA XASAN . . . . . . . . . 73-124

8) ISBALLAARINTII GUMEYSIGA SEYID MA-XAMED KADDIB . . . . . . . . . . 125-135

9) HALGANKII 3aad IYO DHALASHADII GO-BONNIMODOONKA SOOMAALIYEED . 131-141

10) GOBANNIMO QADASHADII IYO ISRAA-CII 1960kii . . . . . . . . . . . .143-146

b) Dhaqdhaqaaqyadii N.F.D. iyo Gumeysigii Ingiriiska . . . . . . . . . . . . . 146-148

t) Xeebta Soomaaliyeed iyo Gumeysigii Faransiiska 148-157

j) Dalka Soomaaliyeed ee gacanta Gumeysiga Xaba-shida ku jira . . . . . . . . . . . . 157-165

11) SOOMAALIYA CAHDIGII KU MAGAC BA-XAY MUSUQMAASUQ . . . . . . . . 167-180

12) GEBEGEBEYN . . . . . . . . . . 181-185

# ARAR

Iyadoo qaaradda Afrika, ama sida loo yiqiin waayihii hore qaaradda madow, qoraxdiyo dayaxuba badweynta Hindiya kaga soo shucaac baxaan, waxaa ugu horrystii ileyskoodiyo nuurkooduba ku dhacaa Geeska Afrika.

Geeskaasoo waayihii hore loo yiqiin, «Land of Punt» ama dalkii moxorka iyo meydiga, oo udgoonka badnaa. Wuxuuna xagga waqooyi ka xukumaa afaafka baddacas laga galo, xagga kalena badweynta Hindiya, oo koonfur iyo bariba ka xigta. Xeebaha badahaasina waxay dhereran yihiin in lagu qiyaasay 3300 Km. iyo wax la jira.

Sida la og yahay, waxaa geeskaas Afrika ku nool, oo ku dhaqan dadka Soomaaliyeed, oo ah nasiib wanaag dad isku mid ah, isku af ah, isku diin ah isku dhaqan ah, oo isku dhiig ah.

Hase ahaatee, dadkaasoo ku nool nabad iyo naallo, ayaa markii laga soo bilaabo 1884 shirqoolkii Brliin, ee qaaradda Afrika reer Yurub ku qaybsadeen (Scramble of Afrika) ilaa qarnigan 20aad nasiib xumo ku dhacdey, oo isticmaarka reer Yurub, ee hantigoosadka ahi intuu heshiisyo xaq darriyo qarsoodi ah kala qortey, si ayaandarro ah u kala qoqobay, oo dalkoodii shan meelood u qaybshey:

Haddaba iyadoo aayaha dadka Soomaaliyeed sidaas ku sugan yahay muddo qarni wax yar la' hadba heeray joogtaba, oo gumeysiga la gumeysanaayey ay u wehelisey dalkiisii oo la qaybsanaayey, lagulana kacaayey cadaadis, iyo hagardaamooyin joogta ah, iyo dhaqan guurin sida Afrikada kaleba, baan haddana urugo lehe, wax taariikh ah, oo urursan, tifaaftiraysana tabaalaha gumeysigu u geystey la hayn. Laga, yaa-

be iney wax ka qoreen, qorayaal ajaanib ahi, hase yeeshee waxaan shaki ku jirin, in waxay qoreen badankood yihiin waxaan dadka Somaaliyeed u dhadhameyn, oo dubaaqooda ka degeyn, maxaayeelay waxaa ka maqan dareen Soomaalinnimo, iyo damqasho sokeeye, ama waaba mid la hubaa in badankood gumeystayaasha u adeegayeen, aaneyna daryeeleyn waxay runtu tahay, iyo danaha Soomaaliyeed. Teeda kalena dadka Soomaaliyeed suuragal uma ahayn mar haddaanu afkeedu qorreyn intii Kacaanka hantiwadaagga ka horeysay inuu taariikhdiisa ururiyo. duniduna wax ka ogaato urugada Soomaaliyeed sidey ku abuurantey, iyo meeshey salka ku hayso.

Waxaa keliyoo inta la hayo wax kaga kaydsami jireen taariikhda dadka Soomaaliyeed murtida ay tirin jireen, ha ku mahadsanaadeene, raggii gabayada iyo suugaanta, oo maalin walba dareenka dadweynaha, iyo waxa xaal adduun yahay cabbiri jirey.

Sidaas darteed, buuggan ku magacaaban «Garbaduubkii Gumeysiga» isagoo isku xiraaya wixii tegay, oo ah taariikhda dadka Soomaalyeed, iyo waxa jooga, oo ah murugadey qabto, kana dhashay dulmiga loo geystey, buu itaalkiis guud ahaan koobayaa tabaalaha, urugada, iyo eedaadka dadka Soomaaliyeed, gumeysigu wadajir is-haysadkeedii iyo midnimadeedii ku naafeeyey. Naafadaasoo sida la wada ogyahay, ay wadajir u geysteen gumeystayaasha **kala** ah Ingiriis, Faransiis, Talyaani iyo Xabashida, oo inkastoo aaney kala waxyeello yareyn, Ingiriisku ugu daqarro waaweynaa, oo wixii Soomaali gaarey afar meelood, saddex meelood la oran karo mas'uul buu ka ahaa, kaddib markuu heshiisyo xaqdarro ku ah dadka Somaaliyeed Xabashida la yeeshay Soomaaloon wax ka ogeyn, taariikhaha ahaa 1884, 1887 1897, 1948 iyo 1954.

Heshiisyadaas iyo kuwo kaloo Faransiis, iyo Talyaani Xabashi la dhigteen, dabadeedna u gacan geliyeen dadka Soomaaliyeed qaarkiis, waa waxyaalaha dadweynaha Soomaaliyeed badankiis u war la'yahay, isla markaasna dunidu inteeda badani xoog ogaal u ahayn, in qarnigii 19aad Geeska Afrika uu ka abuurmay layaab lehe gumeysiga madow ee Xabasha isagoo uu gacan hayey gumeysigii caddaa ee reer yurub, ee qarnigaas Afrika soo galay. Markaas, si bulsho isticmaar kadedey, hase ahaatee u war la' siyabaha loo khayaameeyey, xog ogaal ugu noqoto, nolol iyo dareen cusbi ugu abuurmaan, waa lagama maarmaan iney ku cilmi leedahay taariikhdeedii duugowdey, si ay ugu indhafurraato hilinkey higsaneysiyo halkey haweysaneyso.

Iyadoo haddaba, buuggani isku day yahay, inuu itaalkiis koobo, gumeysiga, iyo imbeeryaaliyaddii isu soo kaashaday dadka Soomaaliyeed, iyo halgannadey kala hortegey, ubucdiisuna sidaas ku sugan tahay, baa waxay sheekadu tahay mid weriso ah, oo laga werinaayo oday da'weyn magaciisana la yiraahdo Samakaab Colaad, oo ku nool Hawdka Xabashidu dadka Soomaaliyeed ka haysato. Oday Samakaab waxaa doodi dhex mareysaa inan wax garad ah, oo uu dhalay, lana yiraahdo Goobdoon, oo fasax reerkoodii ugu tegay.

Maaddaama markaas, gumeysigu dhaxalsiiyey guud ahaanba Afrika iyo dadkuu gumeysan jirey oo dhan, dhaqan habow, isku kalsooni la'aan iyo jirrooyin kaloo maskaxeed, wuxuu odey Samakaab inankiisa Gobdoon duruus ka siinayaa, oo fahamsiinayaa qaayaha barashada taariikhda dadkiisu u leedahay, kaddib markay doodeen, oo uu ku qawdeday garashadiisa siyaasaded, iyo aragtiisa taariikheed, arkayna inuu habilaawe dhaqan habow ah yahay.

Wuxuuna isagoo dhaawac ah, Odey Samakaab laba habeen, oo ah sannadkii 1969kii intaanu Kacaanku dhalan si dardaaran duruuseed ahaan ah, u dhaxalsiinayaa inankiisa Goobdoon taariikhda dalkiisa, ee soo taxneyd qarnigii 16aad, ee Axmed Gurey kacay ilaa qarnigan 20aad, isagoo gaar ahaan u fahamsiinaaya gaboodfalkii gumeysigu geeska Afrika ka dhigay.

Waxaa iga afef ah, inaan buuggan la oran karin wuxuu soo koobayaa taariikhdii isticmaarka ee geeska Afrika, hase ahaatee waa isku day, aan isku deyey intii karaankey ah inaan akhriyaha fikrad guud ka siiyo dhibaatooyinkii, iyo hagardaamooyinkii faraha badnaa, ee gumeysiga iyo Imbiiriyaaliyadda caalamiga ahi u geysteen ummadda Soomaaliyeed. Isla markaasna tusaaleeyo iyadoo waxtar u ah faca jooga iyo faca kici doona, sida gumeysiga madow, ee Xabasha dalka Soomaaliyeed qaarkiis loo siiyey, iyo dhibaatooyinkuu ku hayo oo ah maanta in laga geylamo.

**Xusuus**, waxaan akhristayaasha xusuusinayaa, in buuggani arrimaha qaarkood aad mooddid inuu dib uga dhacay, taasoo ku dhacday buggaa, oo waqtigii la rebey inuu soo baxo dib uga dhacay, sababo teknikaal ah aawadeed.

Waxaan ugu danbeystii taabanayaa inaan Seyid Maxamed gabayaduu tiriyey halkan ku dhameystirneyn, ee inta ku jirta qaybta asaga ka hadleysa, ay yihiin tixo gaaban, iyo ka soo qaad gabey walba munaasibkiisii.

F. M. J. (Cawl)





Abbe Samakaab, oo inankiisii Goobdoon duruus siinaya.

# GOOBDOON OO FASAX AH

Inkastoo, ay tahay magaala madaxdii labaad, ee J. D. Soomaaliyeed, ayna weyn tahay marka xagga dhismaha laga eego, misna sida la maleynaayo ma da' weyna, oo waxaa degidda la degay lagu maleynayaa iney bilaabantay qarnigii 19aad.

Waxaa kaloo la sheegay meeshay ku taal, iney ahayd kayn jiq ah, oo aad u dhir badan, uuna ku noolaa maroodi (1) fara badani, oo raxanraxan ah, oo hadhsan jirey damaladeeda hadhaca qabow kana cabi jirey iliila durdur ah, oo togga dhex mari jirey. Waxaana dhacday in maroodigu dhabbooyin badan kala baxay toggaas xaggiisa hoose, sidaas aawadeedna, markii dambe loogu baxshay toggamaroodi-jeex.

Toggaas Maroodi-jeex, waxaa ilaa maanta ku nool, oo laga helaa shimbiraha lagu tilmaamey iney adduunyada u qurux badan yihiin, oo ah shinbiro intey leeyihiin midabyo kala geddisan, misna noocnooc ah. Waxaana ka mid ah shinbirahaas, gobyaandhooraha, laxodgowsta, muriyadda, shinbircaanoodda, hurdida, hudhudka, deynhilatada iyo quduunquutada iwm.

Inkastoo markuu toggaasi magaaloobey laga beeray dhir badan oo qadhaab leh, oo ay ka mid yihiin gobka, dhafaruurka, mudhacanyada, mareerka gommoshaaga iwm.

Waxaa kaloo aad uga baxa dacarta, sida taariikhda qaarkeed werineysana, toggaas magacuu la baxay, markuu magaaloobey wuxuu ka soo jeedaa geedka dacarta ah, oo sida la og-

---

Maroodigii u dambeeyey wuxuu ku dhintay meel magaalada Booraama u dhow 1956kii.

yahay dadka Soomaaliyeed, ee qodaalka iyo Ootida loo yaqaan,, oo Harar agihiisa dega, ay u yaqaaniin dacarta «Hargeysa». Tu kale oo lagu rumeyn karayaa in laga yaabo iney run tahay, waxay tahay dadka Soomaaliyeed meel walba markay magac u bixinaayaan waxay ugu bixiyaan hadba sifaha ay meeshu ledahay, oo ah dhirta ku taal ama buuraha leedahay, Sida dhulka ka sii rogan toggaas, oo xoola dhaqatadu degto, oo la yiraahdo Dhamal. Meeshaas Dhamal la yiraahdo waxaa ka baxa damal badan. Haddaba si meeshaas damasha leh, oo aad u weyn loo kala garto, waxaa loo kala bixiyey saddex magac, iyadoo meel walba gaarkeeda geedka damalka ah lagu ladhaayo geed kale, oo aanay meelaha kale la wadaagin. Waxayna kala yihiin saddexdaa meelood Dhamal-gulaan leh, dhamaldacar leh, iyo dhamal Dhafaruur leh.

Taariikh kale, oo sida magaca magaaladaasi u baxayna, waxay sheegeysaa in qarniyadii hore, ee ahaa kuwii 15aad ilaa 17aad, oy Soomaalida galbeed, oo Harar iyo Hawaas deggani ilbax ahayd, oo Axmed Gurey iyo Amiir Nuur iyo madax kaleba xukumaayeen, gobonnimona haysteen, ay safarahoodu tegi jireen marsada Berbera. Halkaasoo ganacsi weyni ka dhexeeyey. Waxaana safrahaas u kala socon jirey Harar, iyo Berbera toobiye u ahaa, waddo mari jirtey tooggaas maroodijeex.

Haddaba bacdamaa, waddada halkaas marii jirtey, ay toos u geyn jirtey magaalada Harar safraha, ama kabadhada Berbera ka alaab qaadda, baa waxaa dhacday markaas in waddadii loo baxshay sida la weriyey «Harargeysa». Mid kastii ha rumowdee labadaas siyaad baa loo badiyaa in magaca magaalada Hargeysa ku yimid.

Iyadoo, ay haddaba barqo gaaban tahay, oo cirku cusub yahay, dabeyl foore, oo saxansaxa udgoon lihina xagga koonfur Bari ka dhacayso, ayna dayr barwaaqo tahay, oo galoolkiyo bilcilkuba man bixiyeen,, dhir kaloo badnina magoo-



leen, oo inkastoo aan cirku guud ahaan wada curan, hase ahaate ay dhawr hoglood ka da'een, oo daadkii ka rogmaday togga maroodijeex iyo iliilihiisa ku foofay suu u sii dulundulcaynaayey Wawheen, oo ah halka toggaasi afaafkiisu u baddacas kaga darsamo, ayaa inan 28 sano jir ah, oo la yiraahdo Goobdoon Samakaab ka raacay baabuur Niisaan ah, oo shacbi leeyahay magaalada Hargeysa, isagoo u jeeda reerkoodii, oo reer miyi ah, yaalana meel xuduud ku sheegga ka gudubsan, oo la yiraahdo Moholli. Wuxuuna ahaa Goobdoon inan wax ku soo bartay dalkaas Ingiriiska, markuu soo noqdayna Hargeysa Dawladda uga shaqeynaayey. Baabuurkaas uu Hargeysa ka soo raacey Goobdoon, uuna kuraasta shirka midkood fadhiyey, waxaa baabuur wada ka ahaa, lahaana nin la yiraahdo Heybe Dhunkaal. Sida la og yahay, baabuur wadayaasha Soomaaliyeed waaya aragnimada ayey wax dheer yihiin, oo waa sheeko iyo haasaawe yaqaanno, dadka la socdaana, ma ogaadaa waqtiga, si kastaba jidku ha u dheeraadee. Heybena waxaa weeye nin sheekooyinka murtida leh caan ku ah, oo mararka qaarkood raggay isku bulsho yihiin ku qaraaxadiyaan, ama ku naaneysaan Heybe sheeko xariir.

Haddaba, markuu baabuurkaasi ka baxay magaalada Hargeysa goor barqo ah, dhowr qof, oo u danbeeyeyna Quraac dheer iyo Dunbuluq ka raaceen, baa baabuur wade Heybe hadal bilaabey markii tirada gegida diiyaaradaha la maraayey, oo ku yiri, Goobdoon, oo kursiga ku xiga fadhiya «walaal magacaa» waxaa la yiraahdaa «Goobdoon Samakaab, «buu ugu jawaab celiyey. War bal dhega! Gobdoon baa la yiraahdaaye, ma wax baad ka qabtaa»? baa Goobdoon ugu jawaabey. Hadalkii baa waxaa qaadatey habar qumman ah, oo kursiga saddexaad fadhidey, oo Goobdoon eeddadiis ah magaceedana la yiraahdo Cawo, waxayna tiri «gacaliye gacalkaa hele, waxba ha dhadhansan inanka magaciisa, waayo aabbihiis, iyo hooyadiis baa ugu walqalay. Waana nin dhowr iyo toban sannadood ilaa Iglan wax ka soo baranaayey, fasaxse ku jira, oo reerkoodii ku tegaaya». Wadihii baa hadalkii ku noqdoo yiri

«waxba kama qabo, eeddo inanka magaca aabbihii iyo hooyadii u bixiyeen, wuxuuse, i soo xusuusiyey mid magac sidaas u qaaya weyn ii sheegtey, magaciisoo ahaa Liibaan, ma libaane, oo beri dhoweyto sidaasoo kale Hargeysa iga raacay ilaa reerkoodii, oo dhulka Xabashidu inaka haysato yiil, waxuuna iga yiri, markaan sii sheekaysanay inuu dawladda u shaqeeyo, oo fasax ahaa. Hase ahaatee, waxaan ogaaday maalmo yar dabadeed inuu yahay nin iimaan xumo ay dalkiisii ka soo kaxaysey, oo nacasnimo iyo doqonnimo aawadood cadowgeen u gacan galay.

Waxaana dhacday, inaanu mahadin, oo aanoo laygu xiray maalmo dabadeed, Saldhigga magaalada Awaare, la iigu geeyey qol uu ku xiran yahay, isagoo aad dameer mooddid oo aad loo silciyey, oo inta garbadduub loo xiray, lugahana laga xiray beerka loo jiifiyey, dushana inta haaro laga jeexay dhiig ka da'aayo. Markaan gartey inuu Liibaan yahay arkayna siduu u irdheysan yahay, baan ku iri, «Alleylee waa abaalkaa, war meel xille Alla ku dhigye ma kuwaa dadkaagii ka soo doorataa saatan kuu galay? Markaasuu isagoo codkiisii qoomamiyo hiirtaanyo ka dhadhameyso, ilmona indhaha ka gobo layneyso yiri, «Ninna eersan maayo, oo waa waxaan galabsaday iyo abaalkay». Markaasaa waxaa kaloo ii muuqday markuu afka kala qaadey in afarta fool maqan yihiin, waxaana ku iri, «layskuma hayo mar haddaad Xabashi xigaalo mooddey iney waajibkaaga tahay iney haaro kaa jeexaan, afarta foolna kaa ridaan, raqdaadana eydooda siistaan. Wuxuu yiri, «Miyaan ogaa, waxay hoday, oo ii yeeray mid adeerkay ah, oo la yiri waa «Balambaad», (1) oo iyaga u shaqeya Markaasaan ku iri, «Waa sidaas aayaha ninkii arligiisa jaajuusa, oo nacab ka doorta» Wuxuu markaas yiri, intuu madaxa ruxay:

Oogadeyda eegoo, ulahaas ku yaallaa
Abaalkayga weeyee, ninkaan hore u ogeynow
Ku ishaaro qaadoo, haw abraarin cadowgeen»

.(1) Waa dabadhilif xabashiyeed



Indhahayga eegoo, ilmadaas da'aysaa
Abaalkayga weeyee, ninkaan hore ogeynow
Ku ishaaro qaado, how abraarin cadowgeen

Afkayga eego, ilkahaas ka maqani
Abaalkayga weeyee, ninkanaan horow ogeynow
Ku ishaaro qaadoo, how abraarin cadowgeen

Nin iimaan xumaadoo, arligisa nacayoo
Ibliis daadhaystoo, ka eedoobey ahalkis
Sideyduu u eedaa, wuxuu oon ku cuno iyo
Afartiisa waaxood, iyo arag ku waayaa

Alla ummal i saaqyey, alla urugadeyday
Egga toobad keenee, ifka yaa i geeyoo
Iilkeer uraayiyo iga saara Alanbaqa (2).

Si aan u illawsiiyo tiiraanyada, iyo qoomamada uu qoomameynaayey baan waxaan ku iri, «War heedhe annaga na weydii dhaqanka Xabashida, iyo waxay tahay caddaalad xumadoodu. Tusaale ahaan haddaan mid u soo qaato, waxaa dhowaan laga sheegaayey magaalada Dirirdhaba in laba nin, oo midna Soomaali yahay, kan kalena Xabashi, ay lahaayeen laba beerood oo isku dhow. Mid walibana wuxuu lahaa dameer, uu beerta ku fasho. Waxaa dhacday haddaba in habeen, habeennada ka mid ah, uu waraabe cuney dameerkii ninka Soomaaliyeed, markii muddo ka danbeysayna intuu soo noqday cunay dameerkii Xabashiga.

Haddaba, waxaa dhacdey, oo goob joog loo ahaa maantana, la yaabin, in ninkii Xabashida ahaa dacweeyey ninkii Soomaaliyeed, oo ku dacweeyey in waraabihii cunidda dameeraha ku bartey dameerkii ninka Soomaaliyeed, oo uu ninka Soo-

(2) Waa xabsi Addis Sababa ku yaal, oy dadka Xabashidu ku silciso.

maaliyeed markaas ma'suul ka yahay waraabuhu wuxuu gey stey. Sidaas aawadeedna uu ka codsaday maxkamadda in dameerkiisii loo xukumo.

Waxaase dhacday, markii ninkii Soomaaliyeed looga yeeray maxkamaddii inuu iska daafaco dameer waraabe cunay qaandhebiddiisa, inuu naxay, una qaadan waayey, sida xaalkaa soo kale suuragal u yahay. Dabadeedna wuxuu su'aalay garsoorihii kaddib markii dacwadii loo akhriyey su'aalahan «Anigu miyaan waraabe ahay»? «Ma tihid» baa garsoorihii yidhi, «Dameerkaygu miyuu dameerka dacwoodaha cunay? «Maya», buu mar labaad ugu jawaabey, wuxuu ugu dambeystii ku yiri garsoorihii» anba dameerkaygii waa maqan yahaye yaan u raacayaa»? Adaa og» buu ugu jawaabey. Wuxuu dacwaddii ku go'aanshey garsoorihii, in ninkii Soomaaliyeed dameerkii Xabashiga waraabuhu ka cunay qaandhabo. Wuxuu go'aankiisii gun uga dhigay saddex qodob, oo kan u horreeyey uu ahaa in Xabashigu ka hadal batay, in waraabaha Dirirdhabe cunidda dameeraha kiisa ku bartay, iyo inuu xereyn waayey dameerkiisa. Markii ninkii Soomaaliyeed xukunkii xabashiyeed sidaas ugu dhacay ayuu yiri. «Waa xukun qarqoosh, waa xukun qarqoosh, xukunka Xabashiyeed» garsoorihii baa kursigii ka boodey oo yiri «Alambaqa geeya degdeg» waxaana qabatey askarigii isagoo leh «Alambaqa ma'ahe cirka i gee. wallaanan xukun qarqoosh ugu hoggaansamin».

Halkaas markay sheekadii noo mareysey, aniyo Liibaan, baa askari xabashiyeed noogu soo galay xabsigii, wuxuuna siiyey, oo afka u saaray koob wax ku jiraan, markuu mar kabbaday ayuu soo tufay waayo biyo milix leh bey ahaayeen, markaasaa askarigii intuu mindi la soo baxay timo madaxiisa ka soo jaray, oo laba shaabuug intuu ku dhiftay khasab ku leqsiiyey biyihii oo timihiisii ku jiraan. Sahaydiisuna ninkii dalkiisa ka baxsaday isagoo sharaf iyo derejo leh timihiisoo la cunsiiyey ayey ku ekeyd. In yar dabadeedna waa leyga saaray qolkii, oo isagoo ilmeynaaya oo leh« ar ha iga tegin, haddii kale iga



war gee, yaa iigu aragti danbeysey. Sidaan war ku heleyna, magaciis ha ba'ee Liibaan, labo maalmood kaddib ayey hilibkiisii cyda cunsiiyeen, oo uu darxumo iyo dullinnimo ka dhintay, sidii Seyyid Maxamed ku sheegay tixdiisan:

«Nin dalkiisa iibsaday, dulli buu ku waariyoo
Ninkii gaalka daba gala, darxumow danbeynoo
Naftu hadday ka duushana dalku weysa diidiyo
Inuu haadku diirdiiran waa sida daruurtoo».

Goobdoonow, hadmaad adiguna, kaasoo kale noqotaa oo berri ka maalin maqlee inaad tahay, mid uu jinni hor cararay sida kaan ka sheekeeyey, dabadeedna aad mudataa hoog iyo ba'aasoo kale.

«Ha ka yaabin» buu ku jawaabey». Cawo, baa hadalkii qaadatay, oo tiri, «War bal kaalaya, addduunyada qofkii aan dhimanin wax walba wuu ku arkayaa. Walaalkay baabuur wade, baabuurka si wacan noogu kaxay, oo faalleynta magaca wiilka cidi kuuma dirane kaxee baabuurka. Midda kale waxaan ku xusuusinayaa inaynu hadda xuduud ku sheeggii ka gudubney, oo hadda iyo wixii ka danbeeya, halis ku jiro, waa inaad sidaad noo badbaadin lahayd annaga iyo alaabtayada falowgeed gashaa». Baabuur wade Heybe baa yiri, waa runtaa Cawoy, mar haddaynu xudduud ku sheeggi ka soo gudubney, ayna afartii galabnimo tahay, waa loo baahan yahay, ineynu u tabaabulsheysanno haddii Ciidankii Xabashiyeed ina weeraraan, waayo waa meheraddooda, oo labo baabuur bay shaley dhaceen.

Markaasuu intuu baabuurkii joojiyey ka degay, oo dadkii dusha ku joogey ku yiri, «walaalayaal waad ogtihiin meesheynu soo gallay waa dalkeennii, hase ahaatee col iyo cadaawe iyo bahalkii Xabashiyeed baa deggan, oo dadka Soomaaliyeed ku dhacda maalin walba. Markaas hadday ina maagaan waa inaynu iska celinaa. Waxaynunna ku degaal geleynaa gabeygii uu tiriyey Faarax Nuur, oo ku yiri:

«Lix halkaad ku joogtaan dagaal, laabta ka ogaada,
Haddii luqunta laydin jaro, lugaha meermeersha.

«Waa tahay, nagu hallee, waxba qaadimeysee», bey ku baaqeen. Haddii haddaba baabuurkii cabbaar socdey baa sidey maleynayeen waxaa ka hor yimid shan baabuur, oo ciidamo Xabashiya sida».

In yar markay u soo jirsadeen baa askartii ka soo daadegtey baabuurtii, oo dhufeysyo galeen qaarkalena hareeraha ka teedeen. Ugu horreystiibana dadkii bey lacag ka baarteen, sidey caadadeedu tahay, dabadeedna rasaas bey ku fureen baabuurkii iyo dadkii shacbiga ahaa. Waxaana ka dhintay laba dumar ah, oo midi ku lammaaneyey ilmo aan weli la abeydin. Baabuur wade Heybe iyo islaantii Cawo dhaawacyo yaryar baa gaaray, waxayna waayeen markii lays tiriyey Goobdoon iyo laba ruux oo kale, oo laga yaabo iney rasaastii ku dayoobeen digteedii iyo damteedii. Waxaana dhacday in intii dagaalku soconaayey gabbalkii dhacay, oo habeen kala dhex maray dadkii kala firdhay. Goobdoon waxaa dhaawac ka gaaray halbowlaha lugta midigta ah, wuxuuna foodda saaray cidla ciirsila, iyo xagga cadceed ka soo baxa.

Habeen qudcur ah, gudoodigiis iyo cidla ciirsi la' kulmay, cabsi dheeraad lehe, sow hadba Gobdoon suu u heeti cararaayey, baqdin aawadeedna u baalladaynaayey dhegihiisu uma hugmin, oo intuu hadba cabsi joogsado ma asaddihin.

Ilaa ugu dambeystii illayn uma baran hoog iyo halaakee uu istaagey, oo gacantisa midig calaacasheeda wadnihiisa dul saaray, mise hugunka cabsi geliyey waa rugrugtiyo gariirka wadnihiisa, oo siyaabo aanu hore ugu arki jirin u shaqeynaayey.

Wuxuu socdo, oo hadba meel yar fariisto, garanna la'yahay meeluu u jeedo iyo meeluu ka jeedo, ayuu geed



qurac ah in yar gabbaadsaday, oo halkii dhiiggu ka soconaayey maro ku xiray. Abbaarra caweys ku dhowaadkii ayuu wuxuu xaggii dabeyshu ka soo dhaceysey, ka maqlay dhawaaq uu u maleeyey mid dumar oo sidii wax barooranaaya oo kale ah. Halkaasuu foodda saaray dhawaaqa xaggiisii. Hadduuse in yar u soo jirsadey, ayuu sax iyo maan u gartay in codku boqolkiiba boqol yahay cod dhiillaysan oo dumar. Markaasuu intuu ku soo dhowdaaey himbiriirsaday, mise qofka dumari geed buu ku xiran yahay, saddex waraabena wey ku ag wareegayaan waxayna leedahay, oo ku barooraneysaa:

«Wayey hoyadayey, ifka hiil ku weydee
Hangal guudka saaroo, ha haweysan oon bixid
Hus iga tag weerow, habataqo ku raacdee

Wayey hoyadayey, **adigoo habeen hore**
Hiirtaanyo fooleed, la hafeefanaayo
Oon iyo harraad qaba, markii hiirad soo dhacay
Sow halaanhalkaagii, hurdo igama teginoo
Hayin doora weeyee, awrkii ma heeryeyn
harrarkii intaa simay, afarteenni haamood
Hab wanaagsan uma sudhin, oo hiirta waabberi
Hilinkii kumaan **dhicin, waxaan sii hadaafaba**
Hadhgalkii markay tahay, haradi qaboobeyd
Hiyi awrkii maan oran

Co waa habkeedee, haamihii jintaan furay
Xareed kama higsiinoo, hinji awrki maan oran

Waayey hooyadayey, anoo soo hitiyayoo
Horkacaaya dhankii, sow horin cadow
Hooliflay Amxaara'a, isma kay hortaaginoo
Awrkii haanka may jarin, haydedaan hayey iri
Sow horor u waynaa, how iguma soo oran
Hilqadlihisa maadhiin, **igumuu halgaadinoo**
Haammadii imay jabin, hadhaagii kaleetana
Intey igu halilee, idil ima hareerayn
Idil habardugaagow, hamuun baad qabtaane

Hawbowda daayo, soo heeldhaboodoo
Naftu hiif haddeysee, hor hayga booddee
Haadku feen a waayee, inta ay habeen tahay
Hilibkayga booboo, hurdan iyo mashxarad dhiga
Mar baddaan halaagmaye, wiil hooto rida iyo
Hiil aanan helihayn
Yaanan Hawd ku noolaan, hoygii akhirey lehe.

Waa u sugantey Goobdoon xaalka qofka dumarka ah, oo geedka ku xiran markuu baroorteeda dhegeystey.

Markaasuu intuu soo dhutiyey yiri:

Waa maxay hayeydani, hawdkeer agteydiyo
Hareeraa ka weytami oo husaayey bahalaha?

Waxay ku jawaabtey:

Hayeydaa maqlaysaan, waa mid cadow aleelee
Hadal hay dambeeyee, kalayoo hugay saar

Goobdoon baa jawaabey oo yiri:

«Ma kuwii na hooshaa, adigana ku helayoo
Sideydeer halboyliyo haankii ku gooyoo
Habar qabe waraabaha, geedka kuugu hoos xiray

Waxay tiri:

Horor iyo dadyahanna, igu hooshay gobtee
Hadal ay danbeeyee, kaalayoo hugay saar

Goobdoon baa jawaabey oo yiri:

An soo hirriishe lugta soo hitiqiyee
Hammaaddii dillaantiyo, hiyigaaga sama geli

Waxay tiri:

Waa tahay halyeyow, hiyigaan ku geliyee
Inta aan hus leeyahay, hamuun qabe waraabaha
Hore iiga soo gaar.



Haddii, haddaba leys weydaarsadey ereyadaas, uuna gartay inay tahay gabadh geed ku xidan bahalona ku ag wareegayaan, oo ay hadba hus-hus ku leedahay, buu nasiib wanaag wuxuu la kulmy mar alla markuu ku soo dhowaadey dhurwaa gadaal ka soo gaadaayey oo markuu jeenigii u horreeyey halkaas sinta ah kaga qabsaday, aanuse afka ku qaban weli buu Ileyn fara ku qabsi ma sidane harraati halkaas gosha ah waraabihii kaga dhuftey oo ka furfurey, isagoo aan ciddiyo ma'aha wax kale weli u geysan.

Markuu waraabihii iyo kuwa kale oo ag joogay eryey oo ku soo noqdey, bey ku tiri, «war geedka iga fur oo huga igu qabo». Amminkiiba intuu geedkii ka furay oo xariggaa ilkihiisa kaga googoyey buu qeydkiisii ugu nabsisudhay. Waxayna ku tiri, «waxaad tahay saac iyo malag la ii soo diraye magacaa».

Caawa wax kaleba waa filaayey, mase fileyn inaan ka nabadgelaayo halka lay dhigay, iyo waraabihii sinta i haystey.» Goortey intaas tiri, oo maraduu siiyey ku nabsisudhantay bey geedkii ka dhaqaaqeen oo dhawr tallaabo haddii la wada socdey garab gashay markay aragtey inuu heetinaayo.

Waxaana la hoos fariistay geed qurac ah dugsigiis, inta raqdiii awrka oo bahalo ku malakhadaayeen laga durkey. Markii geedkii la hoos fariistey bey hadalkii halkii ka wadatay iyadoo ilmayneysa oo hoos u foorarta, waxayna tiri» magacaaga ii sheeg mahad allaa lehe». Markaasuu ugu jawaabey, «waa runtaa mahad eebbaa leh, murugana miiskaynu nahay baa leh, ee magacayga waxaa la yiraahdaa Goobdoon Samakaab». Waxay tiri». anna Gargaara lay yiraahdaa, Gobdoon Samakaabow samahayga kaabtaye, maxaa meesha goortan ku keenay» waxa adigana kugu xiray geedka baa anna gondaha i gooyoo igu go'doonshey cidlada», buu ugu jawaabey, iyadii baa haddana hadalkii qaadatoo tiri»,

aniga waxaa goobta igu hooshey Hoolifley casarkii dheeraa, oo isla markaas halkaas habardugaaggu ka habqamayaan ku toogtey awr dhaana oo aan u soo dhamiyey hoyadey, oo habee hore ummushay. Goobdoonow maleyn meysid folxumada markay anigii i hoosheen, bey awrka toogteen, oo waa hidda hooda'e markuu dhacay ceedhinkii ku boobeen. Intaas markay isdhaafsadeen bey kacday oo tiri, «war inka kici meesha, oo horta raqda awrka inoo gee bal aan eegnee in haamihii gocgoc yar, oo biya ahi ku hareen» wey dul tageen oo mid bey in yar ka heleen, tii beyna tiri ii xambaari, wuuna u xambaar shey.

In yar haddi la soconaayey, baa Goobdoon socon waayey, dhaawacii ka gaarey, aawadiis. Markaasey Gargaari dareentey heeti dhuttintisa oo tiri, «war geedkaas inna fariisi» kolkii la fariistey bey intey ka yar dhaqaaqday geed soo goysey oo ka saartay halkii dhaawaca. In yar dabadeedna dhiiggii baa Goobdoon iska taagey. Gacmahuu dhafoorada saarey, markii dhiiggii ka joogsadey wuxuuna ku yiri, «yaab leh amakaagna ahe, sidee dhiiggu iiga joogsarey, waayo dhakhsaan, u hungi lahaa.»

Waxay tiri, «Waa nolosha waayo aragnimadeeda».

In cabbaar ah haddii hadalkii sidaas ugu soconaayey, baa Goobdoon soo jeediyey iney halkooda seexdaan ilaa waagu ka beryaayo. Gargaarina waa sidey uurka ka rabtey, waa yeeshey. Waxaana la kala jiifsaday masaafo isu jirta hal tallaabo, iyadoo Gargaari xigta xagga galbeed, isaguna dhanka cadceed ka soo baxa

Goorey in cabbaara hurdeen, dayax buuxaana soo baxay, ayaa Goobdoon baraarugy oo intuu sare fariistey eegay Gargaara oo jirjirka si habsam ah ugu jiifta sardhana ku jirta, dayaxii buuxeyna si aad ah nuurkiisii iyo ilayskiisu u hayo.

Inkastoo iney diifeysan tahay ka muuqatey dhibaatadii aawadeed haddana waxaa indhihiisu ku dhaceen sida la yaabka leh



oo laysugu sar goyey sanqarorkeeda, sunniyaheeda, iyo dhabanadeeda inta si habsami ah loo shushubey la moodaayey in loogu dhaashiyey burcad,, ama maakhiri lo'aad. Markuu ka deyma sugan waayey ayuu isha la sii raacay timaheedii oo dherer intey ka qabaan sidii masalle badh goglatey.

Haddaba waxaa dhacday, isagoo weli daawanaayey oo isku leh maxay xabashiyi gabadha sidaas u eg u xumeysey, miyaaney wax laga ciishoodo ahayn, ayey in yar dhaqdhaqaaqdey sidey wax dareentey oo xaggiisii isu soo rogtey. Markaasaa weliba dayaxa nuurkiisii si aad ah ugu beegmay ilaa uu madax iyo labada kub ka arag bogtey, midabkeeduna ugu muuqdey inuu yahay kan Soomaalidu u jeceshahay, oo tiraahdo madowga masciideedka ama maariin dhalaalka ah. Wuxuu Goobdoon ka deyma sugan waayey dhaayahana ku nasiyey kubabkeeda oo maraduu siiyey ka yar faydeyntay. Intaasoo dhan waxaa ugula qaaya weynaa labadeeda mudane, oo ilaaheeda intuu warmo sooyaan ka dhigay, qotomiyey meel iliil shubeenyo malka loogu tala galay.

Siduu u daawanaayey ilwaad samdeeda buu xusuustey sidii silica lahayd oy geedka ugu xirreyd, markaasuuu intuu madaxa ruxay is weydiiyey oo yiri, ragga qaarkiis waa la arkaa iney gabar fara xummeeyaan, laakiinse maxaa keeni kara in waraabe geed loogu xiro qof beni-aadam ah. Naxariis la'aanta intaas le'egse wax bani'aadam ahi ma ku kici karaan. Goobdoon intuu fasaxa yahay wuxuu leeqi kari waayayaa dhibaatada iyo silica ay Xabashidu, dadka Soomaaliyeed ee Hawd ku nool ku hayso.

Sidey maqashay isla faqiisii, iyo tiiraanyo welwelkiisii, amase ay wax u dareentey sidey uurka ugu jirtey, bey intey soo yar toostey suxulkeeda gacanta midig dhulka ku qotomisey, oo calaacasha barkatay, oo tiri «Goobdoonow ma waxaad mooddey inaan gamasanaa? maya indhahaan isku hayee uurka waan ka soo jeedey, waxaa ii dhaantey haddaan wax

gocdey inaan geeriyoodo, oo aan nolol laygu soo gaarin silciiskii aan maanta la kulmay waana mid hurran gabar walba oo Soomaaliyeed sideydaas Hawd kunool in inta dacdarro loc geysto geed waraabayaal loogu xiro. Goobdoonowse u daa ayaandarro Soomaali haysata, oo maalin walba ilaa intaan garaadsadey sidaas ahayd».Goormaa geedkii waraabaha la iigu hoos xiray aan harsan doonaa, halabadiisana xorriyad ku guran, yaa og? bey isugu jawaabtey».

Intaan waagii aad u beriyin baa goobtii laga kacay oo foodda la saaray meeshay Gargaari cidihii ku ogeyd. Wax la socdoba barqo dheer bey afaafka iska taageen rugtii Goobdoon reerkoodu yiil, ugu horreystiiba waxaa aragtay walaashiis Samawada, oo tiri» alla aabbe waa walaalkay Goobdoon, oo dhaawac ah Gargaarina garabka heyso. «Walaal iska warran maxaa ku helay oo aad la dhutineysaa? Markay Samawadii intaas tiri, baa aabbaheedna soo booday oo gacan qabtey Goobdoon iyo Gargaara.

Amminkiiba Goobdoon iyo Gargaara waxaa loo kala hooyey laba aqal, oo waxaa lagu siiyey dhuuni, bacdamaa ay in mudda ah qatanaayeen, in yar ka dibna Goobdoon wuxuu aabbihiis uga warramey sidey Hoolifley u dhacdey baabuurkuu la socdey, Gargaarana uu geed ay ku xireeyd uga soo furay.

Gargaari markay cuntadii la siyey dhammeysatey bey tiri, «aniga halkan fadhi iima yaallo, ee Samawaday gacalo haanta ii xambaari aan gocgoca yar oo ku jira hooyaday la gaaree» Samawadaa markaas tiri «maya aanaa ku sii xanbaariye ii saar. «Halkaasaa inta Samawadii haantii qaadday laysu raacay gurigii Gargaara oo in yar jira.

Mar alla markay ku dhowaadeen cidihii, oo gargaara la arkay baa walaalaheed iyo carruurihii kale ku soo yaaceen, iyagoo leh «bishaaro waa Gargaara oo nool» Gargaari waxay



ahayd curaddii Naalleye waxayna la dhalatay laba gabdhood oo la yiraahdo Haweeya iyo Hodan iyo Hiirad oo ah wiilkii habeenkuu dhashay ay aawadiis dhaanka u kaxaysay markii biyo laga waayey beelihii.

Dadkii ku soo ordey, waxaa ugu soo horreesey walaasheed Haweeya, oo dhalashada ku xigtay, waxayna ku tiri «walaal ma nabad qabtaa? waayo ilaa habeen hore werer baa na hayey, «naa aniga waad i aragtaaye iiga warran hooyo iyo wiilkii murjuca ahaa». Waa caafimaad qabaan labadiiba, ee awrkii iyo dharkaagii maye oo maxaa dharkan kale kuu guntiyey»? Baa Haweyi weydiisey. Samawada tiri, «na iska aamus Haweeyaay, sidey u soo noqotey baaba la yaab lehe, adna dhar iyo awr dhaan baad wareysaneysaa. Iyagoo saddexdii hablood Gargaara, Samawada iyo Haweeya gacmaha is heystaan oo Gargaari u dhexayso baa aqalkii la galay, oo mminkiiba Gargaari Hooyadeed dhabanka ka dhunkatey wiilkii dhashayna dhabtey intey ku qabatey kudaankudisey. Gargaari waxay hooyadeed iyo cidihii uga warrantey markii lagu soo ururay dhibahay la kulantey iyo sidi Hoolifley awrkii uga toogteen, iyadana geed ugu xireen, waxayna aad ugu dheeraatey sidii Goobdoon, isagoo isaguna dhaawac yahay oo Hoolifley heshay geedkay waraabayaasha ugu xirneyd uga soo furay. Sida la filaayo hooyadeed waa xog warsatey sidey wax u yeeleen, hadday u warranteyna, oohin bey oodda ka qaaddey ilaa ay daal la aammustey.

## Dood isweydaarsigii Goobdoon iyo Aabbihiis Samakaab

In mudda ah haddii Goobdoon la baananaayey, kaddib markay lugtii laga toogtey hurgumootey, habeenna badanna uu xanuun daraaddiis hurdi waayey, oo taah iyo laba legdeyn waagu ugu beryey, marna laguba sigtay in addinkiiba inta ilaa kubka ka hooseysa la jaro, ayuu habeen habeennada ka mid ah iyaadoo fiid ah isagoo dhutinaaya u yimid aabbihiis Samakaab, oo dab ku kulaalaaya ardaagii geela. Markaasuu intuu lugtii dhaawacneyd dhiidhiibshey yiri, «waan ladnahay aabbe caawa, oo waanigaa soo tukubey».

Aabbe Samakaab baa yiri: «Ma sidaasaad ku ladan tahay oo tallaabadaadii aad habsamida u dhigi jirtey heeti dhutis cadawku baday? Waxay Soomaalidu ku maahmaahdaa, labo waa isu dhimataa, oo waa labada dhegood labo waa isu oydaa, oo labada indhood, labana waa isu dhutisaa oo waa labadaada lugood. Maandhow intaas ku gaartey baa Soomaali u yar waxay qabto, balse iyada halkaasaan, ku dhaafayaaye, waxaad caawa iiga warrant haddaan in badan wax ku baraayey, oo geel badan aawadaa u iibshey, abtiyadaana kugu tabceen waxyaalahaad ilaa Iglan ku soo baratay aan ku caweynee inta fiidka ah».

Wuxuu ku jawaabey Goobey: «Aabbe waxaan soo bartay mawduucyo badan taariikhdaanse ku wanaagsanahay, mawduucyada kalena, oon bartey waxaa ka mid ah xisaabta, seyniska, iyo jograafiga iwm».

Aabbe Samakaab: «Waa hadal wanaagsane, hadday sidaas tahay xisaabta iyo kuwa kale ma aqaane waxaad wax iiga sheegtaa, taariikhda laguu dhigay iyo sababtaad ugu wanaagsan tahay.

Gobdoon: «ugu horeystii waxaan barashada taariikhda ka bilaabay dadkii hore, ee ilbaxa ahaa sida Masaaridii ilbaxnimada dhalisey, iyo Giriggii, iyo Roomaankii ka daba kacay, markii dambena waxaan gaar u bartay taariikhda Ingiriiska, oo u kala baxsan Biridhis Imbaayarka iyo tan barwaaqasooranka isla markaasna Yurubta kalena kama maqneyn taariikhdeedu. Aabbe nin kastii ha iska hadlee nimanka reer Yurub waa niman taariikh leh dhaqan leh, oo aan la gaareyn. Ingiriisku ha ugu maskax badnaadee, ama ha ugu siyaasad badiyee».

Aabbe Samakaab: «Haahey! ma intaasaad maandhow soo kordhisay sannadihi badnaa, oo kaa dhab ah? Ma lahayn sidaasaa dhici karta, waase, amakaag iyo yaab sidaad qaayo ugu yeeshey taariikhda reer Yurub khaas ahaan tan Ingiriiska, balse yaanan ku afwaajine wax iiga taataabo qaayaheeda aan ku dhegeystee».

Goobdoon: «Amakaag! iyo yaab! ma'aha'e aabbe' ee wax baadan garaneynne, oo odayyaashii maskaxdii hore qabey baad ka hartay, lamana socotid taariikhda iyo ilbaxnimada adduunyada casriga ah, sidey u soo baxday iyo dadkii soo saarey «I am sorry father, is af garanmeyno, oo meel wax ka wada arkimeyno».

Aabbe Samakaab: waa run, oo aragtida midab waa isu eg nahay, aragtidaada fekradeedse adigu waa labeeban tahay ama waa badhxan tahay, waxaadna ka dhigan tahay dawacadii tallaabadeeda ka tagtay, tu kalena gaari weydey.

Inkastoo, Goobdoon uu yar maqlay misane ma ogeyn in aabbihiis yahay shiikh abwaan ah oo gu'yaal badan soo jirey, oo diinta wax ka yaqaan, maahiirna cilmiga iyo taariikhda ku ah. Ogaansho la'aantiisana waxa sabab u ahayd, isagoo yar ayaa magaalada Hargeysa abtiyaashiis loogu geeyey, dabadeedna halkaasuu ku korey, inta badanna hadba aabbihiis wax



ugu diri jirey. Habeenkaas ka horna weli wada hadal ma yeelan, intuu hanaqaaday. Haddaba, waxaa dhacday markuu oday Samakaab dareemay fikradaha Goobdoon qabo, buu u seeto dheereeyey, isagoo tiiraanyeysan oo su'aalihii halkii ka wadey, wuxuuna yiri «Maandhow gartay inaan odayaashii hore ahay, doodna kama qabo in maskax duqoowday igu jirto, balse wixii lays dheer yahay wax baa laysaga sheegaaye wax iiga sheeg Taariikhda aad reer Yurub iyo Ingiriiska ka faanineysid. Teeda kale ogaadey inaad tahay mid hadhiimo ahe, aalaabana waa midey kaala mid yihiin intii ayni iyo fac kula ahi, ee haddaba caawa waa adigii odey dhoys ah, oo maskax duqowey qaba igu tilmaamee, waxaynnu isula soo baxaynaa kutubteenna, ee yaaney aqoontaadu ku gabin».

Goobdoon: Waa tahay bal aan in yar ka taabto waxaan ku qadderiyey taariikhda iyo dhaqanka Ingiriiska. Ta u horeysa miyaadan ogeyn in dunidu u qirsan tahay inuu dumuqraaddiyada ku fiican yahay, oo meel hore ka joogo. Taasna waxaa u marag ah waxaa London gudaheeda ah beer la yiraahdo «Haye Park» oo nin waliba intuu tago wuxuu doono kaga hadli karo, cidina aaney ku qabsan wax aalla wuxuu yiraahd. Xagga murtidana haddii afafka kale loo eego waa ugu horreeya, oo nin la oran jirey Wilyam Shikisbiyeer baa murti xoog leh dhaxalsiiyey, xagga siyaasadda iyada waadba og tahay oo waa wuxuu dunida ku qabsaday, oo waa kan calankiisu noqdey midaan cadceeddu ka dhicin. Aabbe miyaadan Biridhis Imbaayarka iyo Barwaaqo-sooranka taariikhdooda maqal iyo Halyeyada ay ka mid ahaayeen Naabboliyan iyo Shirshel?

Haddaad laasimi lahayd dhegeysiga biibiisiida iyo wararkey tebiyaan Roytar iyo AFP, iyo wakaalado la mid ah sidey adduunyada wixii berri iyo bad ku jira uga warramaan wax baa kaaga kordhi lahaa. Nasiib-darrose adhi iyo geel baad adduun ka taqaan. Waxaana kuu sheegayaa dhibta i heshay

aawadeed inaanan dib dambe Hawd fasax u soo qaadaneyn, oo fasaxayga dambe waxaan ku qaadan intaan lacag urursado London».

Abbe Samakaab: «Maandhow gartay, oo Biridhis Imbaayarku waa gumeysi ku faanka Ingiirse, barwaaqasoorankuse ma barwaaqo uu isagu dadka dheer yahay, oo uu wax ka sooraa, mise waa barwaaqo si kale u muddaahaneysan?

Goobdoon: Barwaaqasooranku waa suuq ganacsi oo ka **dhexeeya dawlado, Ingisiisna boqoraddiisu** waa ka madax.»

Aabbe Samakaab: «Haa! ma waxaan ku daayaa, oo kale barwaaqasooranku inuu yahay sheydaankii xabbadda haruura reerka ku darsadey, oo digsigii la kariyaba wax ku yeeshay?

Goobdoon:: «Maya, maya, sheydaan iyo waxaasi ma jiraan, oo hadda lama rumeeyo, ee waa nidaam ganacsi oo cilmid ku dhisan».

Aabbe Samakaab: «Xagga dimuqraaddiyadda waa lagu ammaanaa, oo waa runtaa, hase ahaatee, ma og tahay inay dimuqraadiyaddiisu laba weji leedahay, oo wejigeeda wacan uu dadkiisa kula dhaqmo sidaad u tilmaameysey, wejigeedaa xunna uu kula dhaqmo dadkuu gumeysto, war hadduu dimuqraaddi yahay muxu Roodisiya caddaanka yar ugu dhiibey? muxuuse ummadda Soomaaliyeed xuquuqdooda ugu xadgudgubey oo gumeysiga madow ugu dhiibey Taariikhaha ahaa 1954 iyo 1963? Xagga siyaasadda waa runtaa, oo tiro ma leh intuu dad shirqooley, oo dalalkoodii bixiyey sida Soomaaliya ama dad soo taagan dalkoodii dejiyey dad kale sida Falastiin, Koonfur Afrika iyo Roodiisiya.

Midda kale, ma og tahay iney jiraan wax cirir iyo daa'iro la kala yiraahdo, dunida waa wareegtaa, ama nolosheedu waa waayowaayo is weydaaranaaya, oo waa



sida qoraxda soo baxda, kor u socota, kugta tagta, hoos u daadegta, dhacda, oo haddana halkeedii hore dib uga soo baxda.

Markaas marka ummadi baar sare gaarto, siyaasad iyo sababa kaleba ha ku gaartee, waa inta daa'iradu u taawilan tahay. Mase og tahay markay heerka ugu sareeya, uguna danbeeya gaarto, in cirir ku toommanaado, oo ay jirto meel ay isku taageyso, oo dib ay u soo noqoto mooyee aaney hore u socoteyn? Taasi waa tan gumeystaha Ingiriis ku sugan yahay, oo waxay daa'iradu ugu taawilleyd xoog iyo xoolo iyo ku dul noolaansho dad kale, maantaa dunidu ku ilbaxday cirirkiina ku jiifaa, ee bal ha la dhowro wuxuu siyaasi ahaa, siduu ugu noolaan karo gasiiraddiisa uu dib ugu hayaami. Waana calaacashaasoo timo ka soo baxaan in calankiisu cadceed casarliiq ma'ahee cadceed subxeed dib u arko.

Xagga tirada afka aan isu eegnee waxaad sheegtaa inta magac Ingiriisku qoraxda u leeyahay?

Goobdoon: ee-ee-ee «Sun» keliya baan anigu aqaan, lase arkee haddaan digshaneeriga baaro iney mid kale jirto.

Aabbe Samakaab: «Haddaba waxaan kuu sheegayaa anaan abwaanka ka eegin intaan xusuus nahay in Soomaalidu siddeed magac u leedahay, siddeeddaasoo ah: Qorax, milic, **cadced, gabbaal, libdha, aas, qundhuco, iri.** Murtida Soomaaliyeed qoto dheerideeda haddaan kuu galo waad amakaagi».

Goobdoon: «Si kastaba ha ahaatee taariikhda casriga waa loo baahan yahay **taaduun laskuma koobo».**

Aabbe Samakaab: «Gartay dhankaas, waana fiican tahay inaad wax ka baratid taarikhda adduunyada, hase ahaatee si aadan doc ugu dheeliyin wax ma ka baratay Taariikhda Soomaaliyeed iyo Afrikada kaleba?

Goobdoon: Wax yar baan ka bowsadey sida gano sigii saddex geeska lahaa oo kale, wax kaloo buuran kama baran, reer Yurub waxayba qabaan in dadka madoobi dhowaan daayeernimo ka soo baxeen, oo dad isu rogeen.

Sidee bey markaas taariikh u yeelan karaan, adaan ku weydiiyayey? Teeda kale waa in dadka reer Afrika ku mahadiyaan ilbaxnimada nin caddii u keenay».

Aabbe Samakaab: «Afrika waxba ku mahdinmeyso rarkii nin caddii rartay, ee waxaa la gudboon iney ku haaraanto, muruqeedii iyo maalkeedii uu dhacay, sidaas darteedna dibudhac wayni ka gaaray xag maskaxeed iyo xag walboo kaleetaba».

Inkastoo aaraadaas lays dhaafsaday haddana aabbe Samakaab fikradaha Goobdoon. aad buu u qawedsanaa Dhawr jeerna wuxuu u holladay inuu faro u qaado, weyse la ahaan weydey, oo u quuri waa. Hadduuse cabbaar aamusnaa, oo calool walaacay marna cirka eegay marna dhulka jeexay, inuu deyrshana ku fikerey, ayse la noqon weydey buu wuxuu soo xusuustay iney ka gar joogeen niman ku oran jirey «War inanka dugsiga (skool ha iska gelin sabatoo ah intuu dhaqan guuro buusan caano iyo biyotoonna noqoneyn. «Hadduu saas ku fekerey, bey misana la ahaan weyday, iney ka gar joogeen, waayo waxaa u muuqatey hadba wixii dhallaanka la baro, oo lagu ababiyo, iney rumeystaan, sidaas aawadeedna aanu Goobdoon denbi ku lahayn fekradahaas uu ku hanaqaadey.

Isla mar ahaantii, waxaa la qaraaaraatey uuna leqi waayey Samakaab, isagoo sidaas isu qanciyey, in wiilkiisii curad, oo uu dhawr iyo tobanka sannadood ka dhursugaayey, oo uu u qaalmo gadaayey u dhaqan guurey, afkiisana ku ammaaney Ingiriis, isagaan sheex yari ku jirin, oo uu goob joog u ahaa intuu gaashaan qaadey, dhibaatooyin badan oo uu ummadda Soomaaliyeed u geystey. Welina uu lid ku sii yahay jiritaankeeda. Dhafoorro hays iyo amankaag waxaa sii geliyey, sida beenbeensiidu u hufisey caqligana uga xadday. Misana waxaa u muuqatey in sidaas si le'eg Soomaali badani la qabto, oo labadii si wareysaneysaaba is yiraahdaan «War hebel warkaas biibiisiidu sheegtey ma maqashay, iyo wallaahi warkaas haddii biibiisiidu sheegtey oo Reuter soo wersey ama AFP wax baa ka jira. Markaas isagoo, ay Goobdoon u raacdey dhaqan habow uu xagga Yurub kala yimid, kama duwanaan karo dadweynahaas iyo qayrkiisa rumeysta warka beenbeensidu ay ulakac iyo kas u soo qorsheysey iney ku jaaha wareeriso dunida saddexaad, Soomaalina ka mid tahay.

Hadday haddaba, Aabbe Samakaab cabbaar waxyaalahaasi caliishiis ku wareegeen, oo uu ciil jiriricaysan yahay, oo Goobdoonna aaney la ahayn inuu wax dhimeyba, oo uu ammaan iyo bogaadsi filaayo inuu fikradihiisa ku helo, ayaa geela hashii u horreysey loo soo godley. Waxaana loo hor keenay liskii hore iney wadaagaan labadoodii, hase ahaatee markii hadhuubkii Goobdoon loo hor dhiibey, oo uu mar muggaabiyey buu odaygii u dhiibey. Ayaandarrose. waxaa dhacday inuu ku diidey, oo ku yiri «waa iga xaaraansan yihiin inaan kula dhamo caanahaad ku kabbatay afka hadalkii la ogaa debnihiisa caawa ka soo baxeen, waana kaa goblamay wiilyahow».

Laba maan isdhaafoo, Samakaab malahayn waa hadhiimo curadkaagu, oo cadho la saranseer, Gobdoonna, wax dareen, doorse isa sii mood, oo isagoo ay ku jirto isla weyni indheergarato buu hadalkii qaatoo yiri, «miyaan gefey aabbe ma meel baan ka dhacay, ii sheeg waxaan ku gefey»? Ma waxaadan rabin cilmiga cusub, oo aan soo bartey inaan wax kaaga sheego. Waxaanba aabbe islahaa aabbahaa ha kugu farxee u sheeg waxaad soo baratay, haddase waxaa ii muuqata inaad waxbarashada iyo ilbaxnimada adduunka rabin. Sidaas aawadeed baad carruurta walaalahay ah, oo iga yaryar wax u

bari weydey, iyadoo isla markaas aad kaga masuugtey geelaagan iyo adhigan abaartu heli doonto, Ingiriisse maxaad u necebtahay?

Aabbe Samakaab: «Tinka doofaarkaan ka nebcahay»,

Goobdoon: «Waxaad heysaa fikradihii ina cabdalla Xasan, oo sida la sheegay gaalo la dagaallan moyee, aan jahaad kiisu cilmi ku dhisneyn».

Intii Goobdoon hadalkaas lahaa odey Samakaab waa aamusnaa oo gadhkiisuu gacanta midig ku salaaxaayey, waxaana ku soo dhacay firkad kala geddisan, oo wahan ku kordhiyey, wuxuu ka yeeli lahaa aqoon la'idiisa, uguna baraarujin lahaahaa taariikh dalkiisa, dadkiisa, iyo halyeeyadii kuwuu sheegay u dhigma. Goobdoon baa haruubkii oo uu weli gacanta ku hayey dhigey, oo yiri aabbe maxaa hadalkeygii kugu kordhiyey, sidaadii ma tihide?

Aabbe Samakaab: «War waad ba fiican tahay haddaad dareenba leedahay, waxaana ku leyahay waxay Somaalidu tiraahdaa saddex xaalo, oo nolosha daka Saameeya garashadoodu waa lagama maarmaan. Tan u horeysa, garasho u lahaanshada wixii tegey, garasho u lahaansho waxa jooga, iyo garasho u lahaansho wax iman doona. Saddexdaas waxaa u hooyo iyo aabbe ah, tan u horeysa. Sababtuna waxay tahay barashada wixii tegay, waxay ku siineysaa hilinka talooyinka jooga oo kula soo dersa, iyo kuwa iman doona. Talo solna ma yeelan karo qofkii aan taariikh aqoon ahayni, garaadkiisa iyo aqoontiisu heer kasta ha ahaadeene. Urugo lehe, wixii Soomaali ahi waa kugu qoslaayaan meeshaad Seyid Maxamed ka aflaggaaddeysey, Ingiriisna ka ammaantay, ee yaan cid kale ku maqlin. Warka beenbeensiida oo adoo kale sidaas dareen li'i u dhegeysto wuxuu Seyid Maxamed ka yiri:

«Nin ku diley adoo dagan hadduu digasho kuu raacsho
Maruun baa deddedu laa kacdq diifihii cudure
Bal dayey dawaa'iga mar buu diirsimaad heliye».



Hohey! hoh goblamey! war sidee baad maanta u dhegeysan kartaa, oo dhegta ugu raaricisaa, una rumeysaa beenbeensiida warkeeda, hannaadow, wixii tegey moogow! harreedow waxa jooga halmaamow, hanfadow wax iman doona u garaad laawow. Waxaan ku leeyahay.

«Ninkii bohosha kugu ridey
Billaawihiisa kugu diley
Kuu raacshey baayaal
Beenbeensi haddaad tiri
Beerka uga buseylaa
Oo misna bir baabliyo
Oo baanadeexiyo
Waa ku baraad li'i
Warkeedaan u bogayoo

Goobdoon: «Hadda ma waxaad leedahay, Ingiriiskii wax i soo barey dhaqan iyo culuunba codkiisa, iyo biibiisiidiisa ha dhegeysan hana qirin ammaantiisa. Isla markaas ma waxaad leedahay biibiisiidu waa beenloowda»?

Aabbe Samakaab «Saddex ma kala taqaan, been, been run u eg iyo run? »

Goobdoon: «Run iyo been waan aqaan, been run u egse bal tusaale.

Aabbe Samakaab: Been run u eki waa jirtaayoo, waxaa tusaale ah, laba nin baa beri la yiri beentey isla yiqiinneen, oo marka mid been sheego, ayaa kana kale run u ekeyn jirey. Waxaana jirtey maalin maalmaha ka mid ahayd iyagoo shir lagu badan yahay fadhiya, ayaa midkood yiri, «War hebel waxartii samada ka qaylisay ma maqleysey? Waa tab laysla yaqaannaaye, kii kalaa yiri,» Wallaahay waa runtaayoo waxarta samada ka ciday baqalyaa sitey». Shir weynihii rumeysey, waayo si kale waxari samada kuma tegi karto baqalyoo qaata maa'ahe.

Wax su'aal ah kama yeelan dadkii shirka oo waa rumeysteen beentey runta u ekeysiiyeen labadii beenlow. Markaas kuma lihi beenbeensiiduu been bey sheegtaa, laakiinse ogow iney jirto been run u eki, oo doqoni ma garata ahi, sidaas tusaalahaas oo kale.

Ciilow ba' war miyaadan ka damqaneyn, oo jiidhku urugo kula dubaaxineyn, nin ku xiray, nin kuu seeto dhigay, siddeetan sannacood sare u qaadkiisu. Waxaan kaloo ku iri:

Wiilyahow qawedey, qiimahaad igu la weyneyde
Qolfi iyo waxaan kugu maleyn, qiiro laawiiye
Qalwo oodan bey kugu rideen, qorimadaadiiye

Haddaad qaaya leedahay, sideer uma qalweyseen
Sidii qaydhab baluuqay dheh uun uma qalaaddeen
Urugaad baad qaansami lahayd, qamahigeediiye

Ninkii qaawi kaa dhigay, markuu qoobey aradkaaga
Oo shalay ku qawlalay markuu, qaran ku waasiiyey
Miyaan qaalmahow gaday, inaan qiro ammantiisa

Qoomahaas ku gaariyo, iugtaad qaadi kari weydey
War qamuunta iyo weyda aad, qulub madoobaatey
Ninkii qaanta kaa galay, miyaad weli qaraabeysan

Taariikhdey qalloocina hayaan. qodobadiiye
Haddii ay qumaati u dhigaan qulub ma joogeene
Nin madoobi qaayuhuu lahaa, quudhsi laga yeelye

Qalalaaska taagani adduun, qulubo weyn reebye
Qara xume ninkii Yurub fadhiyey qaxooti weeyaane
Qaaraddaan ku noollahay, ayuu dib u qasaayey.
Raggiise qaydinkow luli lahaa, waadiyo qayrkaaye
Ha yeeshee, waxaan qoommameyn, qala la'aantaada

Goobdoon marka dib loo raaco tacliinta waa ku wanaagsanaa, awoodna waa u lahaa inuu barto wuxuu rabo, hase ahaatee nasiibdarro wuxuu ka mid ahaa inamada dhifka ah, oo iska dhega tiri jirey ama ka hawoon jirey sidey damqayaan dhaqanka iyo taariikhda dadkiisiyo dalkiisa, oo wuxuu u kal iyo laab debecsanaa ama u hanqal taagi jirey, ilbaxnimada iyo barashada dhaqanka reer Yurub.



Haddaba intii aabbihiis Samakaab watey dooddaas dhirfoon, Goobdoon siduu denbiile yahay indhuhuu siin waayey aabbihiis, marna sidii la oroorshey waa maan dhoofsanaa, aakhirkiina wuxuu gaarey inuu qiro in laga il helay, sidaas darteedna wax korodhso ma'ahe inaanu asaraar danbe u noqon, wuxuuna yiri, «waxaan maqli jirey Soomaalidu waxay tiraahdaa nin gu' kaa weyn il quruxeed kaa weyn. Markaas wax badan oo aan beylihiiyey baad iga badisaaye maad ii dhigtid».

Aabbe Samakaab: Habeen danbe dayaxu waa afar iyo tobnaad, waana if badan yahay, markaas isagoo ifkaas leh, haddana dabka dogobyo waayeyn u soo qaad, si aanu boqol jir irbad lifaaq ula waayin, halkaasaan waxaad taariikh iyo dhaqan beylahisey kaaga bilaabayaaye.

# Soomaaliya iyo imaatinkii gumeystayaasha Reer Yurub ka hor

Habeenkii dambe markii xoolihii soo hoydeen lana li-say geeli ma'ahe, qayladii iyo cagtiina go'day baa Goobdoon iyo aabbihiis Samakaab isugu yimaadeen golihii geela iyadoo bulsho kale, oo ay ka mid yihiin Goodoon walaal-kiis Raage fadhiyaan. Habeenkuu wuxuu ahaa siduu sii shee-gay Samakaab habeen cadda ah, oo waxaa jirtey dayax afar iyo tobnaad, ninkii indhihiisu fiyow yihiinna dabkii oognaa, iyo kaaha dayaxa jrey irbad lifaaq la ma waayi kareen. Markaasaa sidii ballanku ahaa, wuxuu Goobdoon soo qaatey qalinkiisii iyo buuggiisii oo intuu hadalkii qaatay yiri, «horta aabbe waxaa xalay ii if baxay haddaan wada sheekaysannay wax badan oo aan mogahay ood i dareensiisey. Markaas inkastoo aan aqoon dheeri iyo ilbaxnimo is bidaayey hadda muuqatey inaan ilduuf iyo habow ku sugnahay. Isagoo hadalkiisii wata buu Goob-doon yiri, «haddaba iyadoo hore loo yiri, markaad is biddid inay oqooni kuu dhan tahay, ayaa loo qoon liitaa. Waxaanna ilaa maanta hadba soo gocanaayey wax iga diimoonaa, oo aad misana ii hodoodishay, waxaan markaas kaaga magan ahay inaad iga jaahil bixisid taariikhda aad i dheer tahay khaasa-haan tan ummadda Soomaaliyeed ilaa asaaskeedii iyo hadba heerkay joogtay ilaa beri samaadkii. Hana igula yaabin shee-kadii aan xalay ku eedoobey waayo waa mid facayagu intooda badni ila qabaan».

Aabbe Samakaab: «Waa runtaa oo wax badan ayaad moogtahay,. Waana arrin jirta in dalalkii isticmaarku qabsa-day waxyeelada u weynaa ay ahaayeen taariikhdooda oo uu tir-tiro, hiddihiyo dhaqankooda oo uu qirsiiyo iney xun yihiin oo badaw yihiin. Sidaas dareedna ku baddelaan dhaqanka loo soo dhoofshey.

Dhaqan guurka iyo taariikh tirtirka waxaa ka daran oo kaga waxyeello weyn dalalka Afrika iyo kuwii kaloo la gumeysteyba, maskax habowga la gaarsiiyey bulshada, waayo beni'aadanka maskaxdaa u khasnad ah, oo uu wax ku hindisaa, wax ku gartaa, wax ku solaa, markaas mar haddey nuglaato oo kalsooni darro gasho hindisena ka harto, waa hoog iyo ba daaweynteeduna adag tahay.

Goobdoon: «Gartey intaas waa arartiiye bal ii mari ubucda taariikhda iyo dhaqanka Soomaaliyeed».

Aabbe Samakaab: «Waad i hiyi kicisey caawa ee hawraarsan, sidaad warsatey taariikhdeenna intaan ka aqaan waan kuu tifaftirayaa, anoo aan iniq yar dhaafeynin, hadbana hirkaynu dhaafno ma'ahe mid kalaan geleynaa, ee waa inaad buuggaaga ma'ahe meel kale eegin, wax kalena ka fekerin, ilaa aan dhameystirana waxba ha iga weyddiin, sababtoo ah waxaan akhristay iyo waxaan baadhey ka sokow afar boqol.oo sannadood baan taariikhdooda caawa iyo habeen danbe kuu abyayaaye. Afartaas boqol, oo sannadod boqol sano anaa jogey, oo wixii dhacay goob joog u ahaa. Boqol kalena aabbahay, baa jogey, oo sheekadooda i siiyey, labada boqol oo kalena wixii dhacay aabbahay aabbihiis buu ka soo gaarey aabbihiisna aabbihiisii kale oo ah awowgaygii labaad adna ah kaagii saddexaad oo duullaannadii Lasla, Ifat, iyo Daawo, oo Soomaalidu ku qabsatey ku jirey baa la iiga weriyey.

Si ay dubaaqaaga u gasho waxaan kugu baraarujinayaa arar gaaban oo ku saabsan noloshii dadka Soomaaliyeed, intaanan u guda gelin aanada Somaaliyeed cidda qabta iyo hiirta-anyooyinkii iyo debendaabyooyinkay inoo geysteen gumeystayaashu markay dalka Soomaaliyeed qaybsadeen afarta cadow, oo kala ah gumeystaha Ingiriiska, Faransiiska, Talyaaniga iyo Xabashida, ha u weynaadee cadow Ingiriis'e sababtana waad garan doontaa markaan aragto.




Ugu horreystii ummadda Soomaaliyeed waxay ku dhaqan tahay geeska Afrika, oo ah halka ugu horreystii cadceeddu qaaradda Afrika aroortii ka so salaanto. Sida lagu hayo taariikhdana waa dad Afrikaan ah, oo geeska ku noolaa kumanyaal sano ka hor waxayna baho wadaag yihiin oo cid isu gu xigaan marka xagga cilmiga laga eego afkay ku hadasho, iyo dhaqankaba dadka reer Soomaali Abbow loo yaqaan, oo inkastey aad uga fara badan yihiin, misana ay Xabashidu gumeysato, oo taariikh iyo waxay dhaqan lahaayeen ay tirtirtey.

Waxaana waayihii hore loo yiqiin «Waddankii Udgoonaa» oo jaawiga, muxorka iyo meydiga laga guran jiray iyadoo adduunyaduna aan meel kale ka heli jirin. Waana dal loogu deeqay xoolo, ugaadha ku noolina ay tiro dhaaf tahay, oo deeradiyo cawshuba, gerigiyo farowguba, biciidkiyo garanuugtuba, jeertiyo jaxaaskuba, wiyishiyo maroodiguba ay raxanraxan duurkiisa ugu nool yihiin. Isla mar ahaantiina, shabeelka ku nool noociisa aan dunida meel kale laga helin.

Dadka Soomaaliyeed wuxuu caan ku yahay, inuu adkaysan u leeyahay oonka gaajada iyo daalka, waxaana loo yaqaan dad martisoorka iyo deeqsinnimada aad ugu wanaagsan.

Sida loo maleynaayo qarnigii 7aad iyo kii 8aad, ayaa diinta islaamku soo gaartey dalka Soomaaliyeed, si barashada quraanku ugu dhib yaraatona waxaa higgaadda af Soomaaliga ah «alif la kor dhebey, alif la hoos rebey» dejiyey Shiikh Yuusuf Alkooneyn (Shiikh Barkhadle) oo isla markaasna hormuude u ahaa diinta Islaamka fidinteeda.

Rag badan, oo taariikh qorayaal ahaa, oo ay ka mid ahaayeen Ibna Batuuta, iyo Ibna Khaldun, ayaa wax ka qorey markay dawladdii Adal dhisneyd qarannimada iyo noloshii dadka Soomaaliyeed qarnigii 14aad Wuxuuna Ibna Batuuta qorey markuu sahan ku yimid magaalada Seylac 1331 iney Ummadda Soomaaliyeed ahayd qarnigaas ummad madax banaan.



Geesiyaashii Axmed Gurey, oo dhagax ku dilaaya Taliyihii Ciidammada gumeysiga Boortaqiiska (Kiristoofar Fasko Daggaama (Christopher Vasco da Gama) ee Xabashidu u yeertay inuu u hiiliyo.

# HALGANKII 1aad EE AXMED GUREY

«Gobannimo waxaa lagu helaa, gawrac iyo dhiige
Gaajiyo halaag baa la mudan, gooshinnada dhowe
Ninkii go'idda diidow, adaa gabay halkaagiiye.

Rag la rumeysan karo, oo ay ka mid ahaayeen Cali Saalax iyo Axmed Daahir, baa waxaa laga hayaa iney ka weriyeen **nin la dhihi jirey Saciid Yoonis**, inuu habeen isagoo **hurda riyo lagu tusay, Nebi Maxamed Salaani** korkiisa ha ahaatee, oo uu Abokor Sadiiq dhanka midig ka xigo, Cumar Bini khataabna dhanka bidix, Cali Bini Abi Daalibna ag joogo. Cali wcxuu gacmaha ku hayey Garaad Axmed (Axmed Gurey) markaasuu sida la weriyey riyoodihii ku yiri, «Yaa rasuulullaahi waa kuma ninka Cali gacmaha ku hayo «Wuxuu ugu jawaabey Rasuulkii», waa nin Ilaah u soo doortey **inuu Xabashida toobiyaha toosan iyo Islaamka** ku soo duwo» (1).

Waqtiga ninkaas riyada lagu tusay Axmed Gurey, wuxuu ahaa dable caadi ah, oo Ciidankii Garaad Abboon ka mid ah, riyadaasi ka horowna ma arag Axmed Gurey. Haddaba waqtigii Garaad Abboon xukumi jirey Harar, ayuu riyoodahaasi socdaal ku yimid magaalada Harar, markaasuu riyadii dadkii u sheegay sida loo tusey.

Waxaana dadkii weydiyeen inuu, Garaad Abboon ahaa ninkuu riyada ku arkay «Wuxuuna ugu jawaabey inaanu ahayn, waxaana dhacday in dhowr Garaad oo kale la tusey, oo mid walba yiri, malaha sifihii laygu tusay, ilaa ugu danbeystii

(1) Shabaabaddiirin, Futux, Tex iyo J. S. Trimingham Islaam in **Ethopia page 85.**

markuu Axmed Gurey Saldanadii qabsaday uu soo sumad soocay oo uu dadkii yiri «waa ninkaas Axmed Gurey la yiraahdo ninkii riyada laygu tusay isagoo rasuulkii iyo Asxaabtii la jooga, rasuulkiina ishaaray».

Axmed Gurey Ibraahim Qaasaalli wuxuu dhashay markay taariikhdu ahayd 1488, wuxuuna ku dhashay tuulo yar, oo la oran jirey «Hobt» kuna taal dhinaca waqooyi ee magaalada Harar:

Yaraantiisiina wuxuu ku barbaaray Hobt, oo u dhaxeeysa Gildessa iyo Harar, waayihii danbena uu saldhig uga dhigtay Ciidammadiisii.

Inkastoo dhalashadiisii siyaabo kala geddisan ay ka qoreen kuwa lid ku ah, guulihisi, ayna yiraahdeen sidaney ahayd iyo sidaney ahayd dhalashadiisu, haddana marka laysu minguurshey xubnaha taarikhdiisa laga hayo, shaki kuma jiro inuu Axmed Gurey Soomaali dhalad ahaa.

Magaciisa (Gurey), iyo kii awowgiis (Qaasaalli), oo labadduba si caddaan ah loo garan karo, iney magacyo Soomaaliyeed yihiin ka sokow, waxaan shaki ku jirin inaaney u suuragasheen nimaan qabaa'ilkii Soomaaliyeed, ee waagaas ka dhalan, inuu madax u noqdo kumanyaal iyo kumanyaal Ciidamo Soomaali ah, isla markaasna jahaad dheer u hoggaamiyo. Waxay keliyo u suurageli lahayd nin quwad ku qabsaday, oo markaas dagaal khasab ah geliyey. Taasna taariikhdu ma sheegin. Sidaas darteed baan markaas shaki ugu jirin inuu Axmed Gurey Ibraahim Qaasaalli u ahaa dhiig iyo dhacaan Soomaali dhalad ah.

Waxaana tusaale la mid ah loo soo qaadan karaa markay gumeystayaashu Sayid Maxamed Cabdulle Xasan ku sheegeen wadaadkii waallaa «Mad Mullah» si ay u maamuus iyo magac dilaan Soomaaliduna waxay leedahay maahmaahda ah, nin laga adkaaday caytan, sidaas aawadeed baan loo tixgelin karin waxay ka sheegeen Axmed Gurey, cadowgiisii iyo kuwuu ka libeystey, oo wax ka soo qaad ma leh waxay ka qoreen Xabashidiyo Boortaqiiskuu wadajir u daanduunshey.



Waxaa la weriyey inuu yaraantiisii ku barbaaray Harar oo uu mararka qaarkood ardo xer la socon jirey, sidaasna quraanka ku dhameeyey, culuunta kale, oo islaamkana heer sare ka gaarey, waxaana la sheegay iney arday wada ahaan jireen Xuseen Gaatiri, oo markii dambe abbaanduulayaashiisii ka mid noqday.

Wuxuu ahaa intuu yaraa, oo aanu weli hanaqaadin inan legdinta iyo fardafuulka jecel. Taariikhda qaarkeedna waxay leedahay gurranaanta kuma dhalane, fardafuul ayuu gacanta midigtu kaga jabay dabadeedna bidixdii baa midig oo kale u noqotay.

Taariikhdiisa raggii u kuur galay, waxay ku tilmaameen inuu Axmed Gurey ahaa nin laxaad leh, oo buruud u dhashay, geesinimadiisuna xad dhaaf ahayd, oo biima kasta oo ka hor yimaada food saari jirey. Waxaa aad loogu tixgelin jirey xirrib dheeri, degganaansho, afmaalinimo, iyo xubna kale, oo uu aad ugu qaaya lahaa, oo ay ka mid ahaayeen masayinta uu maseeyn jirey raggiisa iyo wixii islaam ah, oo jahaadka kula jirey. Waxaana baraarujiyey dareenkiisa, iyo shucuurtiisa gobannimo jacayl, iyo ka soo horjeed gunnimo, iyo fidinta diinta islaamka.

Waqtiguu Axmed Gurey hana qaaday, waxaa dhisneyd dawladdii Adal, oo is haysatey Harar iyo ilaa Saylac, badda cas oo dhanna xukumi jirtey, waxaana madax ka ahaa Amiir Maxfuus oo Axmed Gurey markii dambe ka guursaday gabartiisii jahaadka ka qayb geli jirtey lana oran jirey Dalwaambara Maxfuus. Inkastuu Amiir Maxfuus madax u ahaa dawladii Adal, waxaa misana jirey Suldaanno hoos iman jirey, oo uu ka mid ahaa Suldaan Abuubakar, oo Harar xaruntiisa ahayd. Dawladda Xabashidana waxaa xukumi jirey oo boqor

u ahaa Lebna Dengel, dagaallo badan baana had iyo jeer dhex mari jirey dawladdi Adal iyo Xabashida. Waxaana la sheegay in goobtii dagaal cadow ugu horreysey Axmed Gurey inkastuu dabayaaqadiis yimid uu ahaa mid Boqorkii Xabashida Ciidammadiisii ay aad ugu gobood faleen dad Somaaliyeed. kaddib markay gibir le weydiiyey ku gacan seyreen, halkaasna waranka lays geliyey oo lagu mooraduugay mood iyo nool. Markii dagaalkii dhammadey wuxuu Axmed Gurey goobtii ku arkay waxyaalo foolxun, oo ay ku kaceen Ciidammadii Xabashidu. Waxaa dhacday, baccamaa uu gadaal ka imaad ahaa inuu dadkii goobtii ku warsadey sida wax u dhaceen. Waxaana la tusey araggii u horeeyey dad badan, oo dumar iyo carruurba leh, oo inta laysku xiray iyagoo nool la xabaal nololiyey, wax buuna ka faagey. In yar hadduu meeshii dhaqaaq joogsadey wuxuu misana soo dul joogsaday nin inta la qaawiyey jirjirka loo jiifiyey, oo afarta waxood qoryo lagaga tigtigay. Ninkii buu dhab u fiiriyey wejigiisii, mise waa macallinkiisi quraanka u dhigi jirey Aw Haaruun, oo sidaas cadowgii u galay markay wadaad u garteen. Intaas hadduu la kulmay, oo urugo iyo ciil la ilmeynaayo, uuna is yiri wax danbe ha sii eegeegin ayaa waxay ishiisu dululaati ka aragtay dhaqdhaqaaq aan ka fogeyn. Dhaqdhaqaaqii buu yar finiigsadey, mise ciilow ba'e, waa ilma yar, oo aan weli la abeydin, oo hoyadiis la dilay, meydna ah, naasaheedii hiigaaya baahi daraaded. Halkaasuu intuu dul tegay ilmihii kor uga dhuftey, oo tuurta ku qaaday, isagoo aan meel uu joogo is garaneyn, oo murugo aawadeed caga jiidaaya. Ilmihii wuxuu noqdey, wiil waxaana loo bashay Haatuf, oo waayihii danbe markuu koray Ciidammadii Axmed Gurey buu ka mid noqdey, meel sarena ka gaaray.

Haddaba waxaa dhacday in inankii yaraa, oo uu dhabta geliyey habeenkii oohin la kacay isagoo leh «hooyo hooyo» markaasuu Axmed Gurey intuu jiifkii ka soo toosay is yiri aamusi, hase ahaatee wuu kariwaayey hadduuse cabbaar ooyey oo uu xabeebtay buu daal la aamusey, waxaase timid in Axmed Gurey dib dhinaca dhulka u dhigin, oo intuu



iska jilib xirtay dabkii dul fariistay. Isagoo haddaba dabkii dul dhul fadhiya baa waxaa ku soo toosay Jaallihiis Xuseen Gaatiri, oo markaas ku yiri «maxaad la gami weyday «wuxuu ugu jawaabey» Gaatiryow miyaadan goob joog u ahayn guuldarradii maanta? Haddaadan goob joog ahayn miyaan war kugu soo gaarin ardaashii dooxatada ahayd hooggiyo halaagay dadkeenna u geysatey galabta iyo sidey samayooyinka ula dhacday sebi iyo sirqayba? miyaanuse ku beer qaadin ilmahan yar oo gaajada labaday hooyadisii haadku hiigey u gocosha ooyaaya? Allow yaa Haatuf baan u baxshee markuu qaan gaaro i gaarsiiya. Gaatiri baa hadalkii qaatoo yiri, «Qoor iyo xero waa wax laga geylamaa gacan laga geystaa, waayo waa liidnimo in boqor ku sheeggaasi ulakac u dooxdooxo dadkeenna. Miyaaney sidaas ahayn Gurayow? Markaasuu Axmed Gurey yiri, Waa urugo iyo ciil iyo wax aan loo adkeysan kareyn.

„ Markuu intaas Axmed Gurey yiri, baa Gaatiri beeg u fariistey, bulsho kale, oo dhegta ka maalaysayna madaxa la wada soo kaceen, soona wada ag fariisteen Axmed Gurey iyo Xuseen Gaatiri. Markaasaa nin la oran jirey Cadli oo Axmed Gurey gacanta ku hayn jirey hadalkii qaatoi yiri, «nimanyahow arrintaas waxbaa ka jira, oo waa arrin aynu la wada labalegdooneyney, hase ahaatee Axmed Gurey baa xuub dillaacshey, warkaas yaan la sahlan, ee arroorta ha layska arko.

Sida dhaaxaa, iyo aalaaba la arko, aduunyada ragga halgeyda iyo geesiyaal qaran noqda, waxaa had iyo jeer la helaa inay jiraan waxyaalo ay ka damqadaan, ayna dadkooda ugu dhiidhiyaan, waxyaalahaasaana ku tallaala qiiro iyo shucuur dheeraad ah o aahirka sabab u noqda in ay la yimaadaan karti miiganaan, ilaa ay himiladooda iyo hadafkooda gaaraan oo waxay ka dhiidhiyaan guul libin ka hooyaan.

Sidaas darteed, Axmed Gurey galabtuu saymahaas la kulmay buu ugu horreystii dhalan rogmey, oo tiiraanyo iyo ciil ku biiray aawadood gaaray inuu dhallinti, ay isku xer iyo fac

ahaayeen ururiyo, oo ka dhaadhiciyo in loo baahan yahay, iney ka geylmaan xumihii lagu sameeyey, lagana aarsado boqorkii Xabashida iyo colkiisi, oo si joogta ah dadka u dhici jirey, intey dhulkooda ka soo duulaan. Hadduu in mudda ah sidaas ku guubaabinayey dhallin badanina ku raacday, baa maalintii danbe Xuseen Gaatiri soo jeediyey inaan waxba laga tari karayn cadowga hadddan cid loo garabsan. Waana ka garowsaday fikraddaas Axmed Gurey.

Waxaana lays tusey haddii la gorfeeyey in la aado magaalada Harar halkaasoo ay ka dhisneyd dawlad Islaam ahi, oo uu madax ka ahaa Garaad Abboon, ayna col ahaayeen Xabashida, dagaallana dhex socdeen. Hase ahaatee waxaa la sheegay, intaaney tegin magaalada Harar iney lug ku tageen gobollo badan. Gobolladaas waxaa ka mid ahaa Seylac oo markaas dawladdii Adal ka dhisneyd. Muddo dabadeedna Harar bey ku noqdeen halkaasoo ay kula kulmeen Ciidamo loo qoraayo dagaallo cusub oo dhex socdey Garaad Abboon iyo Xabashida. Waxse jirtey in nidaamka loo qaadan jirey dagaalamayaasha uu ahaa in laba inanba la legdansiiyo oo hadba kii adkaada la qaato. Waxaa jirtey inay Axmed Gurey iyo Gaatiri ka war hayeen habkaas, markaasna ay ka faa'iideysteen, oo ku soo heshiiyeen in midba mar la legdo mar saddexaadkana barbarro la noqdo, si aaney u kala harin, oo loo wada qaato. Markii fagaarihii la keeney baa midba mar la legdey, mar saddexaadkiina barbaro la noqdey, laba goor oo kale, ayaa laysku celiyey, waxayna noqdeen sidey ku soo tashadeen barbarro, dabadeedna waxaa Garaadkii ku faalleeyey iney labadu yihiin laba aan kala adkeyn, oo wuxuu ku daray colkii la qaatey.

Muddo yar dabadeedna markuu ka qayb galay dhowr goobood, oo qarqaraaraa, ayna u caddaatey Garaad Abboon inuu Axmed Gurey leyahay ragannimo dheeraad ah, iyo geesinnimo, isla markaasna madaxnnimo qaadi karo, ayuu ka dhigtay gacantiisa midig, taladii iyo maamulkiina wax uga dhiibey.



Haddaba waxaa dhacday isagoo Axmed Gurey 19 jir ah, hase ahaatee uu waaya-arag noqdey tiisa ku meel mari karayaa dagaal dhex maray Garaad Abboon iyo Suldaan Abuubakar oo duriyadii Sacadaddiin ah. Waxaana la jebiyey Garaad Abboon iyo Ciidankiisiiba, isagiina waxaa lagu dilay Seylac 1525, hase ahaatee Axmed Gurey wuxuu la fakaday wixii colkii Garaad Abboon ka haray, wuxuuna ku urursaday Saldhigna ka dhigtay magaalada la oran jirey Hobt.

Hadduu in mudda ah degganaa «Hobt» oo Ciidammadiisii habeystey, oo ragguu ka mid ahaa Cadli wasiiro ka dhigay, ayaa markay taariikhdu ahayd 1527 qaylo dhaamo looga keeney; in dadkii Soomaaliyeed iyo Islaamkii kale, oo weheliyey oo degganaa galbeedka Hobt Ciidammo dooxata ah, oo Xabashi ahi dhammeeyeen, iyagoo aan u miidaan deyin maato iyo tamar leh, xolihiina dhaceen, kaddib markay diideen iney bixiyaan gibir la saaray. Ciidankaasna waxaa watey oo madax u ahaa Boqorkii Xabashida Lebna Dengel Sedigiis Deglaham.

Iyadoo, ay tahay xubin ninkii madax ahba looga baahan yahay inuu yeesho, buu Axmed Gurey wuxuu ku ammaannaa oo burji ku lahaa, hoggaan qabadka ragga iyo maamul ciidan, oo had iyo jeer markuu Ciidankisa jahaad gelinaayo, wuu guubaabin jirey oo afeyn jirey. Aadna wuxuu ugu baraarujin jirey ulajeeddooyinka jahaadka, iyo himilooyinku rabey inuu guul ka gaaro, ha ahaato xagga Soomaalinimada waddanninimada, ama ha ahaato hirgelinta, iyo fidinta diinta Islaamka, iyo dabargoynta kufaarta. Wuxuu markaas maalintaas ka bilaabey khudbaddiisii.

«Gole weynow; salaan diirran guudkiinna ha ahaato, waxaa ii raaca salaanta war dhiilla ah, oo i soo gaarey, idinna aad dareenkiisa qabtaan ee bal dhab u dhegeysta. Waayo waa war aaney u sinneyn ninkii xumaha iyo gardarrada ka dhiichiya, iyo kii dhiig iyo dhow laawe ahi. Waa war geesigii maqlaa hurdo aanu gam'ayn, gasiin aanu cuneyn. Murwadii maqashaana ilmadaa gobo layn, tiiraanyana wey la godnaan. gobolan sidii loogu war shegayna asey bey ku dednaan.

Warkaas dhiilada ahi, wuxuu sheegayaa in dadkii Soomaaliyeed iyo Islaamkii kale, oy wada degganaayeen, ay Ciidammo Xabashi ahi duoxata ahi laayeen, wixii duunyo ahaana dhaceen kaddib markay diideen baad iyo gibir uu rabey in laga soo qaado Boqorka Xabashida, Lebna Dengal.

Ragyahow; waa maanlin daranoo hubbaannidiyo hadhaaguba nafta aaney huri hayn, oo hagarbixid li'idooda haybadi ka dheer tahay. Bal dayaay! dadkeenni sida aabiga loogu laayey, iyagaan u miidaan deyn maato iyo muruqle. Ma mid la qaadan karaa? Ma mid la dugsan karaa? (Maya, maya, maaha wax la qaadan karo, bey ku bulaameen colkii oo dhammi) waxaan idinku guubaabinayaa in jahaadka maanta bilaabmey uu aad u daba dheeraanaayo ilaa aynnu tirtirno waxa lagu sheegaayo baadda iyo gibirka, oo maalin walba nin boqor ah loogu guraayo. War miyeydaan maqal dhaqankeenna, iyo Islaamku iney xaaraan ka yihiin, in sannad walba boqor ku sheegga gabarta dalka u qurux badan loo xulo, oo markaas gabartaas inta la sii guunaanado lana axmo, dabadeedna iyadoo nolol ku kafnan saas hadiyad loogu geeyo. Miyeydaan maqal inuu dadkii ku sandulleeyey inaaney hub qaadan, oo fardaha kore la'aan iyo leeddo ku fuulaan. Ninkii quudhsi yeelaa abid kama hartoo, oo dhashisey sugtaa. Gobannimo, haybad iyo sharaf leh, hase ahaatee hilinka loo maraa halaako, iyo hiirtaanyooyin badan leh. Harraad iyo gaajo, iyo gawrac iyo dhiig leh. Waxaana hanta ninkii biime u gala, oo ka geylama wixii gardarrooyin iyo maamuus xumo ah.

Garaad Axmuushow, Xuseen Gaartiriyo. Cadli, iyo Haatuufow abbaanduulayaashow, kuwii saha kacay la rabey iney samayooyin ka simaan colkoodow. Soomaali, iyo wixii diinta Islaamka ku midebayow, waxaan ilaahii waaxidka ahaa, iyo Rasuulkiisii salaani korkiisa ha ahaatee, ka ballan qaaday, nidarna ku galay, inaan dabarka ka furo weerar aan dami haynoo doog iyo dacar ku reeba Qibdiyiinta Xabashida ah, iyo wixii la halmaala ee ballan iyo nidar may la gasheen? (Haa! haa' kula gallay, bey u dhawaaqeen col weynihii).

Bal maleeya ragow, saymihii, iyo silicii labaday dadkii boqorku iyo colkiisii dhaceen, oo la gubey, la xabaal nololeeyey, ama guud ahaanba



la oran karo, ifkaa lagu kadeeday. Waayo, sidaad ogtihiin waxaa laba geeriyood ah, nafta qofka lagu silciyo. War waa ciil calooshu hayn weydey. Waa urugo uur celin waayey, oo waa tiiraanyo, iyo taah iyo qiiro bi'i waayey. Waxaad ogaataan iney lama huraan tahay, in kolleyba col duuley uu la kulmaayo gaajiyo harraad badan, gawrac iyo dhiig, iyo naf bax. Hase ahaatee, kuwaas la'aantood, iyo hiirtaanyooyin kaloo raaca, libin gobannimo lama hantiyi karo, sidaas darteed, ninkii u nuglaadow adaa gabay halkaagii.

Hadalka waan ku dheeraaday, intaanan soo gabagabeyn, waxaa garasho u baahan, waxaan u jahaad tamayno, oo hadafka iyo himilooyinkeennu yihiin. Ninkiise aan sida la rabo u halgami, maxuu galabsanaayaa, kii diric ah, oo geeriyoodaa ama ku guuleysta halganka, muxuu mudan yahay if iyo aakhiro? Jahaadkeennu Soomaaliyeey waa jahaadkii Islaanku ku genbiyaayey kufaarta. Hadafkeennuna waa ka xoreyn dadkeenna boqortooyada budhcadda ah, oo xumaha kula kacday inta degta Webiga Shawa ka shishow.

Ogaadaay, waxaa raggi hore laga hayaa, oo ay yiraahdeen, labo waa ku hareero socdaan,oo waa faa'iido iyo khasaare, labo kalena waa ku gadaal socdaan, oo waa gabow iyo geeri, oo haddii midkood ku daayo kii kalaan ku deyneyn. Haddaba markaas waxaa hubaal ah, in nin waliba godka aakhiro u hoyan doono, oo uu lama huraan yahay. Waxaa jirta, oo aan muran ka joogin, inuu yahay ninkaan ifka magac iyo ragganimo kaga tegin kan geeriyooda. Sababtoo ah, ninkii raggannimo la yimaadda, oo maalin ay car iyo wirey joogto kaalin adag iska muujaa, haddu noolaado waa u magac iyo maamuus intuu noolyahay. Hadduu dhinto jiidhkiisa baa uun ciidda hoos mara'e, magaciisu waa ka jira, aakhirona waa u janno.

Waxaa la yiraahdaa hadal weel ma buuxsho, hase ahaatee niyad dikaantay iyo himmad hasowdey, buu baraarujiyaa, afeeyaa, oo himilooyin maqnaa iyo dakanooyin tusaayaa. Markaas war bi'i waayee waa inoo hiirta waabberi, fardahoo heeseysan, oo aad caawa dhaxanta ka deddaan, iyo hubkii samayooyinka iyo garmaqaate lahaa, ood dhammaan wadataan haynoo ahaatoo. Haatuf maxaad ku dari lahayd».

Markaasaa waxaa golihii ka dhex kacay nin la oran jirey Haatuf, oo yiri. «Waxaan ku darayaa gole weynow, fardahoo heenseysan, idinkoo hubka qaatey, hadafkii Axmed Sheegay iyo himilooyin jahaad, hiyigiin ku adkeeya ku haasaawi alleylka, oo banka keen isugu keena marka oogtu dillaacdo;

Rag meel uu joogaba aalaaba libin isuma oggola, hase ahaatee, khudbaddaas uu maalintaas Axmed Gurey akhriyey, waxay taagtey kaalin sare, iyo buur dhaladeed, oo rag kii ku lid ahaana ku tixgeliyo kii raacsanaana kalsooni uu ugu hoggaansamo madaxnmadiisa ka qaado maalintaas kaddib. Inkastoo ay ahayd khudbaddaasi bilawgii halyeynimadiisa, misana waxaa u harsanaa is muujintii goobta dagaalka siduu ninkii Soomaaliyeed ee gabayaaga ahaa yiri;

«Saajac wiil ah wuxuu beelo yaal, wada sulfeeyaaba
Wuxuu sumucda dheer iyo dabkiyo, sababta qaataaba
Sirqay doqon ah suukaha xun baa, sanaco raacaaye
Jeerey sun iyo qiiq galaan, kalama soocmaane».

Sidii ballanku ahaa, wax habeenkii rag bulaamo, aroortii markay qoraxdii soo baxday buu colkii oo ku habeysan himilooyin jahaad, oo miigganaani ka muuqato hor galay isagoo ku jooga faraskiisii la baxay Haaraan. Sida la sheegay gooray tahay barqo dheer baa waxaa layska hor yimid Ciidankii Xabashida oo war helay, oo Daglaham, oo bir wajiga ma'ahee inta kale ku qafilan wato.

Haddaba haddii, labadii ciidan is herdiyeen, oo qoob iyo qaylo, iyo danan fardood ma'ahee wax kale la maqli waayey, siigona cirka saloolatey, ciiro iyo qiiqna uugameen, seefihii la soo afeeyey, oo wirwiraayey, oo caddaan sadafka midabkoodu ahaana gorod goyntii iyo gol dooxii dhiigii la guduuteen, dhaaxaana waa mid la arkee farasba faraskuu ka carbis wacnaa badbaada geliyey gabashada rogaalka duullanihii fuushanaa baa waxaa dagaalkaas ku guuleystey Ciidammadii Soo-



maaliyeed, abbaanduulihii Daglahamna inta la qabtey baa Axmed Gurey gacantiisa laba ugu kala goyey.

Sida taariikhda qoran lagu hayo, waxaa la yiri colkii Xabashida, oo maalintaas la jebiyey «Waxay u diideen, jaantana u rogeen, sidii adhi libaax ku dhex dhacay. Dagaalkaas u horreeyey wuxuu ka dhacay tuulo lagu magacaabi jirey «Baadqi» oo u dhexeeysa togga Hawaash iyo Gobolka Shawa, oo ay hadda ku taal xarunta Xabashidu «Addis Ababa».

Intuu dagaaladaas Axmed Gurey kula jirey Xabashida, ayaa Suldaan Abuubakar, oo markaas haystey magaalada Harar is tustey inuu Axmed Gurey halis ku yahy saldanadiisa.

Markaasuu ku bilaabay dibindaabyeyn, iyo shirqool si ay isaga hor yimaadaan, dabadeedna tallaabo uga qaado intaanu ku taagsan, hase ahaatee Axmed Gurey aamminkiiba waxyaalahaas wuu dareemay, wuxuuna bilaabey tallaabooyin ka soo horjeeda, ilaa ugu dambeystii ay gaartey xummaantoodii iney xoog iskaga hor yimaadaan, si kii roon reerka ugu haro. Maadaamase ay Soomaalidu xeer u leedahay marka leys qabto, in lays dhexdhexaadiyo baa waxaa lagu dhexdhexaadiyey in Suldaan Abuubakar ahaado Suldaanka magaalada Harar, Axmed Gureyna amiirka Siim iyo agagaarkeeda, uuna u madax bannaanaado taliskiisa iyo madaxnimadiisaba, mase waarin dhexdhexaadiskii oo halkii baa loollankii ka dhex socdey, ilaa ugu dambeystii sidii laysugu khayaameynaayey, oo siyaasad laysugu xeeledeynaayey dagaal leyskaga hor yimid, oo Suldaan abuubakar la dilay.

Maalintaas dagaalku dhex maray Suldaan Abuubakar, iyo Axmed Gurey, oo Axmed Gurey ku guuleystay Abuubakarna ku dhintay, waxaa la weriyey in Axmed Gurey laga hayo inuu yiri: «Alleylee maantaan dirirdhaba galay», Sababtuu sidaas u yirina waxay ahayd waxaa u muuqatey inaanu daba ka werwer denbe qabin, oo uu

saldannadiisii xagga gudaha ka xasiliyey, oo loollan danbe ka haray, mar hadduu reebey Suldaan Abuubakar. Waayihii danbena waxaa goobtii ka dhisantey, oo salka dhigtay magaalada Dirirdhaba, oo maalintaas sidaas magaecedu ku baxay.

Markuu ka libeystey Suldaan Abuubakar wuxuu u dhiibey Saldannadii magaalada Harar inuu xukumo nin la oran jirey Cumardiin. Sidaasna wuxuu u falay wuxuu rabey inuu u gacan furraado jahaadkuu wadey, oo aaney dabrin saldanadu. Waxaana jirtey intuu loollanka kula jirey Suldaan Abuubakar inuu guursaday Dalwaabara, ina Amiir Maxfuus oo aabbaheed ahaa Amiirkii dawladdii Adal intaan Axmed Gurey kicin xukumi jirey. Dawladdaasoo ah tii markii Axmed Gurey saldananadda qabsaday fiddey,, oo taariikhdu u taqaan dawladdii («ADAL»). Guurkaas uu Dalwaabara guursaday garab ayuu ku heley, bacdamaa ay ku xiriirsaneyd dadkii saldanada aabbaheed wax ka hayn jirey intaanu dhiman (1516) Xarunteeduna dawladdaas «Adal waxay ahayd magaalada Seylac, hase ahaatee waayihii dambe ee Axmed Gurey kacay xarunteedii waxay noqotey Magaalada Hararar, taasoo uu door bidey xagga xeeladaha dagaalka, iyo u dhowaanshaha dalka intiisa kale.

## GUULIHII AXMED GUREY EE IS DABA JOOGA AHAA

Axmed Gurey markuu dhiibey saldanadii Harar ayuu halgankiisii dabarka ka furey, oo markay taariikhdu ahayd, 1529 kaga guuleystay Xabashida duullaan qaraar goobta la yiraahdo «Shembere Kore».

Waxaa la weriyey maalintuu gelaayey dagaalkaas Shembere Kore, inuu Ciidankiisu saddex madax ka dhigay. Madaxa kowaad waxaa madax ka ahaa Xuseen Gaatiri Ciidankuna fardooley buu ahaa, Calankiisuna waa caddaa. Ciidanka labaad oo fardooley iyo lugba ahaa, waxaa abbaanduule ka ahaa nin Nuur la oran jirey, calankiisuna hurdi buu ahaa. Ciidanka saddexaad waxaa madax ka ahaa WasiirCadli calankiisuna Xiddig shan gees leh ayuu dhexda ku lahaa, wuxuuna isugu jirey fardooley iyo lug. Waxaa lagu qiyaasey colkiisii isu geyntiisu iney dhammeyd 12,000, hase ahaatee colka ka soo horjeeee Xabashida, waxaa lagu tilmaamey ayax oo kale kamana yareyn 60,000 nin. Misana tirada intaas le'eg cagtaa la mariyey, oo il iyo baal meelay dhigeyn laysma weydiin.

Maalintaasey Xabashiyi bili jabtey oo Axmed iyo Ciidankiisii burjigoodu soo loodsami waayey, ilaa ay gaartey waayihii danbe in Xabashidu raggeeda isku xirxirto, si aaney u jaan rogin, oo cagaha wax uga deyin, markay colka Axmed Gurey iska hor yimaadaan.

Soomaalidu waxay tiraahdaa «geesi ishiisuu diriraa». Axmed Gurey il baa uga furantay nuglaanshaha Xabashida, wuxuuna ku xejiyey oo qabsaday markay taariikhdu ahayd, 1531 Daarwo iyo Shawa, 1533 wuxuu qabsaday Amhara, Lasla iyo Ifaat. Kuwaas oo ah gobollada dhexe, oo halbowlaha Xabashida ahaa. Markuu gobolladaas hantiyey, ayaa Boqorkii Lebna Dengel baqo baxsaday, oo noqdey dagaag dalaw ah oo buur galeen ah, habeenba god cidla ah u hoyda. Waxaa la weriyey markii la qabsaday gobolka Ifaat in ninkii u talin jirey, oo la oran jirey Awari Uthman» uu waraaq uu ku beerlaxawsanaayo Axmed Gurey u soo diray, wuxuuna ku yiri:

«Waxaa jirta in aabbahey muslin ahaa, oo asalkaygu ka soo jeedo nin muslin ah, hase ahaatee khasab baa la igu gaaleeyey, laakiinse ilaa yaraanteydii niyaddaan muumin ka ahaa. Haddana Ilaah iyo rasuulkiisii iyo adigaba waan rumeysanahay, ee waa inaad i cafidaa. Haddii aad qoommaamadaas aan qoomameeyey intaan mulxidka ahaa, waxaan geystey iga saamaxdid, waxaan kuugu ballan qaadayaa inaan u soo noq-

do Ilaah rumeyntiisa. Ciidanka boqorka, oo aan madaxda ka ahayna adaan kuu soo gacan gelinayaa si ay dhismaha islaamka taageero u siiyaan (1)».

Waxaa kaloo la sheegay, markii la gelaayey duulaankii Gobolka Ifaat iney la socotey Axmed Gurey afadiisii, Dalwaabara, oo markaas uur lahayd, waxaa haddaba dhacday in rag colkii ka mid ahi, ay soo jeediyeen in la reebo, bacdamaa dhibaato ugu sugneyd, iney iyadoo uur leh dagaal ka qayb gasho.

Hase ahaatee, lama arag, layaabna lehe, kuna ammaanane, waxaa la sheegay iney diiddey oy tiri:

««Dumar baad tahay, dagaal ku deynmaayo
Waad uur dinnaxsaneysaana danaha caamka ku deynmaayo
Diricna dermo nabadeed ku dhalimaayo».

Markay saas tiri, oo diidday ayaa leyska daayey, oo ay dagaalkii ka qayb gashay, waxaana la sheegay, iney sidey dagaalkii ugu jirtey faras dushiis ku fool qaaddey, oo wiil dhashay.

Amxaara, Lasla, iyo Ifaat, waxaa ku xigay, oo uu durduro ku galay, Hadiya, Sidamo, Gurage iyo Tigre. Markay taariikhdu ahayd 1535 wuxuu gubay magaaladii Aksom, «Axum» iyo wixii keeniisado ku yiil. Gacantiisana wuxuu ku dilay baadirigii u weynaa oo la oran jirey Gabriil iyo Devid» oo ahaa dir Boqor iyo Yuhuud badan.

Sidaa la weriyey waxaa Ciidankiisii kaga gudbeen harada Tana dhir jirdahood, oo ay huuriyo ka sameysteen.

Waxaana colkiisii ku simeen ilaa magaalada Kasala, oo ku taal koonfurta Soodaan, geeley halkaas ka soo qaadeenna waa tan la qabaa inaan Soomaali geeli kale uga horreyn.

(1) J. S. Triminkham, Islam in Ethopian page 88.



Sidey qoreen waayahaas raggii wargeysyada qori jirey, oo Xabashida ahaa, iyagoo sida la filaayo weliba run ka fog ficilo daraadeed, waxay sheegeen in:

Tobankii qofba, oo dalka Xabashida ku noolaa, sagaal ka mid ahi sandulley ku muslimeen, kaddib markuu Axmed Gurey kadeeday dalkeediina markii afar meelood loo qaybshey saddex meellood uu gacanta ku dhigay» (1).

Daadduunkaas uu Axmed Gurey daaduunshey Xabashida, oo tobankii qofba dadkeedii sagaali ku muslintay, dalkeediina afar meeloodoo saddex meelood la qabsadey, boqorkeedii Lebna Dengelna ku kallifay, isagoo guud dhogoroobey, inuu sidii bahal buuro galeen noqdo, halkaas kuma ekaan, ee waxay gaartey in Xabashiyi meelay joogtaba dab shidi weydo, si aan habeenkii loo soo ileys raacin, maalintiina loo qiiq arag. Markaas caadada iyo dhaqanka ceedhiin cunka ah, oo hadda Xabashidu leedahay, beni-aadankana ay kaga duwan tahay, waxaa dhaliyey dab shidi waagii cabsidu keentay.

## AXMED GUREY IYO CIIDAMADII BOORTAQIISKA

Hadduu in badan, oo sannada ah boqorkii Lebna Dengal baxsad ahaa, oo hadba buuraha Tigari, Wagra, Dambiya, Begamader iyo Gojam ku dhuumaaleysanaayey, uuna dhogor bahal yeeshay silica iyo saymaha la baday aawadood, ayuu waraaq uu ku baryaayo dawladda Bortaqiiska iney gacan siiso oo kiristaan ahaan ugu hiiliyaan u diray markay ahayd 1535,, warqaddaas sida la sheegay waxaa la yiri wuxuu ku qoray:

«Waxaan ahay boqor dawlad Kiristaan ah u boqor ah, oo gasiirad bad muslin ahi ku wareegsan tahay dalkiisu ku yaal. Waxaan ka codsanayaa dawladd bortiqiisku iney dalka Xabashida ugu hiilisaa Kiristaanka ah, gacanna na siiso oo xoog iyo waxay laxaad leedahay naga hagran».

(1) J. S. Trimingham, Islam in Ethopia page 88.

Sida la og yahay, Boortiqiisku isagaa ugu da' weyn gumey stayaasha Reer Yurub oo ugu soo horreeyey Afrika soo galkeedii qarnigii 14aad, waa daryeelay codsashadii boqorkii Xabashidu hiilka ka codsadey.

Waxaa dhacday inuu markaas u soo diray ciidan doonyo ku jira, tirsigisana lagu qiyaasay 350-400 oo nin, wa xayna wateen madaafiic hubkii ugu dambeeyey ah, oo adduunka lagu dagaal galo, waayahaas, Axmed Gureyna waa qabey hubkaasoo kale ah, oo dawladda Turkiga, oo markaas dawlada ha islaamka ugu xoog rooneyd u soo dirtay. Colka Boortaska waxaa madax ka ahaa Kiristoofar Da Gama (Christopher Da Gama) Kiristoofar Da Gama waxaa dhalay ninkii badmaaxa caanka ahaa (Vasco Da Gama) oo ugu horeeyey adduunyada intuu Yurub ka yimaado ka wareego Koonfur Afrika, oo sidaas ku gaarey dalka Hindiya.

Inkastoo Lebna Dengal u diray waraaqdadaas Bortaqiiska, waxaa dhacday inuu Axmed Gurey dilay markay ahayd taariikhdu 1540, Ciidankii Boortaqiiska oo aan soo gaarin weli. Marmarna waxaa la yiraahdaa dacdarruu u dhintey isagoo aaney cidi la joogin, oo meel kenisad ah dhuumasho ugu jirey. Waxaana boqornimadii qabsaday wiikliisii Galawdews (1540-1559) haddaba markuu sannadku ahaa 1542 bilawgiisii, ayaa dagaalkii u horeeyey dhex maray Axmed Gurey colkiisii iyo Xabashida, ay Boortaqiiska wada jireen, waxaana laysku haleelay goobta la yiraahdo «Ansa», oo u dhexeysa Amba Alagi, iyo Harada la yiraahdo Ashangi, oo gobolka Tigre ah.

Sida la sheegay, markii colkii Axmed Gurey, oo lagu qiyaasay 10,000, oo nin, iyo kii Boortaqiiska isa soo hor fariisteen, Xabashiduna kaalin saddexaad fadhido, ayaa Axmed Gureyna intuu col weynihiisii meel dejiyey toban uu ku jiro, oo fardooley ah colkii bareere ugu baxeen. Boortaqiiskiina tirale'eg bey ka hor keeneen. Waxaa dhacday in labadii tobnaad birta isla gashay, in yar dabadeedna col weynihii gorodda is geliyey, halkaasna dhaawac aanu u naafoobin Axmed Gurey ku gaaray. Waxaa kaloo dhacday in Kiristoofar, iyo toban uu ku jiro laga go'doonshay colkoodii, oo gacanta lagu dhigay isagoo gacan ka jaban lugna burburtay. Dabadeedna inta Axmed Gurey la hor keenay dhagax lagu dilay.



Colkii Boortaqiiska waxaa laga dhigay caw la googooyey, oo waxaa laga dilay ugu yaraan kala bar, iyo abbaanduulahoodii oo aaneyba arag meellu jaan iyo cirib dhigay iyo raqdiisii toona. Inkastoo Axmed Gurey uu dhaawacmay, misna wuxuu colkii isugu luga duway meel la qiraahdo Membert (Mamrat) si uu jiilaalaalka uga dugaalsado, ilaa waqti la dagaallami karo u soo galo. Wuxuuna gacan warsaday dawladdii Turkiga iyo Carabto.

Mar labaad baa bishii Oktoobar sannadkii 1542, dagaal labaad ku dhex maray Axmed Gurey iyo ciidammadii Boortaqiiska wixii haray iyo, Xabashiday is garabsanaayeen. Colka Xabashida waxaa watay Boqorkii Galawdews, dagaalkaasina wuxuu ka dhacay «Wayna Daga, oo ku dhow harada weyn ee loo yaqaan «Tana».

Haddaba maaddaama Axmed Gurey ku dhaawacmey dagaalkii ku dhex maray Boortaqiiska «Amba Alagi» baa waxaa dhacday inuu in muddo ah, adkeysan iyo isxilqaan wax ku wadey, colkiisiina isugu duubnaa, ilaa ugu danbeystii sida la sheegay markay taariikhdu ahayd 21 Feb. 1543, (1) isago aan cadowgiis gacan gelin, iskiis u geeriyooday dhaawacii gaarey dartiis. Halaasay, ku adkaatay ciidamadiisii waqooyi fog jirey iney si nabadgelya ah, dalka Soomaaliyeed ugu soo noqdaan, oo xabashoo colaadi dhex tiil ka soo gudbaan, dabadeedna waxay u gudbeen Afrikada dhexe, waxayna degeen iyagoo lo' iyo xoolo badan wata,, sida taariikhda lagu hayo Burundi, waana dadka loo yaqaan «Watutsi».

---

Geeridii Axmed Gurey waxay ummadda Soomaaliyeed, iyo Islaamkii kaloo weheliyey maalintaas waasiisey halyeyigii iyo hanadkii horkacaayey, oo ileyska iyo nuurkaba u ahaa. Xabashi iyo kufaartii kaloo la jirteyna sida Boortaqiiska xamdey naqeen, oo dabkey shidi waayeen sannadaha cabsi daraadeed maalintaas huriyeen. Welina ma illaawin, oo waa hibaataa Xabashi waxay gaarsiiyeen Axmed Gurey, iyo Ciidammadi Soomaaliyeed. Hibashadaas aawadeed beyna had iyo jeer lid ugu tahay jiritaanka Soomaaliyeed, iyo islaamka kaloo gacanta ugu jira, ugana jirtaa israac inaaney yeelan, Axmed Gurey danbena ka kicin.

Inkastuu Axmed Gurey geeriyoodey, haddana qoomiyaduu abuuray, oo miraheeda beeray ma harin oo halkii ayaa halgankii ka socday, isagoo uu Amiir Nuur hoggaamiye ka yahay, Dalwaaberina si ay ugu aarto Axmed Gurey ka ahayd guubaabiso, iyo xoogga ka danbeeyey.

Waxaana dhacday, markii Amiir Nuur saldanadii dawladi Adal, ee Axmed Gurey qabsaday, inuu damcay inuu dumaalo Dalwaabara, hase ahaatee ay diiddey oo ku tiri:

«Nidar baan galay ilaa aad boqorka Xabashida Galawdews madaxiisa geedka gurigeyga hortiisa ah ka soo lushid, oo Axmed Gurey u aartid, inaanan ooridaada noqon».

Waxaa dhacday haddaba in Amiir Nuur ka ballan qaadey Dalwaabara, inuu halgankii wado, Axmed Gureyna u aaro. Markaasuu tabaabulshe bilaabey oo magaalada Harar daafaceedii adkeeyey oo ku wareejiyey deyrka ilaa maantadan ku wareegsan.

Buwaagta taariikhda qaarkeed, waxay qoraan in Axmed Gurey abti u ahaa oo walaashiis dhashay Amiir Nuur. Qaar kalena waxay qoreen, inuu adeer u ahaa. Si kastaba wax ha u wadaageene qoys bey ahaayeen, inkastoo ta u horreysa



aaney diinta Islaamku oggolayn, oo ay run ka fog tahay, sababtoo ah aayada abti, waxay ku jirtaa muxaramaadka aan geyaan ka ahayn.

1559kii, ayuu ugu horreystii Amiir Nuur weerar laxaad leh ku qaadey gobolka Fatajar, halkaasna waxaa layskaga horyimid boqorkii Gaalwdews, oo duullaanka Amiir Nuur soo qaaday ka war helay. Waxaa halkaas lagu jebiyey colkii Xabashida. Markii colkii jabeyna wuxuu Amiir Nuur goonni, ka helay isagoo baxsad ah, oo dhuumaaleysanaaya Galawdews, markaasuu intuu dilay goroddii ka gooyey, oo sidii ballanku ahaa geed guriga Dalwaabara hortiisa ahaa ka soo laadlaadiyey, dabadeedna uu halkaas ku guursaday Dalwaabara.

Waxaa la sheegay in madaxii Boqorku muddo laba sannadood ah uu geedkii sidii uga lushey, ilaa ugu danbeystii nin Armaaniyan ah, oo dalxiis ahi iibsaday.

Inkastoo, saldanadii Amiir Nuur, iyo Dalwaabara in muddo ah xoog lahayd haddana uma hanaqaadin sidii tii Axmed Gurey.

Waxay dadka Soomaaliyeed iyo muslin oo dhammi, khaas ahaan inta ku nool geeska Afrika, ee uu dul yaallo Gumeysiga Xabasha ku xusaan, inuu ahaa sannad dayaxyo cadceeddiba ka dhaceen. Waxayna uurka kaga maansabooliyaan ereyadan markay xusayaan hanadkii Axmed Gurey:

| | |
|---|---|
| Kii Taana tegeyoo | Tuxushaa Amxaara ah |
| Taharaheeda ceedhiin | Tammootida cunsiiyow |
| **Gurayow ku townaye** | **Taniyo taggaaggii** |
| Tows lagama bixinoo | Soomaaliyiku towdaye |
| Soo toos halyeyow | Soo toos halyeyow |
| Kuu tiraab dadkaaguye» | «Tiirkii adkaayow |

Inkastuu dayaxii 14aad dhacay wuxuu Goobdoon wax ku qoranaayey ilayska dabka, ilaa ogtii waabberi muuqatey. Haddaba markuu odaygii hadalkii halkaas ku soo gebegabeeyey, oo yiri «caawa waa iga intaas», baa Goobdoon qalinkii iyo buuggii is barbar dhigay oo yiri, intuu gacmaha dhafoorada saarey, «intii danboo dhan qalinka waan dirqiyaayey, oo madaadkii baa ka dhammaaday, mana sito qalin kale meelaan ka khad helaayona garanmaayo.

iska daayoo, garaad ma kaaga kordhay, waxaan kuu sheegay, intaanan heerkeeda labaad kuu bilaabin», baa aabbe Samakaab weydiiyey. Ma mid lays weydiin karaa gudcur baan ku jiroo ilays iyo iftiin baan u soo baxaye». Haddaad sidaas tiri, oo aad rabtid inaan kuu sii wado, madaadkiina ka dhammaadey maxaad fali»? Ma garanaayo, ayuu Goobdoon ku jawaabey, markaas aabbe Samakaab yiri «ka soo feker ilaa maanta, oo haddaad si aad u buuxisid weydid anaa kuu sheegi doonee habeen danbe sida caawa keen isugu keen, oo halkaas ha inoo joogto.». Sidaasna lagu kala tegay markii waagii beryey. Waxaase dhacday markii xoolihii aroortii la dareershey ayaa Goobdoon inuu ladan yahay is bidey, oo adhigii iyo geelii wax ka raacay.

Abbaara tobankii saac, ee arooryo markay ahayd, oo uu Goobdoon adhigii, iyo geellii wax ka barqinaayo, ayuu wuxuu ka maqlay xaggii gurigii qaylo iyo hugun rasaaseed, in yar dabadeedna waxaa ku yimid ciidammo Xabashiyeed oo baabuuro gaashaaman wata. Naxariis la'aantooduu hore ayuu u ogaaye isla markiiba isagiyo wiil ay walaalo yihiin kob bey galeen, oo yar dhowreen bal waxay ku kacaan. Sideyna u soo soccdeen bey xoolihii dhex yimaadeen, oo markii dad ishu u qaban weydey, adhigii iyo geelii rasaas ku fureen, ilaa ay tarab-tarab u daateen, oo gaag yari ka soo haray, intii soo hartayna intii ka macayd baabuur ku gurteen, oo waxay foodda saareen meel bidhaan kale uga muuqatey. Markay ka libdheen ayey keyntii ka soo baxeen oo gurigii tageen, waxayna la kulmeen



hooyadood oo dhimmatey, iyo aabbahood Samakaab oo dhaawac ah, iyo dad kale oo eheladood ah, oo iyana dhaawacyo gaarreen. Beelihii qayladhaamo bey isu tebiyeen waana la soo gurmadey si loo aaso Goobdoon hooyadiis.

Waxaase dhacday markii aaskii la isugu yimid, welise aan ciiddii lagu rogin, oo uu inuu bud dhigo Goobdoon hooyadiis iilka ugu degay, ayaa qaylo iyo ba'ayey! ka soo yeertay xagga galbeed, in yar dabadeedna waxaa iyadoo naxsan dadkii ku soo biirtey Gargaara, oo ilma yar xanbaarsan. Markii la warsadeyna waxay sheegtay in ciidamo Xabashi ahi weerareen rugtodii, dadkiina baabuurro ku gurteen dhammaantood iyada ma'ahe, xoolihiina wixii adhi ahaa dhaceen.

Markay intaas sheegtay, welise aan wax kale lays weydiin, ayaa qof dadkii ka mid ahi yiri, alla waa kuwan, ee ina kala cararsiiya waxay moodayaan in qabriga lagu shirayaayey Dadkii markay is yiraahdeen kala yaaca ayaa amminkiiba la wada hareereeyey, oo intoodii badneyd la qaqabtey. Hase ahaatee, inkastoo dadkii intooda badani sidaas muteen, Gargaari waxay ku booddey qabrigii oo ku biirtey Goobdoon, oo hore iilka ugu jirey, halkaasaana si colka looga dhuunto meydkii la dul jiifsadey labadoodii layskuna dedey subeeciyaddii meydka lagu awdey. Nasiib wanaag colkii godkii uguma iman laakiinse, waxay ku soo tuureen labo bam gacmeed, oo inkastaanu qarxin midkood qabrigii ugu galay, kii ka lena debedda ku dhacay oo intuu qarxay falliir ka duuley gudihii ugu dhacay, oo madax gooyey walaalkeedii yaraa, oo Gargaari xanbaarsaneyd.

In yar hadday Goobdoon, iyo Gargaari qabrigii ku dhuumanayeen, markii cadowgii ka libdhey, ayey ka soo baxeen, oo iyagoo tiiraanyo iyo ciil qaba isla godkii isu dhab geliyeen labadii meyd, iyagoo isugu jiibinaaya ereyadan tiiraanyada ah.

Goobdoon:

Abyamayay Gargaaray, aaskiyo xabaashani
Uurkuaallo biirtiyo, alla urugo weynaa
Aanadey ha raagtee, ila awood dadkeennii
Orgobbaan naxayn iyo, wax ajalay Amxaaree

Gargaara:

Irdhoobaye Goobdoonow, aano lama illaawee

Waa loo ula sameystaa, adna hooyadaayo
Oofta laga wareemaa, iilka ciil la jiiftee
Anna inan walaalkay, oo unuunku go'ayoo
Abeydinaan ag dhigayee, uurkutaalla biirtiyo
Alla urugo weynaa ila awood dadkeenni
Orgobbaan naxayn iyo, wax ajalay Amxaaree

Wadajir:

Ifka nolosha qaarkeed, iilkaa derejo dhaamee
Abley adhax ku goysiyo addoonsigu qaraaraa
Uurkutaallo biirtiyo. alla urugti weynaa

BacdamaaGargaari reerkoodii dad iyo duunyo waxba ka harin Goobdoon bey reerkoodii u raacday.

Wax maalintii wixii rag joogay calool xumadaba, dumarna asey xirtay, oo leelleelayey guraan, markii gabbalkii dhacay ayaa xeryihii tirooyinku ku soo xeroon jireen cidla haawadeen, oo goosangoosan adhi ahi u soo hoydeen.

Haddaba goorey fiid hore tahay, oo hawadu dhadhameyso geeri iyo hoog, qof walibina goonnidiisa u qamuunyoonaayo, Goobdoonna aabbihis Samakaab ag fadhiyo, ayaa aabbihiis intuu kor u soo hinqadey, oo in yar neef jiid iyo taah isku daray yiri, «Goobdoonow nin weyn wedkiis waa yaqaan, oo nabarka i gaarey ka kicimaayo, waxaana ii nasiib wanaag ah, oo aan ilaah ka baryayaa inaanan go'in ilaa aan duruusta



inta hartey kuu dhammeys tiro. Markaas ba' e i soo tiiri, oo dabkana sidii xalay si ka daran u soo oog. Markaasaa Goobdoon yiri. «hawraarsane maxaan ka yeeli qallinku waa iga madaad la yahaye»? Wuxuu ugu jawaabey, oo yiri, dhiigga gosha iga soconayaan ku oran lahaa ka buuxso, hase ahaatee dhiiggeygu waarimaayo oo waa dhiig odayeed, muddo yar buu na ku milmayaa Markaas gacantaada bidix faryaradeeda qodax ku dalooli, oo ka dhiiji, qalinkana ka buuxso, waayo duruusta inta hartay waxay saameyneysaa, ama tifaftiraysaa intii ummadda Soomaaliyeed la gumeysanaayey, oo sida caawa gosha dhiiggu iiga da'aayo, ay u dhiig baxaysey. Sidaas aawadeed waa inaad dhiiggaaga ku qortaa, ha ku xusantee, «Taariikhdii dhiigga ku qorreyde». Gobdoon baa hadlay, oo yiri «Sidaad tiri baan falayaaye, waxaadse wax iiga sheegtaa intaanan wax qorin sababta Xabashidu maalin walba dad rayid ah, oo aan hub qabin, kas iyo maag ugu laysaa. Dadku waaba colloobaaye marka dareen kala galo' e maxay duunyadoda u dhacdaa, una laysaa xoolahooda? Ma caydhnimadaa wax u ah? Ma waxyeelada dadkay nafaqo ka heshaa? Ma naxariis la'idey u dhasheen? Mise waa hub gumeysigu leeyahay midab kasta ha lahaadee inuu dad iyo duunyo xaaqo? Maxaase u dhexeeya gumeysiga nin cad iyo nin madow?

Haddii ay ahayd in dadka madoobi wadajir ula dagaallamaan gumeysiga nin cad, maxaa misna xalaaleeyey cahdigan inuu nin madoobi walaalkiis si xaaduqnimo ah u cadaadiyo».

Wuxuu ugu jawaabey, «su'aalahaagaasi waxay xiriir la leeyihiin, iyo waxyaalo kaloo kaa dahsoonba waxaad ka heli doontaa duruusta caawa, ee hay hakin, oo su'aalaha iga daa, itaal ma hayee ilaa aan dhammeystiro, yaan xiriirka sheekadu sarmasegto iga yeellanine, la arkee iney kuwii maanta adiga kuu goobooyeen, ee sidaas maw og tahay?

Abaalna ku qab iney hoyadaa sidaas ku geeriyootay, waayo waxaan indhaheyga ku arkay aan sheeka ahayn, in maalin walba siyaabo ka foolxun, geeriyi waa doore rag hooyooyinkood loogu hor silciyo oo lagu saxariirsho siyaabo kalena loo geysto. Markaas haddaaney taas mudan geerida door ah.

Abbe Samakaab baa hadalkii watoo yiri: «War qalinka qaado, duruustana dhig fikirku ha kuu dambeeyee, waayo si waagu nabad iigu baryi Allaa oge».

Sidii buu Gobdoon yeelay, oo intuu gacantiisii bidix faryaradeedii ka dhiijyey, ayuu qalankii ka buuxsadey oo qorrin bilaabay intuu qayb qayb u habeeyey, iyadoo Gargaarina miscirirta ka dhegeysaneyso, dersiyadan is daba jooga ah, isagoo sidii loo afwaajey aan wax su'aalo ah dhex gelin ilaa waagu ka beryey.



# Soomaaliya iyo shirqoolkii gumeystayaasha Reer Yurub

«Ingiris, Amxaar iyo Talyaani wey akeekamiye
Arladaa la kala boobayaa ka u itaal roone,
Waa duni la kala iibsadaan nala ogeysiine
Anse lihi aakhiro sabaanka iyo iligyadiisiiye».

«Faarax Nuur»

1925-1927

Qarnigii 17aad ilaa kii 18aad wax dhibaatooyin ah, oo taariikh ahaan loo xusi karo kama dhicin dalka Soomaaliyeed. Waxaa markaas la oran karaa waa labadii qarni, oo nabdoon iyo naallo dadka Soomaaliyeed ku jireen. Hase ahaatee qarnigii 19aad gadaalihiisii ayaa dawladaha reer Yurub, waxay Afrika iyo Asiya u soo direen niman u sahamiya. Nimanka sahanka u yimid dalka Soomaaliyeed, waxaa ka mid ahaa Ricard Burton, Spike iyo Antonio Cecchi. Sahamiyayaashaasi, iyo kuwo kaloo Afrika kale yimdba, waxay dawladahoodii kula noqdeen khariidadooyin iyo wixii culuum ah, oo ay ka korodhsadeen imaatinkay dal walba, oo Afrika ah yimaadeen.

Imbiiriyaaladdii, ama gumystayaashii reer Yurub, iyagoo daryeelaaya danahooda dhaqaale, iyo ku dul noolaansho nin madow muruqiisa iyo macdanta dhulkiisu hodanka ku yahayba, ayey ku shireen qol madow, ee Berliin ah, markay ahayd 1884, halkaasna ku soohdimeysteen qaaradda Afrika, aayaha dadkeedana gacanta ku dhigeen, iyagoon tixgelin ama jaahiliinba ka ahaa is-haysadka ummaddaha reerAfrika mid walba gaar ahaanteeda.

Shirkaas Afrika lagu shirqoolay, oo la baxay «Shirkii Berlliin, ama qaybqaybtii Afrika (Scramble of Afrika), wu-

xuu magaalada Berliin ka bilaabmey, 15kii Noofember 1884, wuxuuna socdey ilaa 15kii Janaayo 1885. Go'aankii ka soo baxayna waxaa la kala saxiixday 26kii Feb. 1885. Dawladihii ka qayb galeyna waxay ahaayeen Ingiriiska, Faransiiska, Talyaaniga, Boortaqiiska, Beljimka, Isbaaniska Jarmalka iyo dawladda Xabashida, oo Afrika keligeed kaga jirtey.

Soomaaliya waxay ka mid ahayd, dalalkii la qaybsaday, waxaana loo qaybshey shan meelood, laba qaybood Ingiriis baa qaatey, qayb Talyaani baa la siiyey, qaybna Faransiis ayaa la hantisiiyey, oo layaab lehe qaybtii shanaad markaas taag mey lahayne Xabashi baa laga ballan qaadey in la siinaayo mar alla markay tamar u yeelato, inta ku horreysana Ingiriis u **sii hayo.**

Taariikhdaas 1884 gumeystaha Ingiriis, wuxuu qoondeystey dhanka Waqooyi xaggiisa galbeed, oo ku siman ilaa Webiga Hawaas. Waxaa laga hayaa nin Faransiis u dhashey, oo gabyaa ahaa, oo ka ganacsan jirey hubka lana oranjirey «Arthur Rimbaud», inuu yiri markay taariikhdu ahayd 1887:

««Hawaas, oo ah meesha dhinaceeda galbeed boqortooyada Mililig soo gaarsiisan tahay, waxaa Harar looga socdaa siddeed ilaa sagaal maalmood». (1)

Taasi waxay marag fureysaa, inaan innaba gumeystayaasha reer Yurub, iyo qaybsigii ay Afrika qaybsadeen ka hor dalka Soomaaliyeed Xabashi lug soo dhigin, oo Soomaalida deggan ilaa Webiga Hawaas madax bannaaneyd.

Maxaa u sabab ahaa, in Soomaali Galbeed iyo Soomaali Abbow iyo kuwo kaloo islaam ah, gacanta loo geliyo Xabashida?

(1) The Portion of Somali Territory under Ethopian colonisation Somali Government page 7.



Qaranigii 19aad, dawladda keliya, ee madow oo sida reer Yurub wax gumeysi iyo dalballaarsi ku jirtey, waxay ahayd Xabashida sidaaseyna uga qayb gashay Shirkii Berliin.

Haddaba isagoo Boqor Mililig mabaadiidaas ku shaqeynaaya, ayuu wuxuu wareegto caan noqotay u diray Ingiriiska Faransiiska, Jarmalka iyo Talyaaniga, wareegtadaas wuxuu ugu qorey waxaa ka mid ahaa, oo uu ku yiri:

«Itoobiya waxay ahayd muddo afar iyo toban qarni ah, gasiirad Kiristan ah, oo dad Muslin ahi, iyo dadaan diin lahayni kuwareegsan yihiin, markaas haadi dawladaha xoogga weyni damcaan iney Afrika qaybsadaan daawanmaayo si aan wax iga gelin.

Xagga bari xadkaygu wuxuu gaarsan yahay dadka Boranka, Gaallaaska Arusiga.

Xagga kalena, waxaan isku aeyayaa haddii ilaah nolol iyo xoog i siiyo inaan Imbiriyaliyadda gaarsiiyo xadkaygii hoore, oo ah ilaa Khartuum iyo webiga Nyanza oo gallasku ku jiro.(1).

Shaki la'aan fekradahaas wareegtada ku qoran, ee Mililig dawladahaas uu u jeediyey gacan iyo garab buu kaga helay, sidaas darteed beyna u dhalatey in markaas Ingiriis maalinba heerey joogtaba dalka Soomaaliyeed sida soo socota u gacan geliyo.

Markay ahayd 1884, ayaa Ingiriis heshiis ah inuu ilaaliyo dalka iyo dadka Soomaaliyeed la sameystey Ummadda Soomaaliyeed, ee degganeyd Harar iyo Soomaalida Galbeed. Wuxuuna Harar kala wareegay heshiiskaas kaddib, wakiil u fadhiyey dawladda Masar, ee Khadiwiga ahayd (Khadive) intii Ingiriis heshiisyadaas lala dhiganaayey, dawladda Faransiisna 1884-1886) dhinaceeday kala waddey dadka Soomaaliyeed heshiisyo ah iney ilaalineyso dadka Xeebta Soomaaliyeed deg-

(1) The Portion of the Somali Territory under Ethopian Colonization by Somali Goverment Page 12.

gan. Sidaas si le'eg dalka xaggiisa koonfureed waxaa ku loc-lamaayey Ingiriis, Jarmal iyo Talyaani khaas ahaan Kismaayo iyo Jubbada Hoose, aakhirkiina waxay noqotey in Ingiriis si uu Jarmalka uga fogeeyo Afrikada bari Talyaani u hiiliyo, hal-kaasna ay dhalato in Talyaani Koonfur qabsado oo heshiisyo dadka Soomaaliyeed la dhigto 1889.

Haddaba inkastoo Xabashidu ka qayb qaadatey qay-bintii Afrika, oo ay ugu ballan qaadeen dawladihii reer Yurub oo markaas wax qaybsanaayey iney siiyaan intey soo qoondey-satey, misana markay taariikhdu ahayd 1884 wax ma qabsan karayn, oo waxay ku koobneyd dhulkeeda buuraleyda ah, Am-hara, Gojam, Waqooyiga Shoa iyo Tigare Koonfurteeda.

**Qabashaddii Harar ay Xabashidu Qabsatey (1887)**

Wuxuu qorey ninka qoraaga ahaa Mr. Robert L. Hees oo uu ku yiri buuggiisa la yiraahdo (Xabasha).

«In Harar waqooyigeeda, barigeeda, koonfurteeda galbeedkeeda, iyo nawaaxigeedaba, laga helo reer guuraa Soomaaliyeed oo boqolaal sannadood Harar u haysey ileyska diinta Islaamka» (1).

Fikradihii iyo heshiisyadii qabyada ahaa, oo ay afarta gumeyste Xabashida, Ingiriiska, Talyaaniga iyo Faransiisku ku dhigteen Berliin in Soomaaliya la qaybsado, waxay ugu horrey-stii ficil ahaan hirgaleen markay ahayd 20kii Feb. 1887, maa-lintaasoo ay ciidamo Xabashi ah, iyo kuwo Talyaani ahi wada-jir u soo weerareen magaalada Harar, oo inkastoo dagaal qaraa ri ka dhacay, ay u gacan gashay. Maalintaasaana loo xusaa maalintii u horreysey, oo ay Xabashidu dalka Soomaaliyeed cagta soo dhigtey, ama dal ballaarsigeedu bilaabmey. Waxaana ugu horreystiba Mililig badhasaab (governor) uga dhigay Ras

(1) The Portion of Somali Territory under Ethopian colonization by Somali Democratic Republic 1974 page 10.



Makonnen, oo ahaa Haile Selaasie aabbihiis, sababtaasuuna Haile Salaassie ugu dhashay Gobolka Harar.

Guushaas uu Menelig ku guuleystey qabsashadii Harar dalballaarsigiisii keliya wax kama tarine, waxay kaloo u suura-gelsey inuu Axmed Gureygii kacay qarnigii 16aad, Xabashi uga aargudo. Sidaasna inuu qabey wuxuu waraaq ugu qorey nin gumeystaha Ingiriis Cadan u fadhiyey, wuxuuna warqadda ku yri:

«Waxay ka timid Menelik boqorkii Shoa iyo Gaallaas oo dhan, mid wanaagsan iyo mid xunba, ee sidee tahay? Amiir Cabdalla uma oggolaan karo kufaar dalkiisa, wuxuuna ahaa Gurey oo kale. Hase ahaa-tee anoo Ilaah ila jiraan la dagaallamey, waana baabi'iyey ilaa uu faras guudkiis ku baxsaday calankaygiina waxaan ka tagey magaala madaxdii-sii (Harar) oo ciidnkaygu qabsadeen. Amiir Cabdalla Gurey buu bedde-ley. raacse». (2)

Wuxuu kaloo Menelik waraq taasoo kale ah u diray markay taariikhdu ahayd 8.1.1887 Qunsulkii gumeystaha Tal-yaaniga u fadhiyey Asab, oo la oran jirey Mr. De Simone wu-xuuna ku yiri:

«Amiir Cabdalla oo laayey Talyaanigii aannu saaxiibka ahayn, wuxuu igaga baxsaday faras guudkiis, hase ahaatee waa ilaah mahaddiis. oo waxaan laayey colkiisii, waxaanna uga aaray si aan ku raalli geliyo Talyaanigii uu laayey, oo uu intooda badan nolosha ku silciyey» (1).

Intii arrimhaasi dhacayeen oo wadajr Harar loo weera-raayey, Ingiriis wax buu ka ogaa dhabarkuuna u jeediyey, oo Ammiiradii Somaaliyeed oo uu kula heshiiyey inuu dadka iyo dalkoodaba ka ilaaliyo wixii ku soo duula, halkaasuu iska taa-gey, ama sida la qaboba cadowgu ku ballan qaadey inuu ka ilaaliyo buu ku soo biiray.

(2) The Portion of Somali Territory under Ethopian colonization by Somali Democratic Republic page 11.

(1) The Portion of Somali Territory under Ethopian colonization by Somali Democratic Republic 1974 page 11.

## HESHIISYADII GUMEYSTAYAASHA

Wuxuu Faransis ugu horreysti ku soo galay Geeska Afrika heshiisyo uu la dhigtay duqaydii Obokh 1862kii, waxaana ku xigay 1884, 1886kii heshiisyo kale, oo dhexmaray salaaddiintii Soomaaliyeed ee Tajura, iyo Gobad ku noolayd. Heshiisyadaasuna waxay ahaayeen inuu ilaaliyo iyo xiriir guud oo nabadeed.

Ingiriis iyo Faransiisna, markay ahayd taariikhdu 1888 kii ayey ku heshiiyeen iney rasmi ahaan kala asteystaan intii mid waliba qayb u helay dalka Soomaaliyeed, waxaana lagu heshiiyey in Ingiriis qaato Seylac iyo wixii ka bariyeeya Faransiiskuna wixii Seylac ka galbeed ah.

Heshiiskaasna waxay ku dhigteen in Xeebta Soomaaliyeed xudduudkeeda xagga koonfureed la mariyo Habaasweyn, Biyo Qaboobe iyo Geldesa, uuna ku sinnaado magaalada Harar ka shishow. Hase ahaatee markay ahayd 1897 ayaa Faransiiska iyo Xabashidu heshiis qarsoodi ah ku dhigteen magaalada Addis Ababa (Franco Abyssinia Treaty of 1897) Waxayna ku heshiiyeen in xuduudka u dhexeeya Xeebta Soomaaliyeed iyo Xabashida uu maro Jalelo, meeshuu ka mari lahaa Harar ka shishow, sidey ku heshiiyeen Ingiriiskiyo Faransiisku 1888.

Inuu Faransiisku ummadda Soomaaliyeed sidaas u khayaameeyo, oo dhagar uga galo, oo iyadaan wax ogeyn dhaxal wareejiyo, waxaa sabab u ahaa danihiisa guud oo uu daryeelaayey.

Danihisaasina waxay ahaayeen, oo uu ugu horreystii u yimid Xeebta Soomaaliyeed inuu baddacas maraakiibtiisa dagaalka marso uga helo, siyaasaddiisa gumeysiga ahana halbowle iyo Saldhig isu gaarsiiya uga dhigto. Isla markaasna faa'iida kale ayaa ugu jirtey, inuu Xabashida dalballaarsigeeda taageero, maxaayeelay wuxuu rabey inuu saaxiibtinnimo iyo ganacsi la yeesho, kagana faa'iidaysto xagga badda, bacdamaa aanney bad, iyo maarsooyin wax uga degaan lahayn.



Waa arrimo sida muuqata, sidey isu barbar socdaan la moodaa iney il keliya ka soo wada baxayeen, oo ay wadajir Ingiriis, Faransiis, Talyaani iyo Xabashi u qorsheeyeen, waayo inkastoo dadka Soomaaliyeed heshiisyo la dhigteen Ingiriiska markay ahayd 1884 iyo 1886. Heshiisyadaas oo ay ka mid ahaayeen:

(I) Inaanu dalka gudihiisa isku dhalin.

(II) Inuu ilaasho xornimadooda iyo nabadgelyadooda.

(III) Innanu wareejin karin, iibin karin, cid kale soo geli kari dalkooda.

Feeyigaan ay ka feeyignaayeen, Ingiriiska, amaba ay dareen ka qabeen daacadimadiisa bey waxay heshiisyadaas kula dhigteen docnni dusheed, isagoo aan weli dalka cagta soo dhigin, waxay na heshiisyadaas qarkood kula dhigteen haragmaqaaro. Haddaba iyadoo xaalka Somaali iyo Ingiris ka dhexeeyey heerkaas joogo, buu siduu Faransiisku falay 1887 si le'eg falay oo heshiis Xabashi la dhigtay markay ahayd isla waqtigaas May 14, 1897, wuxuuna heshiiskaas ugu oggolaadey inuu dalka Soomaaliyeed qayb ka mid ah, oo aaney hore weligeed cag soo dhigin siiyo. Taasoo uu ku xadgudbey oo dhabarka ka warmeeyey heshiisyadii dhex maray isaga iyo dadka Soomaaliyeed, oo ahaa 1884 iyo 1886 (Anglo Somali Treaties of Protection of 1884-1886).

Waxaa markaas is weydiin iyo ka baaraandeg leh, danaha Ingiriis ka lahaa qabsashadii uu qabsadey dalalka Soomaaliyeed xaggiisa Waqooyi.

Ugu horreystii waxaa la qabaa ama isaguba sheegay inuu u qabsadey dalka Soomaaliyeed xaggiis waqooyi inuu cunto uga helo ciidamadiisii marsada Cadan fadhiyey, khaas ahaan

hilibka xoolaha: Waayo Cadani waxay u ahayd halbowlaha isu gaarsiin jirey siyaasaddiisa isticmaarka. Isla markaasna wuxuu u qabsadey, inuu ku ilaashado nabadgelyada afaafka baddacas iyo danihiisa kale, oo ku xirraa Hindiya iyo Bariga fogba, kana ilaaliyo dawlad ku lid ah danahiisa iney qabsato.

Markii danihiisii sidaas ugu muuqdeen bey waxay ahaatey inuu inta xeebta ah isku koobo, si ay danihiisaasi ugu fulaan, dalka intisa Oogo ahna xilkiisa iyo ilaalintiisa ka warwareego. Sidaas darteed buusan markaas, dan ugu gelin dalballaarsigii Xabashida, oo dalka xaggiisa oogo ka soconaayey. Si kaleetona haddii loo eego xagga nabadgelyada, oo aanu rabin in kharash badani kagabaxo, faa'iido kale ayuu, iyana bidey, oo waa soo dhiirri geliyey iney Xabashidu soo dal ballaarsato, soona degto dalka xaggiisa Oogo, si iyada xilku ugu wareego. Waxaana u marag ah intaasi jirto, mar la weydiiyey wasiirkii arrimaha dibedda ee Ingiriiska, ee waayahaas, inuu yiri:

««Kama walaacsana dawladda Ingiriis dalka Soomaaliyeed. oo Xabashidu qaadaneyso».

Qoomamo iyo ciil lehe, sidaas dhibta yar, baa dalka Soomaaliyeed, Xabashida ugu gacan galay, iyadoo dadka Soomaaliyeed isku halleynaayeen Ingiriskay heshiisyada ahaa inuu ilaaliyo la dhigteen.

Sida muuqanadoonta shirqoolkii isticmaarku shirqoolaayey Soomaaliya intaas kuma ekaan, oo intii hore oo dhan dadka Soomaaliyeed war kama hayn, dabreynta ka socotey xarumaha reer Yurub, London, Roma, Baariis iyo Addis Sababa.

Hase ahaatee waxaa ugu horeeyey dareen ka galay dal balaarsiga Xabashida iyo wadajirka gumeystayaasha kaleba, Seyid Maxamed Cabdalla oo markay ahayd 1900 weerarkii ugu horreeyey ku qaaday Xabashida oo waayahaas Jigjiga soo degtey.



In Seyid Maxamed dareenkaasi galayna waxaa u marag fureysa markay ahayd 16 Juun 1899 waraaq qarsoodi ah oo uu qorey wakiilkii Ingiriis Berbera u joogay Mr. J. Hayes Sadler», (1) Wuxuuna Sadler ku qoray war bixintiisaas uu dawladdiisa u diray:

«Waxaa Shiikh Maxamed Cabdalle Xasan (Mad Mullah) ulajeeddadadiisu tahay, inuu dadka ururiyo, oo madax u noqdo, dalka intiisa oogana xukumo. Waxaana lagu dareensan yahay inuu u gabbanaayo, oo isu yeelyeelaayo inuu aakhirka markuu xoogsado Xabashida ku duulo».

Warbixintaas Sadler, iyo dhaqdhaqaaqyadii Seyid Maxamed oo ay guud ahaan gumeystayaashu kor kala socdeen, waxay dhalisay iney Xabashidu hiil warsato Ingiriis. Faransiis iyo Talyaaniga. Halkaasna waxaa ka dhashay iney iney saddex-duba wadajir heshiisyo ula dhigtaan 1906 uguna ballan qaadaan:

(I) Iney ka ilaalinaayaan wixii qalaanqal ah, oo is-haysadkeed halis gelinaaya.

(II) Iney taageeraan jiritaanka Imbiiriliyada Xabashida.

(III) Iney ka ilaalinaayaan xagga siyaasadda, gacanna qabtaan.

Intii shiqoolladaas is daba joogga ahi soconaayeen oo Ingiriis, Faransiis, Talyaani iyo Xabashi, Somaali waaxyeysanaayeen, xaggee baa dadka Soomaaliyeed jirey? Xaggee buu jirey dirrankii Gurey ka tegay, oo harada Tana jirdaha kaga gudbi jirey, ilaa Kafana saldhigay, oo boqorada buuro galeen ka dhigay? Miyey hasoobeen, hadaf habaabeen? Miyaase sandahay qaayahoodii? Mise cirir baa ku jiifoo, dareenkii iyo burjigii baa ka suuray? Aaway. miyaanu dirba dubnixin, dulbaaxin oo dagiigaxan?

---

(1 Public Record office of the Britannic Majesty's Goverment. fo 78/5031 — X/J 5473. year 1899.

Jawaabtu waa haa, oo Seyid Maxamed Cabdalla Xasan baa dubnaxay, dulbaaxshey oo intuu wax dareemay yiri:

«Daawo lagama helo gaal haddaad daawo dhigataane
Waa idin dagayaa kufriga aad u debceysaane».
Dirhankuu idiin qubahayaad dib u go'aysaane».

Sida muraidisaas ka dhadhameysa, wuxuu Seyid Maxamed oddorosey iney reer Yurub wax khatalayaan oo Soomaaliyi eedi doonto heshiisyada ay la dhiganeyso. Seymahaas uu oddorosayna siduu uga soo horjeestey waa sida qaybta soo socota.





Halyeygii Daraawiishta Seyid Maxamed Cabdalla Xasan.

# Halgangii 2aad iyo Seyid Maxamed Cabdulle Xasan

«Allow yaa Darwiishkii farriin, debecsan gaarsiiya
Allow yaa dabbaaldeg iyo farxad, kala dul eedaama
Allow yaa dalkaagii ku dhaha. dawladnimo qaadey
Dhaaxuu ku daakirey xaqoo, naga daboollaaye
Ha daawado dadka u hiiliyey, iyo doogga soo baxaye
Allow yaa dalluuntii iyo qabriga, dib uga soo saara
Fardaha yaa dirkii dhooddimeer, docna faracdiisa
Allow yaa darmaan fara taqaan, duqi u heenseeya
In Dariiqadii nooshahay. oo dihine soo gaarey
Oo uu dabkuu shiday rag kale, dogobbo sii saaray
Allow yaa af lama daaliyee, daacad ugu sheegay.

Qaasim/1960.

Sayid Maxamd Cabdulle Xasan wuxuu dhashay markay taariikhdu ahayd 1856 guga la baxay, ama la oran jirey «Gobeysane», oo ahaa gu barwaaqo ah. Wuxuuna ku dhashay balliga la yiraahdo «Sacmadeeq» oo 7 meyl u jira Buhoodle kana xiga dhanka waqooyi. Hooyadiis waxaa la oran jirey Carroo Seed Magan. Quraanka wuxuu ka bartey gurigooda, kaddibna wuxuu cilmiga ku korodhsadey arda xer fadhiyi jirtey Nugaal. Mar lagu qiyaasey iney taariikhdu ahayd 1892 buu wuxuu u kacay Maka iyo Madiina, waxayna is raaceen 13 wadaad, oo ay isku xer ahaayeen. Markuuse laba gu' iyo dheeraad ku maqnaa, ayuu ka soo degay marsada Berbera oo Ingiriis xukumo, cashuurna ka qaato ciddii ka soo degta alaabtooda. Intuu Maka Joogeyna wuxuu la fadhiyi jirey Shiikh Mamamed Saalax, waxna ka baran jirey. Waayihii danbana dariiqadiisii oo Saalixiya la baxday ayuu qaatey.

Waxaa la sheegay markuu Berbera ku soo noqdey, oo doonnidii ka soo degay, dekeddana, cagta soo dhigay in nin Ingiriisi ku yiri, «cashuur keen», wuxuuna ugu jawaabey» adigu ingiriis baa tahaye. yaa kaa qaaday cashuurtii markaad halkan ka soo degtey» Dabadeed turjumaankii baa ku yiri ninikii Ingiriis «Waa wadaad waalane inaka siiddaa, waxba yaanu cashuur bixine». Sida la weriyeyna halkaasaa loogu bixiyey wadaadkii waallaa (Mad Mullah). Soo noqodkiisii uu Maka ka soo noqdeyba 1895 waxaa dareen ka galay oo uu ka dhirfay siyaabihii gumeystaha Ingiriis dadka Soomaaliyeed kula kacaayey iyo diinta kiristanka, oo dalka ku fideysey. Haddaba isagoo horeba mabdi'iyan kufaarta iyo gumeysiga lid ku ahaa, buu isla markiiba la kulmay waxyaalo uu ka sii dhiidhiyey, waxaana ka mid ahaa, isagoo maalin maalmaha ka mid ahayd tegay meesha la yiraahdo Dhaymoole, inuu la kulmay wiilal agoon ah, oo inta Ingiriis ururiyey baaddiriyaal u dhiibey, si ay diinta muslinka uga saaraan ugana dhigaan kiristaan. Inamadii oo macatab qoorta ugu wada xiran yahay ayuu intuu is dhextaagey midkood ku yiri, «War magacaa» wuxuu ku jawaabey «Joon Cabdullaahi» gartey inaad tahay Joone yaa tahay oo kuu ahal ah», buu mar labaad weydiiyey, wuxuuna inankii ku jawaabey «Waxaan ahay «Reer Father» waxaana ii ahal iyo aabbe ah Baadiri «Filigis».

Isagoo Mr. J. Hayes Salder markay ahayd 20 Ogost 1899, dawladda Ingiriis faalle uga diraaya waraaq uu qabtey oo Seyid Maxamed, Suldaan Diiriye ugaga warramaayey carruurta Soomaaliyeed ee ku jirtey Mishinka Berbera. Wuxuuu sheegay iney mishankaas Berbera joogeen lix baadiriyaal, oo saddex rag ahaayeen saddexna dumar, carruurta ay halkaas ku hayeenna ay ahayd 39 wiil. Gabdhuhuna aaney tiradoodu marna dhaafin saddex iyo afar gabdhood.

Wuxuu Mr Sadler intaas raacshey, in inkastoo carruurtaas diinta kiristanka lagu barbaarsho, haddana markay ka baxaan mishanka, oo reerahoodii tagaan, ay diintodii islaamka



dib u qaataan. Wuxuu kaloo raaciyey in mishankaas dadweynuhu tuhun ka qabo, hase ahaatee aan markaas wax dhibi ka joogin.

Tu kale, oo uu la kulmay Seyidku waxay ahayd, isagoo masjid Jaamaca Berbera ku tukanaaya goor salaad hore ah. baa nin Ingiriis ah, oo askar watay intuu masjidkii isa soo hortaagay toogtey ma'addankii oo markaas addamaayey. Haddii la warsadayna sababta, wuxuu yiri: «Aadaankiisa baan ka seexan weyney».

Isagoo horeba ugu kacsanaa baaderiyada diinta kiristaanka fidinaaya, buu calool xumo ka sii qaadey mu'addankii la toogtey oo masaajidkii isla dhex taagey dood baanisa ah. Waxaana laga weriyey inuu yiri:

«Nimanyahow bal gardaradaas iyo gabood falkaas daya, ma diintaan u deynaa? Ma dalkaan uga tegeynaa? Annaba cida eydiisa kama gama'nee, xaajadu qaraaraa. oo qiiro weynaa. Awal cashuur keen bey joogtey ka timid oo carruur gaalays bey soo gaartey, maantana war waad aragtaan, berrina maxaa xigi? Waxaa xigi dullinimo iyo dushoo laydinka raro, aan ka digaye; aan ka digaye, aan ka digaye. Ma jahaadnaa. mise dhaqayadeedeynu dhowrannaa. An ka digayoo ka digaye, ninkii doorow halkaasaan hadal kuugu daayey. doqonse yeelkiisa».

Isla markiiba wuxuu ku hadlay ingiriiskii ayaa loo geeyey, dabadeedna isagoo weli masjidkii ka bixin baa waxaa loo diray askari. Askarigii baa markii masajidkii laga soo dareeray hor dhigay jaliilad oo yiri, «Sow Xaaji Maxamed ma tihid, jaliiladdaas soo qaad, oo xafiiska waaliga baa lagaa rabaaye iskeen «Wuxuuse askarigi ugu jawaabey», adigu ku rartaaye qaad jaliiladdiisa, Halkaasaa askarigii jaliiladdii qaaday, Seyid Maxamed barbar socday, oo loo tegay Waaligii Ingiriis, oo ay xafiiskiisii la fahiyaan la taliyayaashiisii. oo Soomaali iyo caddanba lahaa.

Sida la sheegay Seyid Maxamed Cabdulle Xasan wuxuu galay xafiiskii laga wacay, isagoo laba go' oo cadcad qaba cimaamad madaxa ku xiran. Waxaa Ferenjigii hadlkii ku bilaabey «galab wanaagsan «Wuxuu ugu jawaabey Seyidkii» belo aan adiga ahayn ma ogin» wuxuu ninkii Ingiriis mar labaad ku yiri, isagoo laga afcelinaayo, ««Wadaadkaagan waalan intii ayaamahaba warar baa lagaa soo sheegayey, wararkaasina waxay leeyihiin waxaad lid ku tahay boqoradda Ingiriiska Imberaaduuriyaddeeda iyo danaheeda ay ka leedahay dalka Soomaaliyeed, maxaa ka jira wararkaas») Markaasuu Sayidkii hadalkii qaatoo yiri, «Adigaagan sarta cad oo halka fadhiya, ma laguu sheegay, mise haddaan kuu sheegaa inaad lid ku tahay danaha dalkayga, diinta Islaamka, iyo aayatiinka durriyaddaydda? War duuflaale yahow maxaad ubadkayka u kufrisiin, oo macatab qoorta ugu gelin? Ka sii weyn'e maxaad mu'addinkii masuujidka, isagoo ilaah hortaagan, oo addamaaya u toogatey? annaba eydaada duleedda-dayada awleysa ma xaaleynee».

Ninkii ferenji hadalkii Seydku wuu taftaafey qoto dheeridiisii, hase ahaatee isma gelin, si aaney u dareemin Soomaalidii kaloo meesha joogtey, qiimana aaney u siin suuqana ka baaweyn. Wuxuu ugu jawaabey, «Dawladdu u dulqaadanmeyso maanta kaddib hadaladaas is dhaafka ah, oo aad masaajidka ka tiri, haddana aad ila hortaagan tahay. Markaas waan kuu digayaaye ha u noqon, magaaladana ha ka bixin ilaa aad ruqso naga heshid», Markaasuuu yiri, «Waa hadday taada tahay», oo irridkii ka baxay.

Haddii haddaba markaas ferenjigii, iyo raggii raacsanaa isku hareen, oo ka sheekeysteen Seyid Maxamed hadalladiisii, nin walibana fekrad ka dhiibtey, baa waxaa hadlay nin la oran jirey Aw Gaas, wuxuuna yiri, «Ingiriisow haddaan masajidkii ogaa wuxuu wadaadku ka dhigay, haddana aan hadal dhegeystey, iga gunud, welle haddaan maanta la qaban meel fog baa laga dooni.» Ra'yigaas Aw Gaas lama tixgelin hase ahaatee, sida la sheegay waagii danbe mushahaaruu Ingi-



risku ku siin jirey Aw Gaas oddoroskaas uu oddorosay Seyid Maxamed waxa uu noqon doono.

Waxaa kaloo jirtey inuu Seiyd Maxamed soo noqodkii uu Maka ka soo noqdeyba uu bilaabey inuu dadka ku hanuuniyo iney diinta islaamka tiirarkeeda adkeeyaan macsidana ka fogaadaan, isla markaasna raacaan dariqada Saalixiyada. Hase ahaatee, dhib buu kala kulmey, oo kuma guuleysan in Saalixiyada la raaco,max aayeelay dariqada Qaaddiriyadda oo Shiikh Madar madax ka ahaa ayaa waayahaas xog ku lahayd magaalada Berbera, sidaa darteedna aad uguma guuleysan, oo dad badan oo dariiqada Saalixiyada ku raaca ma helin.

Haddii haddaba, lays herdiyey ferenjigii, fidintii dariiqada Saalixiyadana u hirgel weydey, uuna dareemay in xaalkiisa lala socdo, buu muddo dabadeed magaalada Berbera miyigeeda u baxay, oo bilaabey arda xer, muddo yar dabadeednal col urursi. Waxaa dhacday in basaasiin Ingiriisku ka daba diray ay u soo sheegtay inuu rag iyo faras ururinaayo ina Cabdulle Xasan, taasina ulajeeddadeedu tahay col ururis. Halkaasaa Ingiriisku ka daba diray col ilaala ah, hubna sitey, oo dhamme Ingiriis ahi madax ka yahay. Waxaana dhacday in nimankii ilaalada ahaa mid ka mid ahi, lana oran jirey Ducaale Xirsi uu buntukhii dhammaha la baxsaday. Ingiriiskii Berbera joogeyna wuxuu war ku helay in Ducaale Xirsi, Seyid Maxamed buntukhii ula galay. Markaasuu warqaddan u diray Qunsul ku xigeenkii Ingiriis Berbera u joogay «Cordeaux».

Wuxuu u qoray, «Salaan kaddib waxaannu war ku helley. in nin la yiraahdo Ducaale Xirsi uu buntukh (Rifle) ka xaday «Captain Cox oo uu u shaqeynaayey, dabadeedna uu buntukhii adiga kuu keenay.

Sidaas aawadeed baan warqaddan kuugu soo qaray, haddii aad haysid buntukhaas inaad si dhakhso leh Berbera u keentid.

Seyid Maxamed, isagoo uga jawaabaaya «Cordeaux» warqaddiisii buu dhinacedii kale, wuxuu ugu qoray.

«Ilaah maaha'e. Ilaah kale ma jiro, Maxamadna waa nebigiisii. Ninyahow! waxba kaama xadin, adigiyo cid kaletoonna. Ka doono ciddii ka xadday, sheygii lagaa xaday ninkasta ha ahaadee (1).

Waxaa kaloo jirtey, iney waraaqo badani dhex mareen Seyid Maxamed, iyo saraakiishii Ingiriiska Berbera u fadhiyey. Mid ka mid ahna wuxuu ku yiri, Seyid Maxamed:

«Waxaad ogaataan nimaan gacal nahay ma'ahe. nin kale inaan caawimin. Walaal lama noqdo nimaan walaaltinnimadu qiimo la lahayn. Umana debco, ciddi himilooyinkayga ka soo horjeeda. Aqoonsi igama helo, nimaan i derejeyn. Gacaltooyo nama dhex mari karto, nin cadow iga soo horjeeda ah, oo xumahayga xalaaleeyey. Una debcimaayo markuu cadowgeygu i cadaadiyo ficil. iyo hadal markay noqotana, waw gudboonnahay ilaa inta hal hadhuudhi culeys le'eg yahay. Sidee baa caddaalad, cadaadis loogu daaweyn karaa?

Markii nin xor ah cayryaamo cadceedda ka qariso. ma qaadan karaa? Waxaan idin leeyahay, laba faras isla mar ah fuulina. Waxaad ka dhigan tihiin laba lugoodle, lugi u bed qabto, tan kalena dhaawac tahay. Taasoo ah xagna nabadgelyaad ka rabtaan xag kalena dagaal, waa xaajo aan islahayn». (3)

Intaanu dagaal bilaabin, wuxuu bilaabey inuu aslaax ka dhex dhaliyo dadkii degganaa agagaarka Burco iyo Hawdkeeda bari. Wuxuu kaloo ololeh lixaad leh ku qaadey inuu dadka ku hanuuniyo xagga adkeynta diinta islaamka, iyo ka soo horjeedka gaalada, isla markaasna isagoo tusaale ka dhiganaaya wuxuu Berbera ku soo arkay, ayuu gelisiiyey dadkii Soomaaliyeed iney waajib tahay in kufaarta lala dagaallamo, dalkana laga saaro Ingiriiska.

---

(1) (2) (3) Confidential public record office London Fo.78-5031-X-J. 5437 No. 5.



Abuurka halyeynimadu, iyo xubnaha madaxnimadu leedahay, rag yar baa u dhasha oo inta badan nin dhif ah, baa yeelan kara, karaan iyo maskax uu dad wax kaga dhaadhiciyo oo isku dubbarido, meelna ka soo wada jeediyo. Seyid Maxamed wuxuu ahaa halyeyada dhif dunida ka kaca, oo waxaa hibo loo siiyey inuu u dhasho gabayaa, aftahamnimo, garaad dheeri, diin aqoon, iyo xirib dheeri. Xubnahaas iyaga ah buu markaas dadkii ku hantiyey, oo waddaninimo, iyo Ingiriis nacyb ku abuuray, ilaa ay gaartey heer nin walbi u soo hiloobo Seyid Maxamed iyo halkuu joogey.

Waa laga yaabaa in waayahaas, ay jireen rag kaloo aqoon dheer u lahaa xagga diinta, ama gabayadaba, hase ahaatee wuxuu kaga tegay xagga waddaninnimada oo loo aqoonsan yahay, inuu haa ninka keliya, oo qoomiyadda iyo waddaninnimadu waxay yihiin fahamsanaa, cahdigaas uu kacay.

Tusaale ahaanna waxaa ka mid ah, tixdan uu ku muujiyey qoomiyaddiisa, iyo siduu uga calool xumaa dhibaatooyinka isticmaarka Ingiriisku ku hayey, ama la damacsanaa ummadda Soomaaliyeed wuxuu ku yiri tixdiisaas;

«Leecaanta Soomaaliyeed baa luri caloosheyda
Luufluuftadaasaan u dhiman, laafo lugudkeeda
Maandhow lugtii iga jabtaan luudiyaa weliye».

Qoomiyaddaas uu quluubtii dadka ku beeray, iyo diinta islaamka, oo uu xoogeynaayey kufaarna uu la jahaatamaayey, ayaa dadkii Soomaaliyeed si laxaadleh u raaceen, daraayey, wiishna, uu ku habeeyey isagoo ugu horreystii deggan Kobfarood, oo uu markaas masaajidka ka dhisay.

Markay ahayd bishii Marjo 1900 waxuu weerarkiisii u horreeyey ku saaray magaalada Jigjiga oo markaas muddo yar ka hor, Ingiriis Xabashi ku wareejiyey.

Duullaankaasoo aaney Xabashiyi fileyn laba siyood ayuu cabsi dheeraad ah u geliyey. Ta u horreysa waxay dareentay oo cabsi geliyey inuu Seyid Maxamed sido dhimbiishii hurin lahayd kacaan kiciya dadka islaamka ah, oo geeska Afrika ku nool, siduu Axmed Gurey falay qarnigii 16aad. Tan labaadna waxaa cabsi ka gashay ku soo dhowaansha uu ku soo dhowaadey, magaalada Harar halyey jahaatama ah, oo shucuur iyo qoomiyadii waddo, taag ay keligeed ku horjoogsatana qabin.

Cabsidaasi waxay markaas keentay, iney u soo jeediso Xabashidu, dawladda Ingiriis iney wadajir dagaal ku qaadaan Seyid Maxamed, iyo Daraawiish (Anglo-Ethiopian Campaign) (1) waxayna ku soo saareen ciidan tiradiisu tahay 15,000 Xabashi ah, iyo dhowr kun oo Ingiriis, Hindi iyo Soomaali isugu jiray, oo uu watey «Lt. Col. Eric Swayne» Cidamadaas wadajirey, oo ka hub sitey Daraawiish misana kama guuleysan oo laba saddex jeer, oo lays haleeley daraawiish baa bursatey. Waxaana ugu wacnaa Seyidkoo ka xeelad badshay, amaba kaga garasho roonaaday dalka biya li'idiisa, iyo noloshiisa kale, oo tabaha dagaalka wax u dhimi karta ninkaan aqoon.

«Swayne» iyo colkiisiina waxay ku noqdeen magaalada Burco, iyagoo kabna gashan kabna laadlaadinaaya, oo aan Seyid Maxamed gacanta ku dhigin, xooggiisiina wax u dhimin. Xabashiduna sidaas si le'eg bey galbeed ugu noqotey, oo xeeladdeedii dagaal ku habeysey inaanu xaggeeda u soo kicin.

Sida la og yahay Seyid Maxamed wuxuu ahaa nin murtida hibo loo siiyey wuxuuna daraawiish iyo dadka Soomaaliyeed, oo jahaadka kula jirey ku baraarujin jirey, oo wax ku tusaaleyn jirey gabayo, geeraaro, jeeftooyin iyo wiglo, sida loo maleynaayona, waxaa la qabaa iney tixahan ka mid yihiin gabayadiisii ugu horreeyey tixo ka mid ah, oo uu wax ku hanuuninaayey, wuxuu ku yiri:

(1) Leaders in East Afrika Edited by norman. P. 78.



«Ma waacidada diinkii, ma wax laysku magaa?
Jahaadka moosinkii galay, ma wax laga maqnaadaa
Mushaarka beenii, ma wax lagu mannaagaa?
Loxodkii madoobaa ma lays moogadeeyaa?
Muufade cadaabeed maw adkeysaneysaan?
Gaal nin u midiidimey, maqaan naara inuu tegi
Kutubtaa u maragee, ma wax lagu murmaa baa?

Mariyoo micneeyaye, mid kaleeto wuxuu yahay
Waxaan maqallay. Ferenjigu inuu miiri idin qorey
Waxaan maqallay madaxdiina in madiidin laga dhigay
Aan miis yar mooyee maydho geel la siineyn
Waxaan maqallay maahyahow magaciin inuu ba'ay
Intaasoo masiiba, ah waxaa igala maad badan
Maska iyo abeesada, magta aad ka bixisaan
Aadan midigta fidineyn aar hadduu ku miciyeyn

Kaddib markii Daraawiishi ka guuleysatey ugu horreystii cidammadii Ingiriiska iyo Xabashida oo wadajirey, hase yeeshee Ingiriis u qaadan waayey, buu markaas ku soo saaray dagaallo is daba joog ah. Dagaalladaas kii u horreeyey wuxuu ahaa 3dii Maajo 1901, wuxuuna ka dhacay Afbakayle, waxaana ku xigay goobaha ah Samaale, Harardhiig ' iyo Ceelcad. Dagaalladaas iyaga ah, oo birtu dheregtey daraawiish, ayaa guusha heshay. Waxaa ku xigay kii ka dhacay Faradhiddiin 16kii Julaay 1901, iyo kii Feb. 1902 oo uu Ingiriis soo diray 2,300, oo nin oo Swayn madax ka ahaa, kaasoo ka dhacay gaalkacayo meel konton meyl waqooyi galbeed ka xigta oo daraawiishi intey gaadmo daran colkii Ingiris ku sameysay caw la googooyey ka dhigtey, colkiisii jabeyna Swayn wixii ka haray isugu urursheу Bohoodle, si uu col kordhis, iyo talooyin hor leh, dawladdiisii uga sugo.

Ingiriis oo isu qabey waayahaas inuu dawladaha caalamka ugu xoog roon ka mid yahay, waa leqi waayey, sida Seiyd Maxamed uga libeystey. Sidaa darteed buu markaas

soo rogaal celiyey, isagoo aan waxba la barin, oo oo wata cidamo xoog leh. Waxaana lagu dagaallamay goobaha caanka ah oo la baxay Beerdhiga 10kii Agosto 1902, Faragooye iyo Cagaar weyne 17kii Agosto 1903, Daratoole 18kii Abriile 1903. Intaas oo gobood Ingiriis waa lagaga adkaadey. Sida la sheegayna hubkey Daraawiishi u aydey, oo waayihii danboo dhan ku dagaallami jirtey waa hubkay kaga furatey goobahaas. Seyid Maxamed waayihii hore dagaallada waa ka qayb geli jirey, oo kuwuu ka qayb qaatey waxaa ka mid ah Haradhiig, Fardhidhin iyo Beerdhiga, inkastoo kan Beerdhiga uu abbaanduulihii colka watey, oo la oran jirey Inadheri kaga dhaartay inuu ka qayb galo. Inadheri goobtaas Beerdhiga ayuu ku dhintay.

Eeragoye (1) waxaa Ingiriis daraawiishi kaga dishay Askarta ka sokow Saddex Sarkaal oo kala ahaa «Gaashaanle Philips, dhamme Angus iyo dhamme Friedrich, waxaana kaga dhaawacmay dhamme Haward iyo L. Xiddigle Evertt. Waxaana ilaa markii dagaalka daraawiisheed bilaabmay 1899-kii ilaa bishii Juulay 1903dii Ingiriis daraawiishi goobahaas dagaalka kaga dishey 12 Sarkaal oo derejo kasta ku jirto Afarna waa lagaga dhaawacay. Waxaa Gumburo keliya lagaga dilay 9 Sarkaal. (2).

Maansooyinkiisa aad u qaayaha leh baa lagu tixgeliyaa oo lagaga qiyaas qaadan karayaa, wuxuu ahaa iyo wuxuu rabey oo ujahaadtamaayey. Waxaana ka mid ah, jiiftada la baxday «Doodna waxaan u leeyahay», jiiftadaas iyada ah, isagoo Xaaji Suudi Shabeele, oo khusuusidiis ka mid ahaa kula doodaaya, ayuu haddana dad oo dhan da'kasta ha ahaatee ku guubaabinayaa, fikrado badanna ku muujinayaa, wuxuu ku yiri tixo ka mid ah:

---

(1) British war office Rocord P. 105.

((2) British war Office Record P. 169.



Nin dalkiisa iibsadey, dulli buu waariyoo
Ninkii gaalka daba gala, carxumow danbeynoo
Naftu hadday ka duushana, dalku weysa diiciyo
Inuu haadku ciirdiiran. waa sida daruurtoo
Dulbaaxdiisa feeraha, dab baa laga shidiyaa
Hadduu waayo darib cuno, waa laga danbeynoo
Ninkiise dawga dhaafaya. daawo looma helaayee
Digtoonaada weligiin, dunidu waari meysee.
Doodna waxaa u leeyahay, dumarkiyo carruurtow
Dadkii idinka weynaa, hadday idin dulleeyeen
Dembe kama ay yaabine cuntey idinka doorteen
Duunyaa la dhaafsaday dugsigaad geleyseen
Dameerkuuna ma yeeleen halkay talo ku daayeen
Daba intey shideen bey, dalaq idinku siiyeen
Doox intey qodeen bey, ciid idinku daadsheen
Nin idin daqmanayaa. idin kama danbeeyoo
Haddeydaan digtoonaan, daad beydin qaadiye
Duleeddada kufaartaa, dacas idinku laynoo
Naf dulkaaga dooni, furaash looma daadshee
Dabkaanan shidaayaa, dawadiina weeyee
Dariiqii rasuulkiyo dawga ha uga beyrina

Gulahaa is daba joogga ahaa, oo daraawiishi muddadaas gaaban, oo ay dhisneyd ku gaartey waxay keentey, in xarumihii gumeystayaasha London, Addisababa iyo Roma kaga sheekeystaan. «Seyid Maxamed fogaa, isku duubbarid dadkii Somaaliyeed, Islaamkii kale oo geeska Afrika ku noolaana waa u beylah, oo waa Axmed Gurey labaad. Dalballaarsigi Xabashiyeed iyo gumeysigii geska Afrikana suuragelimaayo, oo waa hortaagan yahay. Haddaan wadajir loo qaban meel fog baa laga dooni.

Sheekooyinkaas ka dhacay goloyaasha siyaasadeed, ee xarumaha saddexdaas dawladood, waxay dhaliyeen markay taariikhdu ahayd Jan. 1903 iney wadajir ugu heshiiyaan in dawraaiish saddex jaho lagaga soo duulo, oo laysu celiyo si ugu

danbeystii loo tirtiro (Anglo-Italo-Ethopian attack against dervish) hase ahaatee waxaa dhacday in Talyaanigu diidey xagga kharashka, oo aanu karayn. Wuxuuse oggolaadey docduu kaga soo duuli lahaa oo ah xagga Hobyo, in Ingiriis ka soo dego oo uu taageero ku siiyo.

Dagaalkaas wadajirka ah waxay ahayd tallaabadiisa hore in daraawiish dhul oommane ah lagu go'doonsho, oo Xabashiyi qabsato ceelasha Walwaal iyo ceelaldhaadheer, isla markaasna ka ilaaliso xagga webiyada, Ingiriisna ka horjoogsao biyaha Burco iyo Caynabo, Talyaanina Gaalkacayo iyo wixii ceelal Mudug ku yaal. Halkaasna marka biyo la'aan dad iyo duunyo ku dhacdo Seyidku is dhiibo, ama isagoo taagdaran la qabto.

Dawladda Ingiriis waxay ku soo magacawdey inuu madax ka ahaado weerarkaas fulintiisa nin Ingiriis ah, oo la oran jirey Janan «Manning». Wuxuuna Berbera ka so dejey ciidan dhan 1900 oo nin, isuguna jira dad Afrikaan ah, oo laga keeney Afrikada dhexe, Soodaan, iyo Hindiya, oo uu markaas Ingiriis dalalkooda gumeysan jirey. Hobyana oo Talyaani u oggolaadey wuxuu ka soo dejiyey 2000, oo isugu jira Ingiriis Hindi iyo Soomaaliydii rakuubleyda ahayd. Xagga Xabashida iyo galbeedna waxaa ka soo baxay 15,000 nin, oo Xabashi ah, uuna madax ka ahaa «Fitawarari Gabre, Waxaana colkaas Xabashida hoggaaminayey saraakiil Ingiriis ahayd.

Inkastoo, daraawiish sidaas loo shiqoolay, oo saddexdaas ciidan oo saddexda jaho kaga yimid meel isla dhigeen, iney daraawiish iyo Seyid Maxamed labo dhagax dhex geliyaan, misana ma dhicin, oo labadii ciidan, oo Ingiriis midna Berbera ka soo saaray midka kalena Hobyo ka soo dejiyey, iyagii uun baa is hirdiyey, iyagoon daraawiish col weynaheed il saarin ciidamadaas huwanta ahaa qaybtii Xabashidu jahawareer iyo harraad bey u le'deen wax yar baana ka noqday.



Guuldaradaas Ingiriis gaartey, waxay ku galaafatey, oo sababtay ninkii dagaalka madax ka ahaa Janan «Manning», oo si degdeg ah xilkii laga qaaday, Londonna dib loogu celiyey markay ahayd Julay, 1903. Waxaana beddelkisii iyo inuu dagaalkii ina Cabdulle Xasan halkii ka sii wado la keeney Janan «Egarton» isla markuu Janan Eagarton xilkii la wareegay, wuxuu muddo gaaban isu keeney oo dhisay ciidan dhan. 8,000.

Intii kuma harine, mar labaad bey wadajir saddexdii cadow u soo cusbooneysiiyeen duullaan hor leh, oo ka soo weerareen saddexdii jaho ee hore, waxayna Ingiriis iyo daraawiishi isku herdiyeen oo dagaal qaraari ku dhexmaray Jidbaale markay ahayd 10kii Janaayo, 1904. Halkaasna waxaa lagaga lib heley darqwiish, waxayna ahayd goobtii iyo markii u horreysey, oo daraawiish, cadowgeed ka libeystey oo naafo xun gaarsiiyey. Seyidkuna isagoo marna ka tiiraanyoonaaya jabkii iyo wixii ku dhacay, marna daraawiish ku guubaabinaaya jahaadka, oo kaga hortegaaya fidin la fidiyey in daraawiishi jabtey, wuxuu gabay tixahani ka mid yihiin ku yiri:

«Ballan fure kuwii aan lahaa, boowayaashaye
Burris bey ahayd dhaar waxay, boholo jeexeene
Wixii ay billaahida mareen beenshe taladiiye

Qaylada bayaanka ah haddii, buunka lagu yeersho
Birmadkii la soo yaaci jirey, haatan laga baadye
Waxa baqo loogu, didey waa baraad li'iye

Aarkuba wuxuu balacsadaa booddo ka horowe
Baka-owyada intey looshadaan, beri ma doontaane
Nimankii bannaagooda jirey baafin mahayaane

Ragga haatan baashaalin, wow baraq nugeylkoode
Baasaba colaadeed haddii, belelku qiiqaabo
Banaadiikhda nimankii la dhacay, beegsan mahayaane

Sidii ari bulad galay raggii, buuradka u jiifey
Baqalyuhu ragguu cunahayee, boobey hilibkooda
Marna ka biriiryaabayaan, baalcaddii shaleye

Buuhabuhadii laga tegiyo, baabuul kicintiiye
Gortii loo bareerey ciyow, balow yiraahdeene

Anigaaba baaloon hayee, baarax baa dhacaye
Waa beydad nimankii la dhigay, buuro dhinacoode
Baqihii Jidbaalaa ka dhigay, baali caano lehe.

Nimanyahow si baas baa qalbigu, ii belbelayaaye
Sidaan bari idaad cuney wadnuhu wey bug leeyahaye
Bedenkeyga waxa saas u galay, waa booin iyo ciile

Buska waxaa igu ridey gaaladi, balagta dheereyde
Wuxuu beerka ii ruxan raggay, baga u laayeene
Waakaa waraabuhu ka bogan, burunjideydiiye

Raggii aniga ii burin lahaa, waa bud aakhiro'e
Eebbow baqdhoos baa haraan, biidne tarihayne
Buurge iyo waxaa ii arrimin, Buqulkii gaabnaaye

Eebbow birtaan rabin sidii, beydaroo kale'e
Eebbow berriyo saaddambaan bixitimaayaa
Eebbow waxaan si bigleyn, biliqda deyreede

Tabaha dagaalka daraawiish wuxuu ahaan jirey inta badan galaame, iyo tafwareemad ay tafwareemato col soconaaya ee ma'ahayn inta badan iney weerarto col deggan oo dhufeysyo ku jira. Haddaba maalintaas Jidbaale, waxaa jabkeedii sabab u ahaa, colkii Ingiriiska, oo heegan dhufeysyo ugu jira bey bareere u galeen. Markaasuu boobey hubkii cususlaa iyo kii yaryaraaba. Jabkii Jidbaale markuu saas ugu dhacay oo gumeystayaashii wadajirey ka soo ciriiriyeen jahada galbeed, waqooyi, iyo koonfur Bari, ayaa daraawiishi u guurtey jahada Bari, oo ahayd jahada keliya oo u furreyd, halkaasoo ay degtey dooxada Jiidaliyeed.



Waxaase jirtey intaaney u guurin Bari, in Seyid maxamed khusuusidiisii ka talageliyey halkay daraawiishi saldhigi lahayd, iyo ciddey cawaansan lahayd. Waxayna u soo jeediyeen, isaguna uu ku raacay in Bari loo guuro, boqor Cusmaan na daraawiishi weydiisato inuu gacan ku siiyo jahaadka ay kula jirto saddexda cadow.

Sidaasna Seyid Maxamed farriin ugu diray boqor Cusmaan waana ka yeelay, oo wuxuu ugu soo jawaabey, saddex hal, oo dagaalka wax ka taraaya oo Nugaali lahayn, daraawiishi ha uga soo guurto. oo Bari ha u timaaddo. Saddexdaas oo ah buuro dagaal laga galo, biyo dad iyo duunyaba ku noolaadaan, iyo bad hub iyo soori ka soo degi karaan, xooluhuna isweydaar uga dhoofaan».

Bacdamaa Seyid Maxamed saddexdaas xubnood oo xeeladaha dagaalka qaayo ku leh lagu ciilay, farxad ayey gelisey jawaabtii boqorku, oo isla markiiba Jiidali iyo Bari ayuu daraawiish u raray.

Hase ahaatee, waxaa dhacday, si kastaba ha u timaaddee, ama saldanadiisaba ha u baqee, inuu ballan furey boqor Cismaan, oo col xoog leh daraawiish kaga hor keeney dooxada Dharoor la yiraahdo, iyadoo daraawiishi itaal daran tahay, abaar xumina soo heshay, oo hiirtaanyooyinkii Jidbaale aan weli ka bogsan.

Dagaalkaas Dharoor ka dhacay si xun baa daraawiish oo warmaqabta ah loogu galay, ciidankii kaloo ilig u fadhiyeyna loo kala jaray. Wuxuuna ka tiriyey gabey calaacal ah, isagoo ka murugoonaaya sida wax loo yeelay daraawiish, boqorkuna col uga hor keenay, isagoo ballan furyo sameeyey. Gabeygaasuna wuxuu la baxay Jiinley, oo wuxuu ku yiri tixahan ka mid ah:

«Waxaan Jiidha waaberi kacoo, jalafsadoo luuday
Jarmaadada aroortii, waxaan juhul madoobaadey
Waxaan dhegaha jawgii ka baxay, jibin dhow moodaayey.

Wixii aan jajuurgalay, wuxuu jawrey bedenkaygu
Rabbi baygu jeefagay wuxuu julular ruuxayga
Jaldhanka iyo baahida, waxaan jalaq heemaarshey

Haddaan boqor jawaab iiga iman, bad uma jeeleene
Jirku ima xanuuneen hadduu, joog i leeyahay'e
Jeclaantaan u qabey baan u tegay, jaanka bodhihiiye

Jeer baa ilaah ii qadderey, jiirahaan mariye
Jidaha in mel loo wado, jaahil baan garane
Waxase igu jarribey, waa minkii jookha ii lulaye

Isla markaa dagaalkaasi Dharoor ku dhex maraayey daraawiish iyo boqor Cismaan, waxaa Ingiriisna ka soo dejinaayey ilig ciidan 500 nin ah saarraana labo markab oo kuwa dagaalka ah, wuxuuna ka qabsaday daraawiish qalcad ilig uga dhisnayd.

Haddii haddaba, Ingiriis iyo ciidamadey wadajireen galbeed iyo Nugaal ka soo kiciyeen, Ilgna uu ka qabsaday, Dharoorna boqor Cismaan ku jebiyey, bey markaas la noqotey Ingiriis inaan Seyid Maxamed iyo daraawiish dhaqdhaqaaq iyo dagaal danbe ku harin, oo ay halkaas ku naafoobeen, waddo kale oo u furrina aaney jirin isdhiib uu Seyid Maxamed isdhiib ma'ahe.

Waxaa markaas Ingiriis goostay, isagaan waxba iskaga tirineyn Seyid Maxamed, inuu farriin u diro, oo kala doorransiiyo in la tirtiro, isagiyo daraawiish, inuu oggolaado inuu isdhiibo, oo markaas wuxuu doono la siiyo, dabadeedna, nabadgelyo isagoo musaafiris ah Maka la geeyo.

Hase ahaatee, soo jeedintaas Seyid Maxamed wuu ku gacan seyray sida uu gabeygiisa dardaaran tixa ka mid ah ugu danbeystii ku yiri:



«Anaan ferenji dooradu ku taal, nabad ka dooneyne
Anaa diidey maantuu lahaa, deeqan iga hooye.
Dalka ma lihide anigaa ku iri, doora weynaha'e
Anaan labada daarood tan hore, derejo moodeyne.

Doofaarka ayga ah anaan, daarihiis geline
Anigaan dillaalkiyo ardiga, duubiguu xirane
Anigaan dariiqii Alliyo, diinta caasiyine

Siduu Ingiriis maleynaayey ma dhicin, oo inkastoo daraawiish aad wax loo yeeley wuxuu Seyid Maxamed dejiyey, oo xarun uga dhigay Eyl. Sida war lagu helayna Ingiriis waa qoomameeyey qabasho la'aanta uusan qaban «Egarton» Seyid Maxamed maalintuu u liitey. Waxaa kaloo dawladdiisii soo gaarsiisey canaan xun, kaddib markii ciidankiisi oo ka koobnaa Hindi, iyo col Afrikaan ah, oo la oran jirey «King Afrikan Rifles» iyo Soomaaliba qalaanqal ka dhex abuurmay, oo qaarkood caasi garoobeen.

Intii hore, oo dagaalku ka soconaayey Nugaal, iyo Hawd galbeed waxaa ka cabsanaayey, oo Seyid Maxamed wadnaha warmo kaga hayey Ingiriis iyo Xabashi. Markuuse 1904 saldhigay Eyl, oo ka mid ahayd dhulkuu Talyaanigu isha ku hayey, isagey cabsidii la soo deristey. Maxaayeelay dadka Soomaaliyeed, oo Marka iyo Dhoobey dega, ayuu Seyid Maxamed gacan ka siinaayey dagaalkay kula jireen Talyaaniga.

Sidaas darteed bey markaas dawladda Talyaani u qalqaalisey, iney heshiis nabadgelyo ah, la dhigato Seyid Maxamed, ayna, u aqoonsato inuu u madax bannaan yahay Nugaal iyo nawaaxigeeda oo dhan.

Haddaba markay ahayd 16kii iyo 17kii Oktoobar 1904kii ayaa qunsulkii Talyaaniga Cadan u fadhiyey, oo Bastaloos (Pestalozze) la oran jirey, Seyid Maxamed kula kulmey Ilig oo hadallo kula yeeshay. Bishii Maarso 3dii 1905 baa

heshiiskii Iligeed rasmi ahaan loo kala saxiixday kaddib markuu Bastaloosi kala soo tashadey dawladdiisii. Dawladda Ingiriisna waa aqoonsatey heshiiskaas, maaddaama Seyid Maxamed iyo daraawiishi cabsi ku hayn, ayna ka baxeen xudduudkiisii iyo intuu dalka Soomaaliyeed ka sheeganaayey.

Teeda kale inkastuu heshiis la dhigtay innaba Seyid Maxamed Talyaani cabsi kama qabin, mana tixgelin jirin, waana yasi jirey, oo aad buu u xaqiri jirey dadnimadiisa iyo dabadhilifnimadiisa uu Ingiriis dabadhilif u ahaa. Wuxuuna ku tilmaamay tixo ku jira jiiftada ah «dacwad baan ka leeyahay», oo uu waraaq Ingiriis u soo diray uga jawaabaayey, wuxuuna ku yiri tixihiisaas:

«Talyaani waa dadkaaiyo. daayaciin aad wadataa
Haddii aadan duqlaaleyn, Danood sooma aadeen
Diraac Doollo iyo ciid. duullaan kuma yimaadeen
Dhigaanyo ciidana, darka nooma keeneen
Dildillaaca waaberi, weerar naguma daacsheen
Durqan nama dhex joogeen, adaa hiil ka daalibay
Adigaa durraamiyo, docogeysi ula tegey
Adaa yiri Daraawiish, dirirteeda ii raac
Isna diradirayntaada, iga daaso kuma oran
Intaad dacatiysana, sow kulama daalayn
Sow dab iyo xoolo, daabbad kuguma caawimin
Sow daraaddi kuma iman, Hobyo wixii ka soo degeye

Seyd Maxamed heshiskiaas Talyaani ulama dhigan gumeysiga Talyaaniga ku doorso kan Ingiriis iyo Xabashidii la jirtey, ama cabsi uu ka qabey, ee waxay ka ahayd ishaafalateyn uu ku ishaafalateynaayey giddigoodba,, si uu waqti uu daraawiish dib ugu dhiso u helo, ugana soo kaabto jabkii ku gaarey Jidbaale iyo Dharoor. Waana ka faa'iideystey oo wuxuu isla markiiba bilaabey ciidan urursi, iyo fardaha oo gaadiid dagaal u ahaa beerrinkoda iyo carbintooda, daraawishna intuu madaxyo u kala bixiyey, ayuu hab cusub u dhisay



sida ka muuqata tixdan uu ku kala sifeeyey toddobadey kala ahaayeen isagoo ay guubaabo iyo isku lis ka ahayd wuxuuna yiri:

**Shikhyaal gaade iyo col weyn, haatan laga gaarye**
Goor iyo ayaan nimanku, waa gaardiyahayaane
Golaweyne maantii la galay, gaaladii jebiye
Girligaanka waatuu la dhacay gureygi fiicnaaye

Rugxuntii gafuurada xumeyd taa la garan waaye.
Geelooda waatuu la tegay gucunkii xeebeede.
Taargooye kama soo gabbado. guuyadiis dhacane
Gaaleyska waa gelin hayaan, nimey la gaaraan
Indhabadan rag wada gurtiyoo, geesiyaa dhalaye
Ninna uma garaabeene dan baa looga gees maraye
Gobta Miinanlaan laga eryoon. Geydho iyo Laane
Abidkodba goob laysku galay, geeri ma la'aane
Dharbash Eabbahay baa galladay, goob u dirirkiiye
Abidkoodba ceeb lala god galo guri ma keenaane

Heshiiskii Iligeed faa'iido weyn ayuu daraawiish u yeeshay,oo waqti ay dib u xoogsato oo karaan ku yeelato rogaal celin hor leh ayey heshay. Ingiriisna barkimo ayuu dhigtey mar haddii aaggiisii daraawishi ka guurtey. Hase ahaatee Talyaanigii rabey, inuu ku dhex hayo darawiish boqor Cismaan iyo Kenaddiid si aaney Marka iyo Dhoobey oo dagaallo ka soconaayeen isu garabsan, waa isla rogtey, oo waxa dhacday in darawiishi soo rogaal celisey, oo koonfur u soo luga fidsatey, ilaa ay waayihii danbe qabsatey Gaalkacayo, saldhiggeedii u weynaana ka dhigatey, Beledweyn calqadda la baxday «Cagahiig» Buuloberdena ciidankii Talyaaniga u fadhiyey cagta marisey, oo goridda hor dhigtey Gaashaanle Talaani ah, oo madax ka ahaa.

Seyid Maxamed halkaas kuma ekaan, ee wuxuu garabgelyo iyo gacan u soo fidiyey Somaalidii Marka iyo Shabeela-

ha Dhexe Talyaani kula dagaallameysey, sida tixihisana uu ku yiri:

Ilkadheer iyo luuq haddaan laga awaareynin
Adduunyada haddii aanan ka shabin tan iyo Awdheegle

Ololaha colkaan wado haddaan laga ashaatoonin
Jidka Adari loo maro haddaan laga ugaaroobin
Meeshiyo Iimey haddaanan weerar ku ekaynin».

Nin adduunyo foofsada haddaan uunka la waayin
Bullaxaar agteediyo haddaan Awdal laga yaacin
Ooryaha Amxaaradu haddaney Cadan ka awleynin,

Siduu gabeygiisa ku sifeeyey ayaa dhacday oo garab-gelyaduu siinaayey Soomaalidii dagganeyd nawaaxiga Marka iyo Shabeelaha Hoose, dhowr goobood, oo ay ka mid ahayd Lafoole, bey Talyaani ku goobeen. Waxaana dhacday markay taariikhdu ahayd ilaa 1904 in Somaalida Shabeele ka gacan sarresey Talyaaniga oo uu miyiga inuu ugu yimaado ku dhici waayey, kuna ekaa xeebaha oo keliya. Waxaa qoommiyaddii ka aloogantey Shabeellaha Hoose, oo Seyid Maxamed taageeraayey ileyskeedii demey 1908 kaddib markii Talyaanigu ka guuleystey.

## SHIRQOOLKII SEYID MAXAMED LAGU SAMEEYEY EE LA BAXAY CANJEEL TALAWAA

Markay ahayd 1906, oo daraawiishi xoog iyo xolaba yeelatey, Seyid Maxamedna la damacsan yahay iney daraawiishi jaho walba jahaad ka gasho, ayey magaalada Cadmeed Talyaani iyo Ingiriis wadajir shirqool ula sameeyeen ninka la oran jirey Cabdulla Shixiri, ama loo yiqiin «Ina Shixiri», oo arrimaha dibedda daraawiish u qaabilsanaa hase ahaatee Cadan uga fikadey. Shirqoolkaasna waxay isla garteen maaddaama dadka Soomaaliyeed diinta Islaamka ku adag yihiin, in xagga diinta ceebo looga yeelo Seyid Maxamed.



Sheeko waxay sheegeysaa, inuu Cabdalla Shixiri Maka ugu tegay Shiikh Maxamed Saalax, oo ahaa macallinkii Seyid Maxamed burhaantiisuna ka soo jeeday, kaddibna uu dariiqadiisii raacay. Sida la sheegay wuxuu ka soo qaadey warqad shiikh Maxamed Saalax ku deyrinaayo Seyid Maxamed, oo uu ku leeyahay:

«Dariiqii toosnaa waad ka leexatey. sidaas darteed wixii maanta ka danbeeya isma sheeganno, oo ha ii soo qorin anna kuu soo qorimaayo».

Sheeko kalena waxay sheegeysaa inaanu Cabdalla Shixiriba Maka tegin, oo Shiikh Maxamed Saalax wax waraaq ah ka soo qaadin, hase ahaatee ay waraaqdu ahayd midey wadajir u soo qoreen Ingirisi, Talyaani iyo ina Shixiri naftiisu.

Mid kastaba ha ahaatee, warqaddaas loogu talagalay iney xumo dhex geliso Seyid Maxamed, iyo macallinkiis Shiikh Maxamed Saalax, daraawiishna lagu fadqalaleeyo oo kalsoonida laga dilo, ayaa nuqulkeedii gacanta loo geliyey qaaddigii daraawiishta, iyadoo la tirabadyeyna lagu dhex daadshey xarunta dhexdeeda.

Sidey gumeysstayaashu ugu soo talagaleen, markii qaaddigii warqaddii akhristey daraawiishna la ogeysiiyey waxa ku qoran, waxay abuurtey khalkhal, kalsooni darro iyo kala firidh, ilaa ugu danbeystii sidii rag madax ahi u faqayeen uu ka dhashay shirqoolkii la baxay «Canjeel Talawaa» oo la damcay in Seyid Maxamed lagu dilo.

Shirqoolkaas raggii dhigay dhowr ra'yi bey isla soo qaadeen sidey ka yeeli lahaayeen Seyid Maxamed. Rag wuxuu soo jeediyey in xarun laga yaaco, oo loo cidleeyo, ragna waxay soo jeediyeen in la dilo oo halkaas warkiisu ku haro, daraawiishna madax kale yeelato. Waxayna u badatey, oo laysku raacay ra'yiga hore, oo ah in laga yaaco. Haddii sidaas lagu guddoonshey baan nin ragga ku jirey, oo magaciisa la garaneyn wuxuu ilaadshey inaan innaba shirqoolkaas waxba ka suurageleyn, waxaana laga sheegay markii la dareerey inuu yiri:

«Allow sahal libaax seexday. baa niman salaaxeene».

Siduu oddorosey ninkaasi baa dhacday, oo in la shirqoolay waxaa Seyidkii u sheegay nin la oran jirey Shirecumbaal, oo shirka ku jirey. Waxaana laga dhigay raggii ka qayb galay, wax la deyriyey, iyo wax iskood u fikaday.

Waxaana dhacday in shirqoolkaas daraawiish lugi ku wiiqantey, Seyidkiina u qaadan waayey sidey u shirqooleen raggay isugu dhowaayeen, oo qaarkood intey madax ahaayeen isla markaasna xidid ahaayeen sida Faarax Maxamuud Sugulle, iyo Abshir Dhoore. Qaar kalena ay ahaayeen khusuusida iyo culimadii xarumeed, sida Shiikh Cabdillaahi «Qoriyow) iyo Axmed Faarax Maxamed (Axmed - Fiiqi).

Raggaas, oo uu aad u dhaqaaleyn jirey Seyidku, saaxiibona ahaayeen, ama sidii rag isugu dhowaan karaba ay isugu dho waayeen, shirqoolkey dhigeen ee la baxay Canjeel Talawaa, wuxuu ku ridey fajiciso iyo kalsooni darro daraawiish iyo Soomaali oo dhan Wuxuuna isagoo ku halqabsanaaya Xaaji Suudi Shabeele ku muujiyey kalsooni darradaas gashay gabeygiisan uu ku yiri.

* * *

«War Suudow sedkaa waa jannee, samac kalaamkeyga
Salaama alla yeelyow adaan, saakin ku ahaye
Sowdkaan ku leeyahay, yuu salaba kaa raacin

* * *

Sonkor iyo sareen malable, iyo sixin ku iidaaman
Xeeryaha sanuunadan barnida, lagu sibbaakhayey
Sulux caana geel sogob la qalay, sarara geedeysan

* * *

Sareedada raggii aan u wadey, saadka iyo quudka
Saqda dhexe habeenkii raggaan, saha u geynaayey
Kuwii aan sibbaaraayey baa saatan ii galaye.



Salaaddiinta nimankaan qoree sare u qaadaayey
Raggii sidigta geela hayayoo suuska beeganaaye
Nimankaan sidey doonayaan sahal u yeelaayey

* * *

Nimankaan sariira u dhisee, soohdinta u jeexay
Surradda iyo dadabtii raggaan, saari ugu goodey
Gabdha wada saruuradan raggaan, sowjad uga yeelay

* * *

Nimankaan salaaxanhayee, saxar ka eegaayey
Nimankaan siraayada col iyo, saha ka dhawraayey
Nimankaan saqiir iyo kabiir, samo u miiraayey

* * *

Sidka boqola soof badan raggaan. saami uga yeelay
Soogaan darmaan iyo raggaan salabaduu dhiibey
Nimankaan sangootida fardaha, siiya oranaayey

* * *

Raggaan sumuca maadhiina iyo saanadda u buurshey
Nimankaan salaaddiyo u dhigay, subucyadii diinka
Sallallaahuu nebigii raggaan saamax uga dooney

* * *

Nimankaas sokeeyaha bidiyo, siiro iyo aammin
Sarsarkooda nimankaan degiyo, suuqa gurigooda
Saxariiradey igu faleen, waa sahwiyayaaye

* * *

Nimanyahow si daran baa qalbigu, ii saddamayaaye
Sokeeyiyo xigaalaanan sugin, saaca maantaaye
Soomaaloo idil wey, sun iyo debaaqe

* * *

Sinjidhaamadii bey khataly saanjiga ahaaye
Oo waa seeddiyaashe waxeer saatan ii galaye

Saro nama dhex ool Faaraxii seerigii xulaye
Ibliis baa sallaan kala degoo saaxilkuu diraye
Sucdi hadduu yahay ferenjiga uma sujuudeene

* * *

Subeeray noqdeen wiilashaan saakullayn jiraye
Kolkaan anigu saafi u noqdey sir ila dooneene

* * *

Sankuneefle oo idil waa saa'ilahayaaye
Nin kaleba salaaf hay la galo serada ceebeede
Sugi meynin Qoriyow inuu suuqyo ii tumane

* * *

Sakaar waxaan u goyiyo waxaan sama u daadshaba
Axmed Fiqi sawaab kagama helin sadaqadeydiiye
Sannahaabadiisaasan abid, seexan kari hayne

* * *

Sanaciisa baas iyo hadduu saxalku ii keenay
Subeec qooqan baa iigu yimid sabada ciideede
Inuu ferenji ii soo sawiri waw su'aal qabaye

* * *

Subbeehigu wuxuu igu khatalay saahid baan ahaye
Safiihnimadu waatuu dorraad gaal u saacidaye
Soddon jeer ka badan ceeb intuu saancadduu falaye

* * *

Markaan sebi ahaa iyo haddaan suura odey yeeshay
Saamaa ilaah iiga dhigay saaxir ii col ahe
Saaxiibkii aan yeesaba waa seymo lagu reebey

* * *

Mar haddaan sabenkeer nafluhu saafi noqoneynin
Waxba yaanan sida saar nin qaba selelin goorteere
Eebbow adaan kuu samree suubbi taladeyda.



Inkastoo Ingiriis, Talyaani iyo Cabdalla Shixiri aaney ku guuleysan taladoodi dhalisay «Canjeel Talawaa, misana waxay u geysteen Seyid Maxamed dhaawacii ugu horreeyey, oo ka gaara xagga siyaasadda iyo maqalka guud, isla markaasna maaddaama rag badani xujoobeen qaar ka mid ahina fikadeen kalgacalkii jahaadka loo qabey hoos buu u dhacay, kaddib markay dadkii ka soo horjeedey, iyo gumeystayaashu baaweeyeen, oo buunbuunsheen wixii xarun daraawiisheed ka dhacay, iyadoo lala kaashanaayo madax fikatey.

Siyaabahaas aawadood, baa markaas Ingiriis oo guudka kala socdey siyaasadda daraawiisheed iyo kalsooni darrada ay waraaqdii ka dhex dhalisay, damcay, inuu ka faa'iideysto oo he shiis nabadeed oo hor leh Seyid Maxamed la qorto. Wuxuuna soo diray «Sir Reginal Wingate» iyo Rudolf Stalin Pasha» si ay nabaddaas u soo dhaliyaan, ama hadduu diido heshiis nabadeed ogeysiiyaan dagaal keliya inuu yahay dariiqa keliya oo furri.

Si uu haddaba Seyid Maxamed u dareensiiyo Ingiriis, iney daraawiishi siduu moodaayo ka xoog roontahay, ayna gaartey heeray u jilib dhigi karto duullaankasta, buu wuxuu sameeyey banhig xoog leh, isagoo ku dhoollatusanaaya wuxuu hub, rag iyo faras qabey, daraawiishna xusuusinaaya wixii lagu falay waxay ka fali doonaan. Wuxuuna markaas iyagoo jooga soo hor mariyey kumanyaal, iyo kumanyaal faras, oo rag hubkoodii u dhan yahay ku joogaan wuxuuna ku geeraaray geeraarkan:

Ma sabaan ka sabaan baan, nabad safi ahaayoo
Sukuudoo edeb yeeshoo, sowd xun aana lahayn

* * *

Ma sabaan ka sabaan baan, silcayeyda haweenkiyo
Salowgii ka baxaayey, seraarkii geli waayey

Ma sabaan ka sabaan baan, safarkaygu xirraayo
Suuqyadii Bullaxaar, iyo saaxil aanan tegeyn

* * *

Ma sabaan ka sabaan, sidi siiggiyo cawsha
Sarar meeris ahaayo. saafiroo aan maqnaayoo

* * *

Ma sabaan ka sabaan, sawjad aan nin lahayniyo
Sebi aabbihii waayey, sabab beena ku seexshey

* * *

Ma sabaan ka sabaan baan, ergo soogan ahaayo
Suudigi aan maraayey, sammadeeyey jirkeygoo

* * *

Ma sabaan ka sabaan baan, raggaygii la sadqeeyey
Soofkaygii la xaraarshey, sed yaa iiga cesha subax noolba lahaa.

* * *

Ma sabaan ka sabaan baan, samada la i geeyoo
Seleloo isla boodayoo. saarkaygii i qabtoo

* * *

Ma siddeetan uluufoo, sadarkii cilmigii iyo
Suuraddii albaqraad,, subcisaa ummashoo

* * *

Ma siddeetan uluufoo saajacoo aan baqaynoo
Suufiyoota dagaalka, saanaddii xiratey

* * *

Ma siddeetan uluufoo, sumucii wadatoo
Saabuul khayli ku joogtaan, sida suurka afuufey

* * *

Ma safkaannu collowniyo, Suweeynow inan kiisiyo
Saaxir xayra dayeenaan, Sadqa looga turaynoo



Kuwii diinta siraayey, sallallaaku caleehi
Sunnihiisa khilaafaa sandalaa laga jeexi

Muddo laba sannadood ah, baan daraawiishi dagaallo yaryar ma'ahe kuwo waaweyn gelin, hase ahaatee maruun bey si lama filaan ah, u xoogsatey oo rogaalcelin bilawday.

## ROGAAL CELINTII SEYID MAXAMED *(1909-1920)*

Seyid Maxamed waa ka soo kaabtey kumana debcin goobihii Jidbaale, Dharoor iyo saymihii ka dhashay Canjeel Talawaa, isla mar ahaantii ciriirigii wadajir loo geliyey, isagoo ku talagelaya xoogga uu qabey, dheg uma dhigin digniintii iyo cagajugleyntii Ingiriiska. Waxaana xigtey inuu markaas rogaal celintiisii labaad bilaabey, oo weerarro kharkharaar, oo is daba joog ah Ingiriis ku saaray, ilaa ay dhacday inuu hayn waayo, khasabna ku noqotey inuu go'aan ku gaaro markay ahayd 12kii Noofember 1909 inuu Oogo ka guuro, oo xeeb iyo Berbera keliya ku koobnaado. Isla sannadkaas ah 1909, oo Ingiriis inuu qaxo goostey, ayey Daraawiishina Eyl ka soo guurtey, oo Taleex xarun ka dhigatey, Eylna saldhig ahaan u soo dhaaftey.

Taleex deggidda uu degay xarunna uga dhgiay daraawiish, waxaa sabab u ahaa, xagga xeeladda dagaalka, oo ay ku habbooneyd waayahaas maxaayeelay inta Soomaaliyi degto, ayey badhtame u tahay. Waxayna magaalooyinka xeebaha Waqooyi, iyo kuwa bariba mid walba u jirta, ilaa afar ama shan faras min qaad. Mid faa'iido kuma lahayn fogaanshaha ay magaalooyinka marsooyinka leh ka fogeyd, taasna waxay kaga maarmaayeen Eyl, oo marso iyo xaruntii labaad ahayd, magaalooyin kale, oo marso lehna xiriir bey la lahaayeen, oo waa isku halleynaayeen.

Markii dhiillo timaaddo ama rugaha kale ee daraawiisheed dareen galo, nugaali waxay leedahay buuro kala googo'-

an oo kal fogfog, oo ay isaga dab shidi jireen khaas ahaan habeenkii, iskuna war gelin jireen afgarasho caam ahna ahayd.

Teeda kale fogaanshaha, ay Taleex ka fogeyd magaalooyinka xeebaha, oo Ingiris haystey, waxay u suuragelisey. maaddaama aaney baabuurro jirin inaan innaba ciidammo Ingiriis lug ku soo gaarin, waayo intey jidka ku soo jiraan baa weerarro iyo galaame is daba joog ah la gelin jirey, oo weli Ingiriis ciidammo lug ah kuma soo gaarin, taasina waa tan keentey ugu danbeystii 1920kii markii u horreysey Afrika inuu dayuurado ku soo kiciyey, oo markaas Taleex bombooyin la dhaco. Waxaa kaloo iyana jirta, maaddaama ay daraawiish xoolo ku nool ahayd in Nugaali tahay meel afarta meesin ku wada noolaan karaan, khaas ahaanna fardaha oo gaadiid dagaal u ahaa ay aad ugu dhaqmaan. Faa'iido darrada ugu weyni waxay tahay bannaanaanka ay ku taalla, la arkeena inaanu nu **innaba Seyid Maxamed waagaas cirka dagaal ka fileyn.**

Kaddib markii Ingiriis Ber bera u qaxay, oo oogo oo dhan cidammadiis ka guureen, waxay fursad siisey daraawiishi iney is ballaariso, oo waqooyi oo dhan inta xeebta ah mooyee inta kale, iyadu u taliso, saldhigyana xagga galbeed ka dhigato Shimbiris iyo Buhoodle.

Hase ahaatee, mar loo maleynaayo iney ahayd 1909-**1910kii ayaa jaho, hor leh, oo ah jahada Sanaag** dagaal kaga furmey. Jahadaasna waxaa dagaalka ka keeney Garaad Maxmuud Clishire oo horraantii daraawiish raacsanaa. Garaad Maxamuud Calishire, iyo Seyid Maxamed waxay ahaayeen xidid, oo waxaa Seyidku qabey Buloo Calishire oo loo yiqiin «Bulloshubato lana dhalatey Maxamuud Calishire.

Haddaba sida boqor Cusmaan iyo Keenadiid saldanadooda ugula dagaallamayeen ayaa Garaad Maxamuud Calishirena ugula dagaallamaayey saldannadiisa. Waxaana ugu ya-



raan sida la sheegay dagaal ku dhex maray lix iyo toban goobood, ay ka mid ahaayeen Cawsane, Buraan, Mashacaleed, Rasan oo Laasqoray ka dhacday, Daalo iyo Habarhumbulle. Goobahaas iyaga ahna Daraawiishi aad bey ugu le'atay, sababtoo dhulkaasaa buuraley ah, aaney daraayiishi aqoon fiican u lahayn.

Sidii caadadiisu ahayd Sayidka siyaasaddiisa, iyo wuxuu **qabo, uuna rabo inuu dadka ogeysiiyo, maanso iyo gabayo** ku marin jirey, sidaas aawadeed isagoo xididnimadodii taabanaaya, uguna abaal sheeganaaya wuxuu hore taray, ama kaga cabanaaya, marmarna hawadiisa uu isaga kula beretemay wax ka sheegaaya, buu wuxuu u tiriyey Maxamuud Calishire gabayo, badan oo ay ka mid yihiin mid laga soo qaadey tixahan uu ku yiri:

* * *

«Afartaa dujiyee balaan mid kale deelka ka higgaadsho
An dabeebto ceggana halkay damacdey laabteydu
Dacwad kalena waa Ina Mashire hadal aan deeqsiiyo

* * *

Adey deyrshey maantaan ahaa, duri xigaalkaaye
Adigay dafiray sidii aynu nahay duul shisheeye ahe
Waateynu derisnee adaa daawadii furay

* * *

Wax dhaaxaan dedaalkaa u maray, deli ciriiryoone
Waxaan dhaaxaan dunqaaraha lahaa dib uga so joogso
«Maantaa dubbihii kugu dhacee duxi ha kaa raacdo

* * *

Dadka nimaadan gaareynin baad daalib leedahay
Daruuraha cirshiga waxaad rabtaa inaad ku duushaaye
Waxse diidey saad damacsanayd dan iyo taagtaaye».

Markii Seyid Maxamed laga soo kiciyey Mirish iyo Taleex 1919-1920, ayaa Garaad Maxamuud Calishire na Ingiriis ku kacay, isla markiibana intuu qabtey ayuu mina-waar la oran jirey» North Brook» ku qaadey ilaa gasiiradda la yiraahdo «Seychelles Island», halkaasoo uu 9 sannadood (1928) kula xirraa Sacad Saqluul Baasha, oo isagana dhaq-dhaqaaqyo uu Masar ka sameeyey aawadood Ingiriis gasiirad-daas ugu xiray. **Garaad Maxamuud Calishirena gasiiraddaas** wuxuu ka guursaday dadka deggan, oo gabar baa ugu dhalatey.

**Daraawiishi aad bey u hanaqaaddey,** tobankii sanna-dood oo u danbeeyey rogaal celintii labaadna waxay isku baa-hisey in yar ma'ahe dalka Soomaaliyeed oo dhan. Nugaal oo dhan waa qabsatey, Sanaag iyo Barina inta calaha ka sii rogan ma' ahe inta oogada oo dhan waa hantiday, oo Badhan, Jiidali qalcadey ka dhisatey. Galbadhibuur oo Meydh dusheeda ahna waxay ka dhigatey rug ay baddacas ka ilaaliso.

Mudug iyo Galgaduudna waa qabsatey, oo Gaalkacyaa ahayd xudduunta isgaarsiisa xarun daraawiisheed iyo qalcada-heeda koonfureed, oo Cagadhiig oo Beled weyne ku taal ugu soo shisheysey. Waxay kaloo soo cagacageysay Banaadir, laba-da Shabeele iyo Jubbada Sare, Waqooyi Galbeedna waxay ugu sintey ilaa Hargeysa, xagga galbeedna waxay gaartey ilaa Ha-rar iyo Diridhaba, oo dooyadiisu gaalaabixi jirtey.

## XIRIIRKII SEYID MAXAMED IYO LIJ. YASU BOQORKII XABASHIDA (1912-16).

Halgankii iyo jahaadkii Seyid Maxamed halkaas kuma **ekaan, ee wuxuu noqdey mid laga aqoonsan** yahay caalamka, sababtoo ah guulihiisi xagga dagaalka uu ka gaarey wa-**xaa u raacdey guulo xagga siyaasadda ah, oo markay** ahayd 12kii Juun 1912 ayuu xiriir siyaasadeed la yeeshay «Lii Yasu» oo qabsadey boqortooyadii Xabashida, kaddib markuu Menii-lig oo awoowihiis hooyo ahi geeriyodey 1913.



**Lij Yasu waxaa dhalashadiisu ahayd Galla Reer «Wello»** ah. Waxaana dhalay Ras Mikael oo muslinnimo u dhashay, hase ahaatee khasab lagu Kiristaanshey. Lij Yasu markuu ogaadey in dhalashadiisu aabbihiis ka hor ay islaamnimo ku abtirsaneyso ayuu muslimey, oo xirir iyo dhaqan la yeeshay intuu ururiyey dadka muslinka ah, oo calankii Xabashida in-tuu beddelay dayax ku sameeyey. Isla markaasna xaruntii Xa-bashida, oo Addisababa iyo «Shoa» ahayd u soo raray magaa-lada Harar oo xarun Soomaaliyeed ahayd.

Markuu Lij Yasu sidaas falay, baa waxaa wadajir ugu kacay Kenisaddii Qibdiga ahayd iyo Xabashida reer Shoa. Da-badeedna khasab bey ku noqotay inuu Seyid Maxamed la qab-sado oo uu gacan warsado, xiriirna yeeshaan, waxayna ahayd iney 1916 isugu yimaaddaan magaalada Jigjiga, aaraa iyo sidii jahaad loo wada geli lahaana lays dhaafsado. Markii xiriirkaasi sidaas u dhex maray ayuu Lij Yasu isagoo Jarmalka oo Ingi-**riis dagaalkii koowaad kula jiray la kaashanaayey Seyid Maxa-med u soo diray nin Jarmal ah, oo la oran jirey «Emil Kirch» oo** hubka daraawiish u sameeya.

Hase ahaatee markii xiriirkaasi dhacay, oo Seyid Ma-xamed iyo Lij Yasu jahaad wadajir ah u xiran yahay, ayaa Xa-bashida reer «Shoa» ka ogaadeen nin, Lij Yasu u diray Seyid **Maxamed oo la qabtay, in Lij Yasu uu Seyid Maxamed** War-**saday inuu gacan ku siiyodagaalka ay kala soo horjeedaan** Ke-nisadda iyo xabashida Reer «Shoa».

Dabadeedna halkaasaa lagu shiqoolay Lij Yasu Boqor-tooyadiisii oo lagu riday markay ahayd 28kii Setember 1916. Teeda kale oo Lij Yasu loo ridey waxay ahayd nuglaanshaha ay Xabashidu u nugushahay, amaba ay had iyo jeer cabsi dhee-raad ah ka qabto, muslinka geeska Afrika, oo israac yeesha, dabadeedna ceedhiin cuna danbe dhaliya. Waxaana ridkii Lij Yasu boqortooyada laga ridey kenisadda Xabashida reer Shoa» ka sokow gacan weyn ka geystey Ingiriiska, Faransiiska iyo

Talyaaniga, oo ka war helay xidhiidhka dhex maray Lij Yasu iyo Seyid Maxamed. Waxaana boqortooyadii loo dhiibey «Empress Zauditu».

## DAGAALKII RUUGA IYO ISMAACIIL MIRE 1913kii

Markay ahayd 1912kii, ayaa Ingiriiskii Berbera joogey war helay in Berbera iyo dalka intiisa kale kala go'een, amaba daraawiishi gacanta ku dhigtey, halbowlayaashii xiriirka ganacsiga iyo safrahii Berberi ku dhisneyd, dabadeed khasab bey ku noqotey inuu isku dayo ilaalinta xiriirka ganacsiga nawaaxiga Berbera iyo inta Burco u dhexeysa. Wuxuuna dhisay ciidanka la baxay «Rakuubleydii Soomaaliyeed (Somali Camel Corps) waxaana madax ka ahaa ninkii la oran jirey Koofil «Richard Corfield».

Haddaba waxaa dhacday markay ahayd 9kii Ogost 1913 in colkii Ingiriiska oo rakuubleyda ahayd, Koorfilna madax ka ahaa, ay col daraawiish ah, oo uu abbaanduule ka ahaa geesigii Ismaaciil Mire isku heleen goobta la yiraahdo Ina-Dulmadobe oo Burco Bari ka xigta. Halkaasna dagaal kharaari ku dhex maray labadii col, daraawiishina ku libeysatey oo ku dishey Koofil, wuxuuna dagaalkaasi la baxay «Ruuga».

Ismaaciil Mire, oo sida loo badan yahay, loo aqoonsan yahay inuu noqday hurmuudkii abbaanduulayaashii Daraawiisheed, Seyidkiina ugu kalsooni weynaa, xagga murtidana uu ahaa ninka keliya, oo uu ku tixgelin jirey, hawl walibina hawshay ka adag tahay, sida kormeerka rugaha daraawiisheed, iyo eegida ilaalada loo xuli jirey, markuu lib helay xoolo iyo hub laxaad lehna furtey ayuu wuxuu gacantii midig ka gooyey Koofil, si markuu Taleex tago looga rumeysto geerida gaalka. Dabadeedna markuu Taleex tegey buu Seyid Maxamed oo madal weyn dhex fadhiya hor dhigay gacantii Koofil, war bixinna ku dhibey gabeygan siduu dagaalku u dhacay wuxuuna yiri:



«Annagoo Taleex naal jahaad taladi soo qaadnay
Toddobaatan boqol oo Darwish toogatay neef doora
Sayidkeennu tii uu na yiri torog ku heensaysnay
Shakadaa intuu noo tebbedey noogu tacab qaybi
Ilaahay ha tabantaabiyee ducada noo tuumi
Wareegada rag baa waxay tewali yaan wax kaa tegine
Annana towlka qaalmaha nin iyo tulud u soo saarray
Sibraar caana geel loo tabcaday talax ku sii maallay
Tiirkii rasuulkiyo sharciga toog kuwada fuullay
Galbbtaa taxaabiyo Kadleba. toobiyaha raacnay
Habeenkii fardaha wow turraye taag ku sii mirannay
Tun biciida lagu qoofalyow xamaska loo taabey
Talaaduhu markii ay dheceen talalay oo reemay
Tixda gabay markii aan akhriyey toose niman jiifey
Tiraabkaygu meeshuu ka baxay la isku soo tuumi
Salaaddii markii aan tukaday yaarka kaga taagnay
Togga Ulasameed dooyadii horay u tuuryeynay
Intay timacad noo soo arkeen marada noo taage
Annagana jahaad kama tagnee tiimbad ugu roorray
Sengeyaal tabaadiyo gool weerarka u tooxnay
Tiiraanya ololkii dhulkii Taani naga qaadday
Tallaala, ayda qaylada Berbera tahan la weydaari
Taambuuglayaashiyo kuway tebeysey soo gaare
Teysaha gugii oo hanqaray Tininigtii yeedhay
Talaxumada awrkuu u xiray baqe taraarsiinnay
Girligaanka meeshuu turqaday lagu tunsii geela
Gaaladu waxay tacab lahayd taabnay galabtaase
Maadhiin turaabkaa ka badan tuurta kaga qaadnay
Tukihii intaan niman u waray tobanle saa qaatay
Gebagaba u tooxnoo kufriga maarre kaga teednay
Tafwareeman maynine intaan tubay ku aynshaadey
Galabtaa carraabada ku timi turugga Buuhoodle
Habeenkaa ninkii tabar lahaa tarantarree gaarka
Habeen kalena tuuraha Cadduur toolin kaga maallay
Habeen kale Tagaabeeye iyo tu'inney Hayllaawe
Habeen kale Dariigada tubnoo toosan lagu qaybsay

Toban gool tabaadiga dhigiyo toban unuun gooye
Iyo toban tiftii hore rimoo taani lagu qooqshay
Iyo toban abeer tawllanoo tixinka qaalmooda
Iyo toban irmaanoo aniga la igu taageeray
Iyo taan eryoon jirey markay tubantehee joogto
Been laguma tookhiyo afaan taabud noqoneyne
Intaa xarunta waa tubay xaq waa lagu tanaadaaye
Warka Tuurre waa laga hayaa tan iyo Iimeye
Waa Xamar tarrara oo misana taab ku sii daraye
Taltallaabsigiisiyo kabtiga tabo kolow dheere
Anigana tis bay galay intaan col ugu taagnaaye
Tulud uma godlaan, reruhuu tawl ka saanyade
Tafantoofka gaalkuu u diley waa tixgeliyaaye
Suldaan ruunna loo tebi inuu tuuladii gubaye
Tima sohanlow Eebbahay kuma tabaaleeyo».

Seyidkiina, isagoo farxad la jeeni qaaran, oo xagna ku farxay geerida gaalka iyo guusha colku soo hoyey, xagna ku qiirooday sida mahaddada ah, qaayahana leh, oo Ismaaciil Mire warbixintiisii dagaalka maanso ugu dhiibey, buu markaas isagoo bara dheereynaaya, oo daraawiish guubaabo ku gelinaaya, Koofil u tiriye gabeygan farriinta ah, oo caanka noqday, wuxuuna yiri:

«Adaa Koofilow jiitayaan, dunida joogayne
Adigaa jidkii lagugu wadi, jimic la'aaneede
Jahannama la geeyow haddaad. aakhiruu jahato

* * *

Nimankii jannow kacay war bay, jirin inshaalleye
Jameecooyinkii iyo haddaad, jowhartii aragto
Sida Eebbahay kuu jirrabay, mari jawaabteeda

* * *

Daraawiish jikaar nagama deyn, tan iyo jeerkii dheh
Ingiriis jabyoo waxaa ku dhacay, jac iyo baaruud dheh
Waxay noo janjuunteenba waa, jibashadiinnii



Jigta weerar bay goor barqaa, nagu jiteeyeen dheh
Anigana jikrey ila heleen, shalay jihaadkii dheh
Jeeniga hortiisey rasaas, igaga joojeen dheh

* * *

Jiiraayadey ila dhaceen jilic afkoodii dheh
Siday kuugu jeexeen magliga, jararacdii sheego
Billaawuhu siduu kuu jarjaray, jiirarka u muuji

* * *

Nafjeclaysigii baan u iri, jaallow iga daa dheh
Jaljalleecadii baa wadnaha, jeeb ka soo ruqay dheh
Jeedaaladii baa indhuhu, kor u jillaadmeen dheh

* * *

Jimic kagama helin tuugmadaan, jiriyey ruuxii dheh
Markaan juuq iraahdaba afkey, iga jifeeyeen dheh
Dhaaxaan jalaacaye dheg baan. jalaq la ii siin dheh

* * *

Goortaan jareerana gefoo, nolol ka jaanqaaday
Sida jananadii hore tashigu, igu jaguugnaa dheh
Taladii jinnigu ii hormaray, jaasadeed helay dheh

* * *

Jiidaha xanuunka leh markii, la igu jeeraarshey
Jibaadka iga soo baxay dadkii, jiifka qaban waa dheh
Markay, rubaddu jaw tiri or bay, iga ag jiibsheen dheh

* * *

Jirkaygii bahal baa cunoo, jiitay hilibkii dheh
Jurmidiyo baruurtii dhurwaa, jugux ka siiyaa dheh
Jiljilladiyo seedaha tukay, igaga jaadeen dheh

* * *

Haddaan lays jikaareyn tolkay, laga jil roonaa dheh
Weligood waxaa lagu jaraa. jilibdhig duullaan dheh
Daraawiishi waa jibindhowga iyo, jowga soo bixi dheh.

Waxaa dhacday markii warkii «Koofil» gaarey Igland in walaashiis tallaabooyin xoog leh ka qaadday xagga siyaasadda, oo banaanbaxyo qabanqaabisey ilaa lagaga dooday baarlamaanka Ingiriiska wixii Seyid Maxamed iyo daraawiish laga yeeli lahaa. Waxaana aakhirkii la gooyey in miisaaniyad loogu talagalao lagu jebiyo. Seyid Maxamed iyo daraawiishina waa ka war heleen arrintaas «Korfield» walaashiis qabanqaabisay, gabayo ay ku caayayaanna bey u tiriyeen kuna tuseen inaaney iska daa Korfield walaashiise aaney Ingiris waxba iskaga tirineyn.

Seyid Maxamed wuxuu noqdey quwad ay taxgeliyeen gumeystayaashu waayihii danbe, halkaasna kagama harin Ingirise, wuxuu gaarey inuu Berbera kaga dabatago, siduu doonnana uga soo ugaadhsado wixii ku lid ah daraawiish iyo hadafkeeda, aflagaaddana u geysta. Sida ninka la yiri wuxuu ku gabyey, oo daraawiish wax kaga sheegay isagoo Berbera jooga tixdan ah:

«Ninkii teeyo dhaqay buu darwiish kala tegaayaaye
Haddaan tiro riya ah haysto, oo tuulada ag joogo
Tunka miyuu i soo qaban hadtaan, timar lahaas dhaafo».

* * *

Waxaa la sheegay markay ahayd, 13kii Marso 1914 in col Daraawiish ahi weerar bareere ah ku galeen magaalada Berbera, oo intey waxay doonaan ka sameeyeen, dileen ninkii tixdaas tiriyey. Waxaana la sheegay maalintaas iyada ah, in wixii Ingiriis joogay Berbera doonni dusheed lagu qarshey, qaarna qolal la geshey, ilaa colkii daraawiisheed ka baxaayey magaalada.

Nin Ingiriiska Berbera uga wakiil ahaa, oo la oran jirey «Archer» wuxuu war kaga bixiyey dagaalkii Dulmadoobe iyo guud ahaanba daraawiish, isagoo London u diraaya, wuxuu yiri:



«Shaki kuma jiro warka hadda daraawiish laga hayo, inaaney ahayn wax la yareysan karo, ee ay yihiin duul la tixgeliyo xooggooda. Xagga dagaalka waxaa ku jirta geesinnimo dheeraad ah. waxaana dhuuxooda aroorey jidbadii jahaadka diinta islaamka» (1).

Sidii Axmed Gurey u kacay qarnigii 16aad, baa Xabashida cabsi ka gashay Seyid Maxamed iyo halgankiisii, waxayna cabs dheeraad ahi sii gashey markay Lij Yasu isku xirteen.

Hase ahaatee, markay ahayd 1917kii hal sano kaddib markii Lij Yasu boqortooyadii Xabasha muslin u dhowaansho aawadeed lagaga ridey, halkaasna ileyskii islaamka oo galbeed iyo Xabasha ku fidi lahaa ku soo oodmay, ayaa Seyid Maxamed xaruntii daraawiisheed Taleex ka raray, oo Mirishi oo gobolkaas Sanaag ku taal xarun uga dhigay, Taleexna col weyne iyo Saldhig ahaan u dhaafay.

Dagaalkii koowaad markuu dhammaadey 1918, oo Ingiris u gacan bannaanaadey siyaasadihiisii gumeysiga, bey la ahaan weydey inuu xeeb ku koobnaado, Seyid Maxamedna dalka intiisa kale u taliyo.

Halkaasuu markay taariikhdu ahayd, bishii Oktoobar 1919 golaha wasaaradda, ee dawladda Ingiriis, fadhi ka yeeshay arrintaas. Waxayna oggolaadeen, oo go'aansheen, wax kasti ha ku baxee in Seyid Maxamed iyo daraawiishtiisa weerar ugu danbeystii ah lagu saaro. In arrinkaasi fulona waxa qayb weyn ka qaatey oo qalqaaliyey ninkii la oran jirey «Winston Churchill» oo golaha wasaaradda Ingiris ku jirey.

Isla markiibana wuxuu Ingiris bilaabey inuu magaalooyinka xeebaha gegi diyaaradood ka dhiso, oo saad iyo sahay uu ku dagaal galo dhigto, ha ahaato, xagga shidaalka ama maacuunka kaleba.

---

(1) Leaders in East Afrika by Norman page 93.

Dagaalkaas xeeladda iyo tabaha loo soo dejiyey waxay ahaayeen, in daraawiish diyaarado dusha ka duqeeyaan, markay kala firirtana ciidanka lugtu isagoo diyaaradaha hoos socda firirka daraawiisheed dhabarka qabsado.

Si xeeladdaasi u fusho wuxuu Ingiris keeney ciidan tira dhaaf ah oo lagu qiyaasay 8000 ilaa 10,000 kana kooban Soomaali rakuubley ah, oo nin Ina-Igare la oran jirey xagga Soomaalida ugu derejo sareeyo, iyo Hindi iyo Soodaan isku jira. Cidamadaasna waxaa watey oo madax ka ahaa saraakiil Ingiriis ah, oo badan.

Isla markaas tabaabulshihii xagga cirka, wuxuu baddacas keenay markab ah nooca diyaaradaha dagaalka qaada,oo la oran jirey magaciisa «Ark Royal» wuxuuna keeney koox dayuurada ah, oo la oran jirey «Z Squadron» oo duuliyayaashoodu tababar iyo isku kalsooni ku soo yeesheen dagaalkii koowaad 1914kii ilaa 1918kii, ee Yurub ka dhacay.

Ciidankii gumeystaha Ingiriis soo habeeyey cir iyo dhulba, ayaa markay ahayd Janaayo 25keedii 1920 daraawiish meelay joogteyba weerar ku soo qaaddey. Dayuurado siddeed ahina markii taariikhda Afrika u horreysey in diyaarado dagaal ka galaan ayaa waxay duqeeyeen, oo bombooyin la dhaceen Mirishi xaruntii daraawiishta Seyidkuna markaas fadhiyey, iyo Baran, oo iyana ahayd calqad daraawiisheed. Maalin labaaddiina waxay duqeeyeen Taleex waxayna gacan gashay Taleex 12kii Feberaayo 1920kii. Ceeldheero meesha la yiraahdona diyaaradihii midkood ayaa daraawiishi ku soo riddey Seyidkuna waa ku soo qaadey tix ka mid ah gabeygiisa dardaaran oo uu ku yiri:

«Inkastaan qaarkood daadinnoo deli ka tuureyney

Dab wax gubi dayuurado wixii nala dul gowdiidshey».



Dayuuraddaas Ceeldheer ku soo dhacday waxaa la rumeysan yahay iney soo riddey Jamaad Shiikh Cabdulle Xasan, oo Seyidka walaashiis ahayd, kaddib markay buntukh ku toogatey dayuuradihii wax bam gareynaayey.

Markii sidaasi dhacday oo daraawiishi weydey waxay iskaga daafacdo dagaalka cirka, ayaa Seyid Maxamed qaxay oo daraawiish wixii ka haray u hayaanshey galbeed iyadoo habqan ah, oo sida la sheegay ciidammadii Ingiriisku si naxariis darro ah dumarkii iyo maatadii socon weydey u laayeey gaar ahaanna garasho iyo ulakac u dooxdooxeen carruurtii iyo haweenkii Seyidka. Ugu horreystiina waxay daraawiishi salka dhigtay Tugga Faafan, Qorra, Shinniile, iyo Horushagax. Halkaasoo Ingiriis kaga war helay ayna la ahaan weydey inta Seyidku nool yahay, inuu nabad ku gumeysanaayo dadka iyo dalka Soomaaliyed, oo uu goorey ahaataba Seyidku ku soo rogaal celinaayo.

Markaasuu Archeer, oo Soomaalidu u tiqiinney «Caarshedheere qalqaalshey ergo saddex nin ah, oo shiikhakh ah, iyo toddoba nin oo uu garashadooda ku xulay, iney Seyid Maxamed soo oggoleysiiyaan heshis nabaded, oo Ingiriis dhex mara.

Markii «Archer ergadaas xulay baa nin la oran jirey Xasan Oomaar Xuseen oo ciidanka Ingiriis Saddex alifle ka ahaa, waraaq u qoray Seyid Maxamed. Wuxuuna waraaqdii ku qarshay nimankii awr kiraalayaasha ahaa, ee ergada kaxeynaayey mid ka mid ah, oo la oran jirey Sii-arag Raage Caateeye kabtiisii suunkeeda dhexdhexdiisa. Wuxuuna faray inuu isagoon xagna laga ogaan Seyid Maxamed waraaqda gaarsiiyo. Kolkey ergadii tagtey Seyid Maxamed, oo Shiniile deggan, ayaa ninki waraaqda sidey kabtii, oo keliya iska bixiyey, oo kabihii ragga kale meel ka durugsan dhigay.

dabadeedna inta Seyid Maxamed wax dareemey ayuu raggiisi faray in ergada, oo dhan kabaha laga urursho oo loo xayreeyo. Kabihii baa la ururshey, dabadeedna kabtii baa si gaar ah loo baaray, oo waraaqdii laga helay. Wuxuuna warqadda ugu soo qorey Xasan Oomaar:

«Seyid Maxamadow, Raggaas ha layn, waxay kuula yimaadaanna ha yeelin, hana is-dhibin».

Seyid Maxamed sidii buu yeelay, si uu ugu xaqiijiyo Xasanna, farriintan ayuu dib ugu faray Sii-arag Raage.

* * *

«Xuseenow salaama' e
Saddexdiiba waa helay
Saantiina jeexnoo

* * *

Sagaalkiiba daayaye
Soocii waliid iyo
Saldhigoodu weeyee
Soorquutayaashii
Samhariira iyo naar

* * *

Nin dalkiisa sirayaa
sasab waan ka dhaartoo
Ilaa Sawjar uu kaco
Sujuud beenlayaashii
Subaxay yimaaddaan
Salaan xoog leh siiyo
Adiguna sin taagnow
Innana waa inoo sideennii
Silic bow danbeeya'e
Sirimaayo diintee
Dhigimaayo seefta'e
Gaalkii seynta dheeraa
Sandareero ha u dhigo
Si xun hadday u sheegaan
Salaama alla yeelow

Sidaasuu Seyid Maxamed inkastuu maalintaas tabar darraa ugu gacan sayray ergadii, oo ka oggolaan waayey wixii Ingiriis ku yiri soo oggoleysiiya.



Ergadiina gacma maran bey Burco iyo Ingiris kula noqdeen, waxaana Ingiriis is tusey iney suuragal tahay inuu Seyid Maxamed dib u xoogsado, oo soo rogaal celiyo. Markaasey laahaatey inuu tallaabo degdeg ah ka qaado. Wuxuuna guuto xoog leh isugu keeney Bohoodle, oo halkaas kaga saarey Daraawiish, oo war ma qabto ah, oo furuq intuu ku dha cay tabar darreystey. Waxaana lagu qiyaasey iney ugu yaraan toddoba boqol oo darwiish goobtaa dagaalkaasi ka dhacay ku naf baxdey. Geelii laga dhacayna waxaa lagu qiyaasay boqollaal kun, wuxuuna la baxay «Hagoogane». Wuxuuna kula baxay magacaas baa la yiri, ninkii ka saami galayba kibir buu la hagoogtey, kii ka qadeyna ciil buu la hagoogtey. Dagaalkaas Seyid Maxamed geeri iyo nololtoonna gacan Ingiriis kuma dhigin, oo isagiyo rag kaloo wehliyey waa ka nabadgaleen, waxayna degeen Iimey oo Webi Shabeelle ku taal, oo daar ka dhisteen.

Goortii daraawiishi sidaas u naafowdey, oo wax kaleetaba waa ka soo kaaban lahaayde, furuq iyo duumo isugu biireen, ayaa Seyid Maxamed loo dardaar weriyey inuu halgankiisii halkaas ku eg yahay. Hase ahaatee isagoo sidaas ogsoon buu sii oddorosey inaanu halgankuu gaalada kula jirey, khaas ahaan Ingiriis halkaas ku ekaaneyn, oo uu maruun ka kici doono tabar darrida markaas haysey, ama ay cid kale, oo halgankii wadi doontaa soo bixi. Waxaa kaloo jirtey in markii daraawiish warkeedii la helay iney itaal darreysey ciddii ka soo horjeeddeyba ku farxeen. Ragga ku farxay oo ay Seyid Maxamed lid isku ahaayeen inkastuu horraanti darwiish ahaa, waxaa ka mid ahaa Calidhuux. Wuxuuna Calidhuux isagoo ku diganaaya markaas yiri:

* * *

«Waa lagu digtaa duul hadduu kuu daraan jirey
Daaduunka Sayid Maxamed qabo waan ku diirsadaye
Bal dayooy wadaadkii wakaa sii dabeyshadaye».

Haddaba Seyidkii, isagoo dhanna digashadii Calidhuux ka jawaabaaya, dhanna kaga warramaaya dad iyo duunyo wixii lumey, duumadii iyo furuqii helay, tabaha gumeysiga iyo wuxuu ka damacsanaa, Soomaaliyina aaney maalintaas la garaneyn, tiriyey gabeygan dardaaran la baxay, lana maleynaayo inuu yahay kii u danbeeyey, wuxuuna ku yiri:

«Min daroofle aqal daahya weyn dadab la heedaamay
Dermo iyo firaash lagu gam'iyo daalam iyo googgo,
Aniga oo waxaan doonayaba, derajaday haysta.

* * *

Iyo duni wixii nagaga lumay, dararkii Ceeldheero
Dab wax gubi dayuurado kufrigu, nagu dul gawdiidshey
Dumbuq subuca degalkaan ka kacay, dahab wixii yiillay

* * *

Dakhal jabay wixii daar burburay, ama bukhaar duugmay
Dedibtii bannaanayd wixii, dad iyo maal jiifey
Diric iyo waxay shiikh dileen, ama duq waayeela

* * *

Lo' durdura wixii deebla geel, nala ka sii daayey
Dullihii shareerraa wixii, daal na caga gooyey
Dirrowgii qabsaday reerkayaga, dalankicii gaaray

* * *

Dulkuneefle kaan soo ag maro, duullaan ka hor geyska
Dan la'aan waxay nagu faleen, darab nijaaskeedu

* * *



Doonyaha shammaalka ah haddii dakhalka loo laalo
Maruun baa dabaylahaa sidaa, kor u dandaanshaane
Oo doofaarradii ku jirey, daraxu caynshaaye

* * *

Dabro cudura duumo iyo furuq, waxa dadkii xaaqay
Annu diidi maynoo mar baa, daayin noo wacaye

* * *

*Ninkiise tiisa loo deynayaa, haygu diirsado*
Kolna haddaan cid laga deynahayn, mowdka daqarkiisa
Ninkii haatan nagu diganayow, dan iyo xeeshaa

* * *

Doodna waxaan u leeyahay dadkeer, hadalka deyn waayey
Nimanyahow damiinnimada waa, lagu dulloobaaye
Dadku wuxuu jeclaystaa waxaan, duxi ka raacayne

* * *

Dagaalkii nasaarada anaa, daalib ku ahaaye
Dalka ma lihid anigaa ku iri. doora weynaha e
Daliilkii rasulkii anaa, doonayoo helaye

* * *

Anaa diiday maantuu lahaa, deeqan iga hooye
Diinkayga anigaan ku gadan, dabaqi naareede
Anaan labada daarood tan hore, derejo moodayne

* * *

Markay duushay gaaladu anaan, daabbaddu rarine
Goortay dareeraan anaan, diiradduu qabane
Anigaan dariiqiyo waddada, dowga sii marine

Anaan doora weynow kufriga, daacadduu geline
Ferenjiga dirayska leh anaan, diiradduu qabane

* * *

Doofaarka eyga ah anaan, daarihiis geline
Anigaan dillaalkiyo ardiga, duubiguu xirane
Anigaan dariiqada Alliyo, diinta caasiyine

* * *

Dadow maqal dabuubtaan ku iri, ama dan haw yeelan
Ama dhaha darooryiba jiraye, doxorku yeelkiisa
Nin ragey dardaaran u tahaye, doqon ha moogaado

* * *

Dawo lagama helo gaal haddaad, daawo dhigataane
Waa idin dagaayaa kufriga, aad u debcaysaane
Dhirhaankuu idiin qubahayaad, dib u go'aysaane

* * *

Marka hore dabkuu idinka dhigi, dumar sidiisiiye
Marka xigana daabaqadda yuu, idin dareensiine
Marka xiga dalkuu idinku oran, duunya dhaafsada e

* * *

Marka xiga dushuu idinka rari, sida dameeraaye
Mar haddaan dushii Adari iyo Iimey dacal dhaafay
Maxaad igaga digataan herruu, siin la soo degiye

* * *

Seyid Maxamed Cabdulla Xasan, halyeygii Soomaali u kacay qarnigii 19aad, halkaasuu isagoo ciillan ku geeriyoodey Iimey markay ahayd sida loo maleynaayo 20kii Disember 1920kii, iyagoo aaney gacanta ku dhigin cadowgiisii ahaa Ingi-



riis, Talyaani iyo Xabashi, oo isla mar ahaantiina ahaa cadowga ummadda Soomaaliyeed, nasiib-darrose aan lala garan. Sida la weriyeyna wuxuu u dhintey duumo, Kaneeco cuntay aawadeed, hanadnimo iyo geesinnimuuna la god galay.

Seyid Maxamed, wuxuu nolol gumeysi ku jirta ka door bidey, geeri iyo aakhiro. Wuxuu rumeysnaa inaan xornimo ku noolaansho, iyo geeri, nolol kale u dhaxeyn karin, sida uu ku yiri tixdan:

«Naftu waa maqnow, amase waa mahad ku noolow
Waa miiska aan ahay, haddii mid u dhexaysaaye».

## MAXAA SABABAY HALGANKII DARAAWIISHEED?

Lama oran karo halgankii Seyid Maxamed, ma hanaqaadin, waayo wuxuu taagnaa muddo 20 sano iyo dheeraad ah. Markaas su'aashu waxay isugu guda jirtaa muxuu u waariwaayey dhimashadiisii kaddib, iyo maxaa jabkiisii u sabab ahaa.

Layskuma hayo in Seyid Maxamed in badan aad uga lib helay Ingiriis iyo dawladihii la jirey, ugu danbeystiina ay gaareen iney aqoonsadaan madaxnimadisa. Xagga dadka Soomaaliyeed waxay daraawiishi noqotey hir inankii hanaqaadaba ku hirto, oo haweysto inuu ka mid noqdo. Hase ahaatee waxaa maamuuskii iyo xushmadey ku lahayd dadka Soomaaliyeed bilaabmey inuu hoos u dhaco maalintii shirqoolkii Canjeel Talawaa dhacay.

Maalintaasoo kalsooni la'aan iyo aammin darro ka dhex abuurantey Seyid Maxamed, iyo khusuusidiisii, iyo raggii daraawiish hoggaankeeda hayey, kaddib markay qaarkood ku caddaatey iney ka qayb galeen shihqoolkaas, qaarna lagu tuhmey iney ku jireen.

Kalsooni la'aantaas, iyo wax xujoobey ka dhex dhacay madaxdii daraawiisheed, waxay ku fidey ciidan weynihii intiisii kale. Dabadeedna waxay noqotey in magacii daraawiisheed halkaas wax ugu dhinmeen, oo meeshii lagaga hiran jirey dad badani ka soo horjeesteen. Xumo ka sheeggeediina rag badan, oo abwaanno ah, baa xagga murtida ka soo horjeensadey Seyid Maxamed, oo dadka Soomaaliyeed wax ku fahamsiiyey ay daraawiish kaga leexdaan. Waxaana raggaas ka mid ahaa haddii qaar laga magacaabo Cali-dhuux, Qammaan Bulxan, Cali Jaamac Haabiil, Cali Gurey, Shire Cabdalle iyo Saalax Malladiray. Waxaa kaloo iyana la rumeysan yahay in rag ciidammadii Ingiriiska ka tirsanaa dhex galeen daraawiish, oo xumo badan oo loo nisbeeyey iyada ku kaceen, iyagoo fulinaayey danaha gumeysiiga.

Teeda kale sida la rumeysan yahay ma'aha, oo Seyid Maxamed ma jebin Ingiriis iyo cadowyadii kaloo la jirey oy ka mid ahaayeen Xabashi iyo Talyaani, ee waxaa dhaawaca u weyn gaarsiiyey dagaallo sokeeye oo dalka gudihiisa kaga soconaayey. Wuxuuna ku sheegay dagaalkaas sokeeye, oo meela badan lagala soo horjeeday gabeygiisa gudban tixdan ka midka ah, oo uu ku yiri:

«Eebbow geyiga oo dhan waa nala ka guulaaye,
Eebbow Giriig goley ku tahay nala gammuunneeye»

Jahada u galbeedeysey waxaa dagaal kaga hayey dadka laysku oran jirey Huwan, ee Ingiriis la jirey. Xagga Calaha Sanaag iyo W. Bari waxaa dagaal kaga soo horjeeday Colkii Garaad Maxamuud Calishire, ee Gaarhayaha la oran jirey. Xagga Bari waxaa ka soo horjeeday Boqor Cismaan iyo colkiisii. Koonfur barina, oo ah xagga hobyo waxaa iyana ka soo horjeeday Keenadiid iyo Cali Yuusuf. Markaas dagaalkaas sokeeye baa Ingiriis ka faa'iideystay oo daraawiish sababay, oo u suurageshey inuu Soomaali isku cududo jebiyo, isagoo isla markaas hub cusub iyo dayuurado la yimid, daraawiishna waxay kaga hortagto weydey.



## MAXUU AHAA SEYID MAXAMED CABDULLE XASAN

Seyid Maxamed wuxuu ahaa, nimaan la fahmin karin, isagii baana tixdan isku sheegay oo yiri.

«Ismaalaakadeedkayga waa lagu minhaadaaye»

Maxaayeelay mar wadaad mufti ah, oo haddana dagaal yahan ah buu ahaa. Mar wuxuu ahaa nin aqoon iyo xirib dheer loo daayey. Wuxuu ahaa guud ahaan nin buruud iyo burji leh, wuxuu ahaa nin siyaasadda ku qoto dheer, oo si kastaba u sugan, ninkii ay isa seegaanna saba, oo sareedeeya, oo u seeto dheereeya ilaa uu surmeeyo.

Wuxuu kaloo ahaa halyey, gobannimo u halgame geesi ah, aftahan ah, qoto dheer, oo isla markaas gabayaa abwaan, ah. Marka abwaannimadiisa, iyo murtida laga dhaxlay laga yimaado, waxaan laysku hayn inuu Seyid Maxamed ahaa hanad dadka Soomaaliyeed u dhashey, nasiibdarrase la moodo inuu waqtigiisii ka hormaray, oo wixii u muuqanaayey markaas in yar ma'ahe lala garan:

Waxaa la oran karaa, wuxuu ahaa waagaas ninka keliya oo Soomaaliyeed, oo gumeysigu wuxuu yahay fahmey, oo dareen ka yeeshay. Markii dareenkaasi galeyna aan ka cabsane, saddexdii caddow ee wada jirey dagaal labaatan sano ahla galay, inta badana kaga guuleystey, iyagoo ka hub wacan ama sameystaba, oo marsooyinka iyo magaalooyinka xeebaha, oo dhan ka haysay, si walbana uga awood roonaa.

Inuu Seyid Maxamed fahamsanaa wuxuu gumeysiga Ingiriisku yahay, aanse lala garaneyn waxaa marag furaaya gabeygiisa dardaaran. Gabeygaasoo sida la og yahay uu ku oddorosay ama ku sii sheegay in Ingiriis marka u horreysa dadka Soomaaliyeed been, iyo dibindaabyo ku dagaayo, marka xigana intuu dabka ka dhigo dusha ka raranaayo sida dameeraha.

Marka xigana daabaqad iyo cashuur saar ku xigsiinaayo, aakhirkana markay hayimaan, oo dulloobaan dal wareejinaayo. Oddoroskiisaana geeridiisii kaddib, amminkiiba waa la arkay, oo iyagoo arrimahaasi is daba jooga, ayey Soomaaliyi ku dhabar jabtey, ha ugu urugo weynaatee tan dalkeedii uu xabasha ku siiyey.

Maaddaama markaas uu intaasoo xumo ah, fahamsanaa in gumeystaha Ingiriis la imanaayo, oo heshiisyadiisu isku halleyn lahayn, lana arkay in sidaas wax ka jiraan. Wuxuu markaas Seyid Maxamed ahaa halyeyga ladqabo ka diidey inuu daawo iyo heshiis la yeesho Ingiriiskuu mabda'iisa saas u fahamsanaa. Ficilana ku tusay, una qorey markay ahayd 1903 waraaqdan uu ku yiri:

«Haddii dalkaygu beermi karo, ama uu daaro iyo maal leeyahay, faa'iidaa kuugu jiri lahayd ku dagaallankiisa, Hase ahaatee, waa dal hawd ah, oo aan faa'iido kuugu jirin. Haddiise aad rabtid dhir iyo dhagax tira badan, iyagoo tuuran baad heleysaa. Waa milic iyo suudi kulul wax kalaad iga heleysaa, oo aan dagaal ahayne ma jiro» (1).

Mar kalena wuxuu Seyid Maxamed ahaa nin diinta Islamka horseede u ah, oo haddaanu kaga kicin Ingiriis magaalada Berbera iyo Dhaymoole, oo carruurta agoonta ah inta la xado lagu gaaleyn jirey (LAZARIST FATHERS) waxaa shaki la'aan ah, in maanta ummadda Somaaliyeed gaalo iyo muslin u qaybsanaan lahayd. Taasina sida dalal badan, oo laba diimood lagaga dhaqmo lagu arkay, dhibaato weyn bey maanta u keeni lahayd midnimada, iyo is-haysadka Soomaaliyeed meeley joogtaba.

Aalaaba sida dhacda, ama la arkay marka laga soo bilaabo qarnigii 19aad, oo ah markii gumeysiga reer Yurub badankiis Afrika, iyo Aasiya soo galeen ilaa waqtigan xaadirka ah, marka dhaqdhaqaaq gumeysiga ku lid ahi dhasho, waxay had iyo jeer ceebeeyaan oo war xumo ka fidiyaan hadba ninka hoggaanshe u ah halganka, iyagoo la kaashanaaya awoodda dheeraadka ah, oo wararka lagu fidiyo.

(1) The Somali Dispute by John Drysdale page 31-32



Markaas gumeysigi Ingiriisku isagoo isku dayaayey inuu Seyid Maxamed nacsiiyo dadka Soomaaliyeed buu wuxuu ku tilmaamey wadaad waalan oon hadaf iyo ulajeeddo lahayn, sidaas darteedna ku naaneysey «Mad Mullah» si uu rayi caamka uga dilo. Waxaa kaloo laga sheegay inuu ma naxe ahaa, taasoo aan waxba ka jirin, ama hadday wax ka jireen wax yar ahayd, lase baaweeyey, duruuftii waagaas joogtayna aanu waxba ka qaban kareyn, marka laga eego garashada daraawiishtu heerkay ahayd, iyo waqtigaasoo Afrika badankeed nidaamka casriga ah, oo wax lagu xukumo aaney gaarin. Waxaadna mooddaa markii la dersey haddii wax ka jireen inaanu raalli ka ahayn siduu ku sheegay jiiftadiisa ah «**doodna waxaan u leeyahay**». Teeda kale waa mid beni'aadanka iskaga abuuran, ama wax ha ka jireen ama yey ka jirine, in ninkii laga guuleysto had iyo jeer xumihiisa la buunbuunsho, oo gefkiisa irbad le'eg buur lale'ekeysiiyo.

Inkastuu Seyid Maxamed geeriyodey, wuxuu geeriyoodey geeri xalaal ah. Waxaana lagu xusayaa xagga taariikhda inuu yahay udubdhexaadka taariikhda Ummadda Somaaliyeed, ha ahaato xagga waddannimada, dhugmada dagaalka, iyo siyaasadda, ama ha ahaato xagga murtida laga dhaxlay, oo uu ku habeeyey hab iyo hannaan cusub, oo hor leh. Waayihii danbena raggii xornimo doonka u kacay kaga deydeen, oo halqabsi ka dhigteen, iyo hub ay ku dagaal galeen.

Shaki kagama jiro bulshada Soomaaliyeed, oo maalinba maalinta ka danbeysa, xog ogaal u noqoneysa taariikhdeeda Qarannimo, in marka aragti dhab ah lagu eego, sharafka iyo qabka qarannimo uu Soomaali dhaxalsiiyey ka sokow, uu ahaa Seyid Maxamed ileyskii gobannimo u il furay, iyo xudduntey

qoomiyadda Soomaaliyeed ka soo abuurantay. Inkastoo aakhirkii gumeysigu ka libeystana, wuxuu isagoo ka ciillan guuldaradaas ama sii oddorosay, ama sii sheegay, iney diricyo halkii halgankii ka wada ka daba kici doonaan, sida uu ku yiri tixahan:

«Dakaankiis nin dawlada ah haddii duudsi laga yeelo
Maruun baa dawaarkii isrogey daqalyuu socone
Bal dayoy dawaaraha mar bey daa'iruu kicine.

* * *

Ninkii diricyadiisii kufrigu daabaca u qaadey
Maruun buu dirramayaa intuu duubiyaal dhalo'e
Bal dayoy da'uun bow kacdoo dooya geliyaaye».

* * *

Ugu danbeystii u daa, ilaa Qarnigan 20aad, in Seyid Maxamed Cabdalla Xasan yahay, nimaan cidina cabbiri kareyn, hirarka ballaaran; ee aragtidiisa siyaasadeed gaarsiisneyd, isla mar ahaantiina, aan ereyo lagu koobi kareyn, waddaninimadisii, abwaannimadiisii, hoggaanqaadkiisii, iyo garashadisii guud.

Waana midaan muran lahayn, nin walboo Soomaali dhab ahina uu u aqoonsan yahay, inuu ahaa Seyid Maxamed asaas dhigihii Qoomiyadda Soomaaliyeed, ahaana doono weligiis halyeygay ka shidaal qaadato.




## Isballarintii gumeysiga Seyid Maxamed kaddib

Markii Seyid Maxamed geeriyoodey, ayaa gumeystayaashi nabad u degeen, oo fursad u heleen danahay ka lahaayeen dalka Somaaliyeed. Siduu Seyid Maxamed sii sheegayna waxaa dadka Soomaaliyeed isla markiiba la dul dhigay culeys addonsi, oo waxaa dhacday in Ingiriis ku xukumey markay ahayd 1922 in xero walba, oo adhi ku jiro, wan cashuur ah laga bixiyo ceelasha Burcana Geela ka cabba lacag laga bixiyo waase lagu gacan seyray, dadabadeedna dagaal baa ka dhacay magaalada Burco, waxaana lagu dilay xaakinkii Ingiriis u fadhiyey Mr. Giib (Gibbins).

Waxaana jirtey inkastoo rag badani rasaasta ku rideen gaalkaas, misana in la qabo, uuna sheegtey iney rasaastiisii ku dhacday nin la dhihi jirey Faacuul Aadan Jugle, oo degmada Burco ku dhashay.

Dacwaddii waxaa loo dhiibey inuu qiimeeyo qaaddigii magaalada Burco, Shiikh Maxamed Yare. Wuxuuna ku qiimeeyey saddex iyo soddon halaad iyo hal daloolkeed. Ingiriis waa ka xanaaqay, oo halkii buu qaaddigii shaqada kaga saarey, dadkiina qasab ugu xukumey iney mag ahaan u bixiyaan 30,000 oo halaad, waana la bixiyey, waxayse dhalisay inaan cashuur danbe Ingiriis dadka saarin, ilaa dagaalkii labaad dhammaadkiisi.

Sida la og yahay, gumeysigii reer Yurub, ee hanaqaadey qarnigii 19aad, waxaa sabab u ahaa inuu gumeysi sameeyo dhaqaale korodhsi. Dhaqaalahaasoo ay rabeen, iney siyaabo badan ku kordhistaan. Ta u horreysa maadaama Yurub markaas ku jirtey cahdigii wershedeynta, waxay Afrika iyo Aasiya ugu beretemaayeen iney suuq uga helaan warshadahooda waxa ka soo baxa, isla markaasna alaab ceedhiin, oo dib wershaduhu u soo sameeyaan u hantiyaan.



Gumeysigii Talyaaniga oo Keli Aseyle kaga gudbaaya dad Soomaaliyeed.

Ta u weyneyd, oo iyana nin caddii Afrika u soo galay, nin madobina ka bogsan waayey ilaa qarnigan, waxaa weeye ku adeegashada iyo ku dul noolaanshada muruq nin madow leeyahay. Taasoo ah laba goor dhimasho, waayo ninkii madoobaa nimcadii dalkiisa ayuu nin cad muruqiisa ugu soo saarey, markaas nimco uu wax ka helo ha joogtee, manaafacaadkii muruqiisa wax kuma helin, dhidid qooya mooyee.


Haddaba, isagoo mabda'a hantigosadka, ahi ku dhisan yahay ku dul noolaanshahaas, iyo ku adeegashadaas muruq aan manfacuu xaq u iahaa la siineyn, ayaa Talqaanigu wuxuu amminkiiba degay, labada Webi Jubba iyo Shabeele, oo dalka Soomaaliyeed ugu barwaaqaysan. Iyadoo aan waxba la faahfaahin xumihii iyo silcintii qarqaraaraa, oo rag dhufaaniddu ka mid ahayd, misana la maa illaawi karaayo wuxuu Talyaani ka geystey dalka xaggiisa koonfureed. Waxaana jirtey markay webiyadu buux dhaafaan beruhuna halis ka galaan, inuu dadka Soomaaliyeed safsaf isu dul saari jirey oo biyaha kaga moosi jirey beeraha muuska. Mararka qaarkoodna intuu is dul raseeyo ayuu ku dul socon jirey, oo keliyada kaga gudbi jirey ilaa guryihiisa. Halkaasna sida la qabo dad badan baa ku dhammaadey kaddib markay biyihi ku hafteen culeysna ugu biirey:

Urugo lagu xuso lehe, waxay meel meelahaas ka mid ahi, oo Jannaale ku taal la baxday «Keli-asaayle», micnaheeduna magaceeduu ku dhan yahay. Waxaana la sheegay dadka hooggaas nasiibsadey iney heestan ku heesi jireen:

«Ma Keli-asaaylaa
Kufri igu socdaayo
Keenadow hoggaansamey
Kadeedkeer mar naga fura».

Sidii kabadde lay dhigay
Sidii koran dhufaane ah
Allow yaa karaamo leh

Soo qaadidda la soo qaadaayo isticmaarka Talyaani wuxuu Soomaali u geystey, waxay ka dhigan tahay geeri nin xusuustey, maxaayeelay nin walboo Talyaani ah, oo beeraleyda



Geesigii Bahdoon Diirane, oo dilay ferenjigii loo soo kireystey inuu jeexo xudduudka la baxay «gawracii gumeysiga» ee Jig-Jiga iyo Hargeysa u dhexeeya.

Webiiyada ka mid ahaa, beelo dhan oo Soomaali ah ayuu muruqoodii bilaash ugu adeegani jirey, iyagoo shaabuug lala dhaco, iyo silic kale oo u weheliya, oo rag tumiddii Buufow ku kici jirey inkastuu ka shalleeyey markii la dilay waa tusaale ka mid ah tabaalaha Soomaaliyi kala kulantay addoonsigii Talyaaniga.

Xagga midabtakoorka magaalada Xamar suuqyadeda qaarkood nin madoobi ma mari kari jirin, ama gacmo kor u taagan ayaa lagu mari jirey.

Qardqfooyinkaas dadnimadeeda Soomaali wax loogu dhimaayey, waxaa kaga darraa aaya xumada qarannimadeeda ay wadajir Ingiriis, Faransiis iyo Xabashiyi kaga shaqeynaayeen, waayo markay ahayd 1934 ayey wadajir u jeexeen xuduudka beenbeenta ah, oo dalka xaggiisa waqooyi ka sameysan, loona yaqaan «gawracii gumeysiga», iyadoo Ingiris iyo Faransiisba ku xadgudbay heshiiskey ummadda Soomaaliyeed la dhigteen oo saldhiggiisu ahaa iney ilaaliyaan. Waxaana jirtey markii xudduudkaas la jeexaayey in nin geesi ah, oo la oran jrey Riyaale Gaaxmaal ka dhiidhiyey oo col ururiyey, oo ku duuley guddidi jeexeysey oo nin Jarmal ah oo la soo kireystey madax ka ahaa. Dabadeedna waxaa dhacday in Riyaale iyo colkiisii meel Ashica ku dhow ka heleen ninkii Jarmal iyo guddidiisii. Dabadeedna intey weerareen uu nin la yiraahdo Bahdoon Diirrane oo weli nool colkana ka mid ahaa golxadkiisii ninkii Jarmal intuu qabtey laba ugu kala gooyey.

Riyaale Gaaxmaal Ingiriis ayaa qabtoo diley, Bahdoon Diirranana Xabashidaa qabatoo ku xukuntey 14 sano, hase ahaatee markuu saddex sano ku xirraa Adari, ayaa Talyaani 1936 markuu Xabasha qabsadey, ka sii daayey xabsigii.

Maadaama markaas Soomaaliyi meelay joogtaba isku shucuur noqotay arrinkaas xudduudka aawadiis, waxaa markay ahayd 1934, Hargeysa, Burco iyo Berbera yimid, oo ka yi-

mid Jabbuuti lix nin, oo uu madax u ahaa nin la oran jirey Qarayare. Nimankaas lixda ahi, waxay magaalooyinkaas ka fureen urur siyaasi ah, lana oran jirey «Khayriyadda». Hase ahaatee Ingiriis ayaa hagaasiyey, kaddib markuu wuxuu awood lahaa isugu geeyey, inaanu hanaqaadin ururkaasi. Wuxuuna ku isticmaalay siyaasaddiisii ahayd qayb qaybi oo xukun.



## Halgankii 3aad iyo dhalashadii Gobannimadoonka Soomaaliyieed

«Soomaaliyey toosoo
Toosoo isku tiirsada
Hadba kiinna taag darran
Taageera abidkiin»

Da'uud Timayare — (1943-1944)

Markii dagaalkii labaad bilaabmey 1939, oo uu in yar soconaayey waxaa Talyaani, ka kiciyey Ingiriis dalka Soomaaliyeed xaggiisa Waqooyi sannadkii 1940. Taasina waxay dhalisay markaas in Talyaani xukumo dalka Xabashida iyo dalka Soomaaliyeed, oo dhan, ayse wehelin Xeebta Soomaaliyeed iyo iyo N.F.D. Waxaase dhacdey markay taariikhdu ahayd 1941 in Talyaani la jebiyey. Dabadeedna Ingiriis soo noqday oo uu waqooyiguu hore u haystey, iyo koonfurtii Talyaani dagaalka ka hor gumeysanaayey isku qabsado.

Marki Talyaani jabay baa Ingiriis dawlad u dhisay Xabashida 1942kii, isla markaasna heshiis la sameeyey inuu ilaaliyo ilaa intey isku fillaaneyso, uuna u sii maamulaayo Hawd, iyo Reseefeeriya (Reserved Area) oo ah labaduba dalka Soomaaliyeed qaybo ka mid ah.

Sidey, saddexda cadow, ee kala ah Ingiriis Talyaani iyo Xabashiyi wadajir ula dagaallamayeen isuguna celinaayeen jahaadkii Seyid Maxamed, bey geeridiisii kaddibna ummadda Soomaaliyeed kula dhaqmaayeen, oo isu luqun qabateynaayeen ciddey ka dareemaan shucuur iyo dhaqdhaqaaqyo gobannimodoon ah. Hase ahaatee sidi Afrikada kaleba ka dhacday dagaalkii labaad intuu soconaayey bey waxay dadka Soomaaliyeed uriyeen saxansaxadii gobannimada. Dabadeedna waxaa abuurmey ururro qarsoodi ah, oo isticmaarka, iyo addoonsiga lid ku ah. Ururradaasina waxay hiddeysanaayeen ileyskii gobannimodoonka oo uu Seyid Maxamed shidey.

Waa dabeyl caafimaad, oon jahadeeda ka beyrine, waxay hadba shucuurtii gobannimadoonku geed harsato, inticmaarna wadajir dab ula dabajoogo, waxaa dhacday inuu dhismay 15kii Maajo 1943kii urur dhallinyaro oo la baxay S.Y.C. (Somali Youth Club) markii dambena isu rogey S.Y.L. (Somali Youth League). Waxaana ururkaas magaalada Xamar ka asaasay saddex iyo toban dhallinyaro oo magacyadoodu yihiin:

1. **Cabdulqaadir Sakhaawaddiin**
2. **Yaasiin Xaaji Cusmaan**
3. **Sidiin Xirsi Nuur**
4. **Maxamed Cusmaan Baarbe**
5. **Daahir Xaaji Cusmaan**
6. **Xaaji Maxamed Xuseen**
7. **Khaliif Hundow Macallim**
8. **Maxamed Faarax Hilowle**
9. **Maxamed Cabdulle Xayeesi**
10. **Cismaan Geeddi Raage**
11. **Maxamed Cali Nuur**
12. **Cali Xuseen Cali**
13. **Dheere X. Dheere**

Saddex iyo tobankaas halyey, waxay shaki la'aan ka dhiidhiyeen guuldarradii iyo dacdaradii ummadda Soomaaliyeed gumeysigu ku hayey. Wuxuuna ururkaas dhallinyaradu dhistay ku fidey inta Soomaaliyi degtoo dhan, oo xafiisyaa looga furey magaalooyinkoo idil, sida Siyallow, oo N.F.D. ah iyo Jigjiga.

Markii ururkaasi sidaas u hanaqaadey, oo u fidey sababna u noqdey in qoomiyaddii Soomaaliyeed, oo muddo naf la'ayd madaxa la so kacdo, oo dhimbisheedii dib u soo noolaato, ayaa dagaalkii labaad markuu dhammaadey, golaha Qaramada midoobey la dhex geeyey wixii dalka Soomaaliyeed, oo dhaqdhaqaaqyo gibannimadoon ahi ka aloogan yihiin laga yeeli lahaa.



Markii Golaha Qaramada Midoobey la geeyey arrinta Soomaaliyeed 1946kii, sidii laga yeeli lahaa in la falanqeeyo, siyaasado muddaahano ah, ayaa wakiilkii Ingiriisku Mr. Bevin damcay inuu wax ku dago, wuxuuna soo jeediyey oo ku adkeystay in Soomaali oo dhan loo dhiibo Ingiriis iyadoo aan lagu xirin wax shuruud ah, waqtina loo qaban xorriyad lagu gaarsiiyo. Waxaana loo yaqaan dooddiisaas «BEVIN» decalaration». Dawladda Ruushkuna si caddaan ah bey isu hortaagtey, inaan Ummadda Soomaaliyeed gobannimo la siin, Soomaali Weynna aan la abuurin.

Haddii haddaba Golaha Ummadaha Midoobey, sidaas looga murmay, ayaa markay ahayd 1948kii waxaa Golaha Ummaddaha midoobey laga soo diray wafdi soo hubiya waxaa shacbiga Soomaaliyeed rabo.

Si haddaba ururkii S.Y.L. u muujiyaan, wafdiga dadka maacsan, iyo urursanaanta laxaadka leh, oo shucuurta gobannimo doonka ku jirtà, bey waxay abbaabulleen markii wafdigu yimid bannaan bax. Talyaanigiina wuxuu ka horkeenay ururro dad yari ku jiraan, oo ajaanib iyo dabadhilifyo ah. Halkaasna labadii bannaan bax baa iskaga hor yimid, oo dagaal qaraar baa ku dhex maray, oo inta dibusocodkii iyo Talyaanigii laga guuleystey baa laga dilay 53 nin oo Talyaani ah.

Wafdiyadii dadka Soomaaliyeed meel walba ka soo dirtey iyo ururkii S.Y.L. oo horkacaayey, waxay halkaas ku muujiyeen iney ugu horeystii gobannimo iyo Soomaali weyn oo is raacda doonayaan, loona dhiibo iney dawladnimo gaarsiiyaan afartii dawladood oo markaas u quwad roona (Four Powers) oo ka koobnaa Ingiriis, Ruusiya, Maraykan iyo Faransiis.

Rayiyadaasi ma raalli gelin Talyaani iyo Xabashi iyo Ingiriisoo filanayey in Soomaali gumesigiisa dooran doonto. Sababta ay kaga fogaadeen Ingiriisna raggii siyaasadda hayey

waxay ahayd waayo-arag lagu noqdey inaanu innaba Ingiriis aaminaad lahayn, in sidaas loo danniyona garawshey leedahay, maxaayeelay, heshiisyadii hore loola galay buu jebiyey.

Markaas Ingiriis waxay Soomaaliyi kaga dheeraatey maahmaahdan ah «Beentaada hore, runtaada danbey u darran tahay».

Maaddaama aaney Ingiriis raalli gelin gacan ku sayrkii Soomaalidu ku gacan sayrtey, wuxuu isla markiiba qaadey tallaabooyin aargudasha ah, oo 24kii Sebtember 1948kii buu Soomaali Galbeed, iyo qayb ka mid ah Reseefeeriya dawladda Xabashida ku wareejiyey, isagana wax tala ah dadka Soomaaliyeed ka weydiin. Waana taariikhdii u horreysey, oo Xabashiyi cag soo dhigtey ama soo gaartey iney xukunto Dhagaxbuur, Qabriddahare, Qallaafo iyo Wardheer. Taasina waxay dhalisey uurkutaallo xun, oo dadka Soomaaliyeed gareysan waayeen, nin walboo dareen lihina qaadan waayey. Bannaanbaxyo iyo qaylo dheer baana meel walba laga dhigay.

Laakiinse, ciidamadii Ingiriiska iyo Xabashida, oo wadajira, ayaa ka hor yimid, oo xoog waxay lahaayeen naxariis la'aan dul dhigay. Waxaana Jigjiga, oo keliya lagu dilay 25 qof oo Soomaali ah, calankii S.Y.L. na halkaasaa maalintaas laga soo dejiyey daartii Jigjiga xarunta uga ahayd.

Intii dooddu ka siconeysey golaha qaramada midoobey, cadaadis dheeraad ah, ayaa gumeystayaashu isu gaashaanbuureysteen iney kula dhaqmaan dadka Soomaaliyeed si loo kala rido qomiyaddooda iyo dhaqdhaqaaqyada horseedayey. Laakiinse ururkii S.Y.L. isma dhiibin, oo dabin iyo shirqol kastoo loo dhigay, ama markii la sii cadaadiyaba miigganaan iyo isku duubnaan dheeraad ah, baa u kordheysey ilaa ay dhalisay in dhowr goobood, oo ay ka mid ahaayeen maalintii la baxday «Hannoolaato, cagta la mariyey ajaannibtii Soomaali lid ku ahayd, oo gumeysiga bahaysanaayey iyo



maalintii 5-10-49, oo dadku iyagoo kumanyaal ah ku dagaal galeen dhagxaanta iyo wax alla wixii faraqabsi ah, maalintaas dambena waxaa loo yaqaan oo lagu xusaa «Maalintii Dhagaxtuur».

Dagaalladaas iyo iska horimaadkaasi waxay baraarujinayin rayi caamkii dunida, oo ogeysiiyeen xaalka Soomaaliya ka taagan. Waxaana jirtey wixii dalka gudihiisa ka dhaca in isla markiiba S.Y.L. gaarsiin jirtey Qaramada Midoobey iyadoon London, Roma iyo xarumaha gumeystayaasha laga war helin.

Inkastoo xagga siyaasadda, awoodda dadka Soomaaliyeed yareyd marka la eego xoogagga la loollamaayey, oo aan is raaceeda rabin, misana ma saaxiib la'ayn oo ragga uga hiiliyey golaha Qarammada Midoobey, waxaa ka mid ahaa «Sir Safarlla Khan» oo dawladda» (Pakistan» wakiil u ahaa. Waxaa kaloo isna u hiiliyey «Mr. Saint Lot, oo Qaramada midoobey u fadhiyey dawladda «Haite».

Mr. Saint Lot waxay dawladdiisu ku amartey inaanu Soomaaliya cod, iyo taageero siin, marka xaalkeeda Qarammada Midoobey lagaga doodaayey. Hase ahaatee Mr. Saint isagoo amarkaas qaba, laakiinse daryeelaaya gobannimada nin madoobi helaayo qaayaheeda, hiilkiisana aaney u gudbooneyn nin raba inuu wax gumeysto, iyo kan ka diiddan, buu codkiisii siyey Soomaaliya in dawladnimo la gaarsiiyo. Codkaas uu Soomaaliya siiyeyna waxuu ku galabsadey in dawladdisii shaqadii ka fadhiisiso, halkaasna ay dhacdo inuu ilaa maanta dalka Mareykanka musaafuris ku jooga.

Hiilkaas Mr. Saint u galay uguna huray Ummadda Soomaaliyeed meheradiisii, dadka Soomaaliyeed abaal weyn ayuu ugu hayaa, wuxuuna mudan yahay in had iyo jeer lagu xuso Seyid Maxamed tixdiisan uu ku yiri:

«Ninkii maalintaad iillan tahay, aano kugu qaata
Oo aan abaarahakan dhacay, odda kaa roganin
Ltaalxumana aan kaaga tegin, sow ikhwaan ma'ahe

Inkastoo markii danbe Ingiriis iyo dawlada kale, oo reer galbeed ahi isku dayeen inaan Soomaaliya dawladnimo la gaarsiine, Talyaani loo dhiibo muddo aan xad, iyo shuruud lahayn haddana aakhirkii markay ahayd 21kii Noofembar, 1949 ayaa golaha Qarammada Midobey go'aan ku gaaray in Soomaaliya (Ex Italion Somali) Talyaani xukumo, oo dib loogu dhiibo, dawladnimona uu ku gaarsiiyo (U. N. Trusteeshib) muddo toban sannadood ah, iyadoo ay kala war haynayaan wakiilo ka tirsan saddex dawladood, oo kala ahaa Masar, Filibbiin iyo Kolombo.

Markii golaha Qaramada Midoobey sidaas ku go'aanshey ayaa Ingiriis, 1dii Abriil, 1950kii Talyaani ku wareejey Soomaaliya. Wuxuuna Ingiriis si uu uga curyaansho Soomaalida xagga dhaqaalaha sii furfurtey tereenkii gobolka Benaadir isku xiri jirey, iyo wershedihii milixda oo hore Talyaani Raas-Xaafuun uga dhisay.

Maxaase dhacay, oo Talyaani falay? run ahaantii meeshii laga rabey inuu hore u mariyo dadka Soomaaliyeed, oo falowgeed qabto siduu u hirgelin lahaa wixii laga rabey, ha ahaato xagga siyaasadda, taclliinta iyo maamulka dawladnimo ama ha ahaato xagga dhismaha dhaqaalaha buu wuxuu la yimid gumeysi hor leh, oo tab iyo xeelad cusub wata, oo qayb qaybi iyo gobollay ku habeysan. Waxaase dhacday, oo nasiib wanaag ah inaan dadkii in yar ma'ahe kala furfurmin.

Halkaas markii Soomaaliyi ku guuleysatey Golaha Qaramada Midoobey, Talyaanise soo noqdey baa dagaalkii siyaasad dalka gudihiisa ah isu geddiyey, oo ka yimid dagaalkii gacmeed oo layskaga horimanaayey iyo kii Qaramada Midoobey ka soconaayey. Dadka Soomaaliyeed dagaalladaas oo



qarsoodi ahaa, oo Talyaani iyo dabadhilifyadiisu wadajir hoos kaga hayeen, si ay xog ogaal ugu noqdaan ayaa ku adkeyd. Taariikhduse halmaamimeyso oo saddexdii dawladood oo Qarammada Midoobey soo dirtey iney Talyaani kor ka ilaashaan, Kolombo Talyaanigey gacan siineysey. Masar iyo Filibbinna khaas ahaan Masar waxay garabgelyo siinayeen dadka Soomaaliyeed, Maxaayeelay, wakiilkeedii Kamaaladdiin Saalax, ayaa dagaalka siyaasadda qarsoon ahaa ka kaabaayey, inaan laguna dagin goldaloolana laga helin, ilaa aakhirkii Talyaanigu, iyo ururadii dibusocodka ahaa ee diiddanaa, gobonnimada iyo israaca Soomaaliyeed wadajir u shirqooleen, oo ku dileen xafiiskisa oo «Fait» hortiisa ahaa markay taariikhdu ahayd 17.4.1957 saacadduna ahayd 1,30 ee duhurnimo. Ninkii dilay oo la oran jirey Maxamed Wiilow si aan runta loo ogaan, waxaa xabsiga lagu diley maalintii gobannimada la qaatey habeenkii ka horreyey.

Sidii Seyid Maxamed gabayada iyo murtida kale uu wax ku hanuunin jirey, baa S.Y.L. na garatey faa'iidada murtidu leedahay dadkana si dhib yar wax lagu garansiiyo. Waxay markaas dadweynaha shucuurtooda ku dhaqaajin jireen gabayo, heeso sida heestan wax tusaaleyneysa kuwii heer soke wax ka eegay, iyo kuwii si kastaba ha ka ahaatee, Soomaali gobannimadeeda, midnimadeeda iyo israaceeda, diiddanaa, waxay tahay heestu:

«Saca Faarse nacay
Soddon maalintuu qado
Safka haatan yiri

Sandulluu ku iman
Sidaa waxa ka dhigan
Somaali aan diidne».

* * *

Heestaas fahamsiineysa, ninkii Soomaali diiddanaa inuu sandulle ku soo raaci doono, iyo heeso kaloo kumanyaal ah una dhigan taas, oo abwaanadii tiriyeen, ayaa run ahaantii Soomaaliyi ku hanuunsantay, oo hirkii gobannimo ku aragtey.

Qoomiyaddii Soomaaliyeed oo alogantay Koonfur keliya kuma ekaan, ee dalalka Soomaaliyeed oo qaybsanaa bey ku fidey, gaar ahaan xagga Waqooyi oo S.Y.L. faracyo ku lahayd si laxaad leh, baa dadka shucuur iyo qoommiyadi ugu abuurantey. Waxaana ka kacay rag ay ka mid ahaayeen Faarax Oomaar (1879-1948) iyo Shiikh Bashiir.

Habkuu Faarax Oomaar Ingiriis kula dagaallamaayey, wuxuu la mid ahaa habkuu Gaandi kula dagaallamaayey Ingiriiskii Hindiya gumeysanaayey isla waagaas. Haddaba isagoo aqoontiisa la kaashanaaya ayuu Faarax is hortaagi jirey Ingiriis mar alla markuu tallaabo danaha dadka Soomaaliyeed ku lid ah ka dareemo. Halkaasna kagama hari jirine, wuxuu dacwado qorriin ah, u diri jirey guriga baarlimaanka ee Ingiriiska, isagoo ka ashtakaynaaya saraakiishii dalka wakiilka uga ahayd. Ashtakooyinkaas qaarkoodna markay baarlimaanka tagaan dawladda Ingiriis mararka qaarkood way texgelinaysey, oo saraakiishii qaarkood dib baa loogu celiyey Iglan.

Ka horimaadkaas iyo dacwooyinkaas, iyagaan ogeyn Igalan gaaraaya, ma raalli gelin Ingiriiskii dalka joogey. Waxay markaas ku dhaqaaqeen iney shirqoolaan oo dembiyo u sameeyaan, sidaaseyna dhowr jeer ku xireen. Ugu danbeystiina dhowr sano u masaafuriyeen gasiiradda la yiraahdo Kamaraan oo baddacas ku taal.

Isagoo ka xun Xaaji Aadan Afqallooc markii la xiray Faarax Oomaar, oo si xille oo silic leh Ingiriis kula kacay wuxuu yiri:

«Isaga oo dulmiga aad qabtaan, dood ka celinaaya
Dadii uu ahaa Faarax baa, jeelka loo diraye
Haddeeruu siduu dilay arwaax debedda meeraaye
loo diid durriyadduu dhaliyo, duunyaduu dhaqayey».



Inkastoo Ingiriis siyaabo badan oo cadaadis ah Faarax Oomar kula kacay, misana uma soo liicin, oo isagoo debinta qaniinsan hadafkiisiina ligligga haysta, ayuu ku geeriyoodey magaalada Hargeysa markay ahayd 1948.

Mararka qaarkood waxaa la yiraahdaa, Ingiriis baa maruu cusbitaalka Jigjiga ku jirey sun siiyey. Dabadeedna suntaas ayuu ayaamo dabadeed intuu dhakhtarkii Jigjiga ka soo baxay Hargeysa ugu dhintey.

Xaqiijinta jiritaanka warkaas, iyo jiritaan la'aantiisa waa muran jiraaya.

Shiikh Bashiirna wuxuu ku dhashay xaruntii daraawiishta, ahalana Seyid Maxamed bey ahaayeen. Sidaas darteed buu markaas jahaad lid ku ah Ingiris u abaabulay. Waxse dhacdey oo ayaandarro ah, isagoo jahaadkiisii kobcin oo laxaadsan in Ingiriis col si kedis ah ugu saaray, isagoo ku jira Buurdhaab, oo saddex iyo toban nin wata. Dabadeedna halkaas inta qaflad lagu qabtey laguna dilay bishii Abriil 1948 goobta la yiraahdo Ulasan. Meydkiisiina isagoo rabrab lagu sido la keenay magaalada Burco oo lagu aasay.

Sida aalaaba adduunyada la arkay ragga geesiyaasha noqdaa marka dhibaato timaaddo, dadku halqabsi bey ka dhigtaan. Sidaas aawadeed Shiikh Bashiir ha geerioodee, geeridiisii waxaa halqabsi iyo guubaabo dhiig dhaqaajis ah ka dhigtay raggi gabayaaga ahaa, ee xornimo ku dagaallankeed wax ku baraarujinaayey, wuxuuna Xaaji Aadan Afqallooc isagoo ay guubabo ka ahayd ka yiri geeridiisii tixdan:

«Duhur baa Bashiir lagu shannaqey, daar agtiinna ah'e
Damal la hadhgalaa bey jebsheen, waqey dulloobeen
Dahriga iyo laabtey rasaas, kaga daloosheene
Isagoo dam iyo dhiig leh, oo dogob ah oo meyda
Dadkii uu nebcaa iyo kufraa, daawashow yimide'e

Dacsad, iyo ihaaniyo, cag baa, loogu sii daraye
Nasab haddaad durriyaddiis tihiin, kama dareerteene
Meydkiisa daahira kolkii, debedda loo jiidey
Nimankii dilkiisii qirtiyo, idinka duunkiinnu
Kolkii aaska loo diidey waa, wada dul joogteene
Ma damqane jiidhkiinii kulkaas, waa ku digateene».

Inkastoo S.Y.L. faracyo ku lahayd magaalooyinka waqooyiga, haddana waxaa ka dhismay ururro kaloo waddani ah, ayna ka mid ahayd S.N.S. aakhirkiina la baxay S.N.L. (Somali National League).

Waxaa jirtey in tobankii sannadood, oo koonfur loo qabtey iney dawladnimo ku gaarto, isa soo gureysey, isla mar ahaantiina, ay qoommiyadda dadka Soomaaliyeed xoogsaneysey maalinba maalinta ka denbeysey. Waxaa markaas khasab noqotey in werwer iyo cabsiyi gasho. «dhagar qabe dhulkow dhaqdhaqaaqa' e dawladda Xabashida, oo aan innaba raalli ka ahayn in dawlad Soomaaliyeed geeska Afrika ka dhalato.

Siyaabahaas aayadood, bey markaas tallaabooyin hor leh ka qaaday xagga siyaasadda, si ay u dabreyso qoommiyadda abuurantay, madaxna la soo kaceysey. Waxayna ku guuleysatey garabna ku heshay, in 1955kii Ingiriis mar kaloo hor leh gacanta u geliyo intuu hore, u siiyey ma'ahe intii ka hartey, Hawd iyo Reseefeeriya.

Soomaalidu waxay tiraahdaa «war ninku ha i dilee ma i qoomameynaayey». Waxaa dadweynaha Soomaaliyeed geeri labaad ku ahayd dalkoodii la baxshey, markuu Ingiriis is yiri wax ku qanci oo dunida maqashiisiiyey, «waxaan fulinaayey heeshiis qarsoodi ah, oo haddaan Ingiriis nahay na dhex maray dawladda Xabashida 1954. Sidey u muuqato waa qancis aan xilkas ahayn Soomaaliyina aaney halmaameyn.



Siyaasaddaas muddaahanada iyo dal bixinta ah, oo Ingiriis ku kacay, ma'ahe tii u horreysey, oo uu dal dad leeyahay dad kale oo u wax la rabey dejiyey, waayo waxaa ka mid ah dadkuu khayaanaayey, oo dalkoodii caddaan iyo Yuhuud u boobey Koonfur Afrika, Rodiisiya iyo Falastiin. Waxaana kaloo war lagu hayaa, inkastaaney hirgelin markay ahayd 1903kii, inuu isku deyey «Uganda» dhul ka mid ah, oo lagu qiyaasey 60,000 SQ. mile Yuhuud dejiyo.

Intaas waxaa u raaca denbiyaduu malaayiin iyo malaayiin dad ka galay, oo meel alla meeshii Ingiriis cag dhigay wuxuu ku abuuray midabakoor, iyo kala sarreyn beni'aadan.

Siyaabahaas aawadood markaas ma leh Ingiriis sifo kale, oo lagu tilmaami karo, oo aan ahayn inuu yahay dhagar qabe caalami ah, oo dacwad suge ah, khaas ahaan marka la eego waxyeelladuu dadka Soomaaliyeed aayihiisa u geystey.

# Gobannimo Qadashadii iyo Israacii 1960kii

«Ka sideetan samaaneey, calankaannu sugeynee
Sahankiisa fileynayow sarmaweydo hillaacdayow
Sagal maanta darroorayow, siigadii naga meyrayow
Saqdhexaannu ahayne, kii soo saaray cadceeddow
Samadaa kii u ekaayow, xiddigaha mid la siiyayow
Saaxirkii kala guurraye, sarreeyow ma nusqaamow
An siduu yahay eegee, kanna siib kanna saar».

Cabdullaahi Suldaan «Timacadde»

26kii Juun, 1960.

Foolxumadii Hawd bixintiisii ka dhacday, waxay meelay Soomaaliyi joogtaba gelisey calool xumo, iyo taah, khaas ahana xagga waqooyi, oo Hawd ku qabsan yahay, qof walboo ku noolina bixintiisu taabaneysey. Waxaa shucuurtii dadka gaartey heer aaney weligeed hore u gaarin, oo bannaan baxyo laxaad leh laga dhigay. Waxaana wafdi ka koobnaa ururradii siyaasiga ahaa loo diray London, iyo Qaramamada Midoobey si ay ugu bandhigaan xadgudubka Ingiriis Ummadda Soomaaliyeed kula kacay, kaddib markuu ulakac dalkeedii dawladda Xabashida u gacan geliyey. Waxaase wefdigii iyo dacwaddey wateen London ku curyaanshey, oo is hortaagey Ingiriis.

Sidaaseyna ku soo noqdeen, iyagoo kabna gashan kabna laadlaadinaaya, oo iska daa Qaramada Midoobey, oo ay wax gaarsiiyaane, Ingiriis albaabadii ka xirtey.

Haddii haddaba, dadka Soomaaliyeed aad uga urugooday dhaxal wereejintii Hawd iyo Reseef-eeriya, oo siyaasaddii geeska Afrika aloogantey, xumihii gumeysiga Ingiriisna nin walboo shacbi weynaha ka mid ahaa goonni ahaan dab iyo

shiil ugu noqday, baa shucuurtii dadweynaha heer sare gaartey, ayna la soo gudboonaatey geeri, iyo nolol kala doorashadood.

Xisbiyo iyo ururro kale geddisan, ayna ka mid ahaayeen S.N.L. (Somali National Leagu) U.S.P. (United Somali Partey) iyo N.U.F. (National United Fornt) ayaa dhismay. Waxaa kaloo isna qayb ka qaatey baraarujintii dadweynaha urur dhallinyaro kana koobnaa dhallintii tacliinta lahayd oo la baxday (Somali Old boys Association) (SOBA)

Shucuurtaas kacday, iyo siyaabahaas isbiirsaday aawadood, bey waxay gaartey kuna sigatey in dadweynihii iyo isticmaarkii Ingiriis arrinkoodu wada hadal iyo siyaasad ka tago, oo gacan layskaga hor yimaado. Markaasay khasab ku noqotey inuu gobannimo siiyo kana hormariyo xagga koonfureed, maalintii 26kii June 1960kii iyadoo ay tahay casar gaaban, oo roob shuux yar ahi da'aayo baa calankiisii, oo dadka Soomaaliyeed halaag iyo xaqdarro hoostiisa ugu hoobanayeen ugu yaraan 76 sano birtii hoos looga soo siibey, oo lagu beddeley, cir u ekow, xiddigtiisu shan geeslow, calankii ummadda Somaaliyeed, isaga oo uu geesigii abwaanka ahaa Cabdullaahi Suldaan (Timacadde) naxariistii janno Allaha siiyee ku geeraaraaya, geeraarkiisii caanka noqdey oo ku yiri:

«Sarreeyow ma nusqaamow
Aan sidu yahay eegee
Kan siib kanna saar».

Waxaana, isagoo qoyan oo duudduuban kilkilada ku qaatey calankii Ingiriiska, ferenji la oran jirey Karal (Carrel), oo xoghaye u ahaa Badhasaabikii Ingiriska Hargeysa u joogey, oo isagu Jabbuuti ka dhoofay, si uu indhaha uga qarsado weydaarsiinta labada calan.



Halkaasuu ku dhammaaday isticmaarkii Ingiriiska, oo waxyeello ma'ahe aan wax kale la joogin, oo iska daa wax kale oo uu qabtee magaalo madaxda Hargeysa biyo la'aan kaga tegey. Waxaase mahad leh biyuhuu ka hagranaayey in qarni ah in «China» si dhib yar leh u soo gelisey.

Iyadoo Soomaaliyi meelay joogtaba faraxsaneyd, baa misana gobolka Waqooyi farxad iyo damaashaad dheeraad ah laga dhigay, iyadoo lagu heesayo, heeso ay ugu soo talagaleen abwaannadii murtida, sida:

«Maanta maanta, waa maalin weyne maanta
Maanta maanta, madaxeen bannaane maanta».

iyo tan Cali Sugulle Tiriyey

Bal kaaley Canabey, calanka walac leh
Waa cawadeennee, aynu ciidnee
Oday cirroole ah, habar cajuusad ah
Iyo carruurti, lays dhex cararyey,
Bal kaalay Canabey, lama cidloodee
Calanka walac leh, waa cawadeenna
aynu ciidnee, carradeennaa wanaagsan
Cusubkuna ku yaallo, bal kalay canabey
Lama cidloodee, aynu ciidnee.

Ragga siyaasadda u kuur galaa waxay ilaadsheen inkastoo Ingiriis xornimo u oggolaaday xagga Waqooyi, misana inaanu raalli ka ahayn iney koonfur israacaan, oo waxaa u qoollleyd siyaasad ah, iney dhismaan laba dawladood, oo kala ah Waqooyi iyo koonfur. Halkaasna ay ugu suura gasho inuu xagga Waqooyi ku biiriyo Barwaaqasoorkiisa. Taasina run kama fogeyn, haddii laga qiyaas qaato tabaha, iyo xeeladaha ah qaybqaybinta oo gumeystayaashu kula kaceen dalalkay xornimo siiyeen, si ay had iyo jeer fadqalalo uga dhex abuuran.

Sidaas darteed bey markaas, madaxdii Waqooyi laga doortey, Xamar ugu soo kaceen. Afar maalmood kaddibna bishii Julay 1deedii 1960kii, waxaa wadajir loogu dhawaaqay dhalasho, ay dhalatey, Jamhuuriyad Soomaaliyeed, iyo israac labadii dhinac, oo aan shuruud lahayn.

Goortii shantey Soomaaliyi u qaybsaneyd, labo xornimo isku raacdey, baa saddexdii kalena, yididdiilo gobannimo gashay, hirkii xornimona u laacey. Hase ahaatee Gumeystayaasha reer galbeed, ayaa ku haliiley, oo waxay xoog iyo laxaad lahaayeen dul dhigay, si aaney u haweysan xornimada walaalahood heleen, halkaaseyna isku hortaagey dhaqdhaqaaqyadoodii.

## DHAQDHAQAAQYADII N.F.D. IYO GUMEYSIGA INGIRIISKA

La arkee, waana suuragal, in guriga la yiraahdo «Lancaster house» oo London ku yaal, ka marag geli karo shirqoollo badan oo Ingiriisi ku shirqoolay dalal badan, oo dalka Soomaaliyeed ka mid yahay. Waxaa uunse hadda la hubaa, kuwo kale ha qarsoonaadeene, in markay taariikhdu ahayd Abriil 1962, Wasiirkii **gumeysiga u qaabbilsanaa Ingiriiska** uu shir lagaga wada hadlaayey sidii loo xallili lahaa N.F.D. ku qabtey gurigaas.

Wasiirkii gumeysiga «Mr. Maulding» wuxuu shirkaas kaga dhawaaqay, oo dadka reer N.F.D. iyo dunidoo dhan maqashiisiiyey in guddi ka socota barwaaqasooranka, oo soo eegta, sidey rabaan dadka N.F.D. la magacaabey, ilaa ay warbixin keenaanna aan dawladda Ingiriis waxba xaalka N.F.D. ka beddelayn. Guddidaasina waxay ka koobneyd janan «Borget» oo Canada» u dhashay guddoomiyana ka haa, iyo Dr. Ayuki oo Nijeria u dhashay.



Markii wafdigu egay, aftina qaadday waxaa dhacday in 87% tiri «waxaan rabnaa inaannu Soomaaliya, oo aannu isku dadnahay, ku darsanna oo la dawlad noqonaa».

Ayaandarrose Ingiriis dimuqraadiyaddiisu waa taas, oo ma tixgelin wixii dadka badankiis rabey. Waxayna Soomaalidu tiraahdaa. «Geeljiruhu isagoo og, halkuu usha ka geynaayo, buu yiraahdaa xagee ka jaraa».

Shaki kuma jiro markaas iney Ingiriiska u go'neyd siduu ka yeelaayo N.F.D. laakiinse ummadda Soomaaliyeed iyo ra'yiga dunida ayuu ku dagaayey, oo afti been ah oo aanu ku camal faleyn ku hoosaasinaayey. Bixintii N.F.D. ummadda Soomaaliyeed dharbaaxo qaraar bey ku ahayd, oo bannaanbaxyaa meel walba laga dhigay, dhallinyarada dugsiyadoo dhammina intey weer xiratey, oo madaxa xiirtay, bey meel walboo Ingiriis xafiis ku lahaa dalka Soomaaliyeed baabi'iyeen, dabadeedna ay noqotey khasab in xiriirka dawladnimo loo jaro markay ahayd 1963. Soomaaliyana waxay noqotey dawladdii u horreysey dawlad madow oo Ingiriis xiriirka dawladnimo u go,eysey.

Waxaana isla markiba bilaabmey dhaqdhaqaaqyo gobannimodoon ah, oo ka dhiidhiyey afduubkii gumeysiga Ingiriisku bareere u sameeyey. Intaanu geeriyoon 1961 ka hor Cali Aadan Loord, ayaa ka mid ahaa ragga bulshada Soomaaliyeed xornimo ku dhiirin jirey. Markii Ingiriis wax afduubeyna, dhaqdhaqaaqyo uu ugu caansanaa N.P.P.P.P. (Northern Province People Progressive Partey) ayaa kacay waxaana madax ka ahaa Jaalle Waaqow Haabbi, Alex Qolqollena wuxuu ahaa ku xigeen. Deeqow Macallin Istanbuulna wuxuu ka ahaa xoghaye.

Gortii dhaqdhaqaaqyadaasi bilaabmeen, oo dhowr guddoomiye «D.C.» oo caddaan ah iyo askar badan la laayey ayaa waxaa la xirxiray madaxdii xisbiga N.P.P.P.P.

Hase ahaatee waxaa hoggaankii gobannimo doonka qabtey guddi xisbiga ka mid ahayd, oo saddex iyo toban ka koobneyd, madaxna uu ka ahaa Cabdulqaadir Shiikh Xuseen, halkaaseyna jahaad u hubqaadeen 11kii Noofember 1963, intaan Kinya xorriyadda qaadan.

Dhaqdhaqaaqaas N.F.D. wuxuu gaarey heer uu wuxuu u dagaallamaayey wax loogu oggolaado, hase ahaatee libintii u dhoweyd, waxaa loogu dawgalay siyaasaddii dawladdii musuqmaasuqa oo ku habeysneyd «Arrimaha yaryar iyo arrimaha waaweyn (Minor and major problems) kala horreysiintooda Caruusana (Arusha) lagu kala saxiixday.

## XEEBTA SOOMALIYEED IYO GUMEYSIGA FARANSIISKA

Xeebta Soomaaliyeed kama duwanaan karto qaybaha kale markay dawladnimo Soomaaliyeed dhalatay, in iyana yididdiilo xornimo gasho, inkastoo dhaqdhaqaaqyo gobannimodoon ahi hore u jireen. Waxaana dhaqdhaqaaqyadaas midkood la oran jirey P.M.P. (People Movement Partey) madaxna waxaa ka ahaa geesigii Maxamuud Xarbi, oo sida la qabo markay taariikhdu ahayd 29kii Sebtember 1960kii basaasiinta Faransiisku dayaaraduu Suweysarlaand ka soo raacay bombo ugu rideen, halkaasna uu ku geeriyoodey kaddib markay badda kula dhex dhacdey, isagoo ay laba iyo toban qof oo reer Aljeeris la socdaan.

Waxaa jirta inkastoo isticmaar oo dhammi habaarqabe yahay, misana iney sii kala daran yihiin, oo meeshuu Ingiriis gacan iyo taba qarsoon wax ku dilo, Faransiisku isagoo tabahaas la wadaaga sid Aljeeris iyo Jabbuuti lagaga warramay buu wuxuu dheer yahay dilka bareerka ah, gardarrooyinka geed ku gabbasho lahayn, iyo naxriis li'ida lafagurka iyo nafku silicinta ah.



Geeridii Xarbi kaddib, wuxuu gumeystaha Faransiis cadaadin iyo cabudhin kula kacay dhaqdhaqaaqyadii gobannimo doonka ahaa, isagoo ku itsticmaalay ciidamadiisa aan naxariista lahayn calooshoodana u shaqeysta, oo uu caanka ku yahay, loona yaqaan French Legion». Waxay gaartey qoommiyadii iyo shucuurtii dadweynaha uu kadeedaayey iney geesinnimo iyo dhiirri dheeraad ah ka sii qaadaan.

Sida la og yahay, waxaa waayo-arag lagu noqdey mar alla marka isticmaarku saabaangabo, oo siyaasaddiisu fashilanto, bareerana looga soo horjeesto, inuu siyaasad qool hor leh abaabulo. Sidaas aawadeed baa madaxweyne Gen. «De Gaul» 1958 siyaasaddii Faransiiska, iyadoo aan xeeladi ka maqneyn, weji hor leh u muujiyey, oo dalalkii Afrika oo uu gumeysan jirey, kala doorransiiyey iney u furan tahay dalkii raba inuu gumeysigiisa ku sii jiro iyo kii raba inuu ka baxo, oo madaxbannaani helo.

Dawlada badan, oo Afrikaan ah, oo ay Gini, Maali Senigaal ka mid yihiin, ayaa madax bannaani doortey, oo sidaas 1958 kii xornimadoodii ku qaatey. Hase ahaatee, inkastoo xisbigii u weynaa oo dadweynaha badankood matelaayey, Maxamuud Xarbina hor kacaayey doorashadodii ku bixiyeen gobannimaan dooranney, haddana Faransiiska ayaa caddaan u magoogey intuu doorashadii ku gurtey, oo markaas dunida maqashiisiiyey in xeebta Soomaaliyeed dooratey in gumeysiga Faransiisku joogo. Lama oran karo, oo run waa ka fog tahay, qarnigan 20aad qof beni'aadan ah, xiskiisuna dhan yahay, oo weliba xumaha, iyo seymaha isticmaarku leeyahay arkey, khaas ahaan kan Faransiiska baa xornimo maamuus leh, gunnimo ka doorbidaaya.

Waxay markaas su'aashu tahay, maxaa arrinka ubucdiisu tahay, oo keenay in Faransiisku uunka maqashiisiiyo Xeebta Soomaaliyeed gobannimey diiddey, oo gunnimey ka dooratey sannadihii ahaa 1958 iyo 1967.

Ugu horreystii haddii hoos loogu arooro, oo si cilmi ah loo falanqeeyo, waxaa la ogsoon yahay ahammiyadda ay Jabbuuti u lahayd Faransiika marka laga eego meeshey ku taal, xagga halbowlannimada, xagga siyaasaddiisa isticmaariga ah, iyo dinihiisa Badda-Cas.

Lama filaayo markaas inuu innaba Faransiisku daacad ka ahaa doorashooyinkaas Xeebta Soomaaliyeed iney gobannimo ku hesho.

Siyaabahaas isbiirsadey aawadood, bey markay ahayd 1967 si doorashadu xaggiisa ugu dheellido, oo aaney innaba u iman waxay dadka reer Jabuuti rabaan buu wuxuu ku bilaabey dadkii cadaadis, iyo kadeed hor leh, oo aan geeri waxba dhaamin.

Wuxuuna ugu horreystii keenay magaalada Jabuuti ciidamada caloshooda u shaqeysta, oo tiro dhaaf ah, laguna qiyaase 15,000, oo layaab lehe, ama waa la jiifiyaana bannaan la joojaana bannaane, uu u oggolaadey iney doorashada sida dadka waddaniinta ah sharci ahaan wax uga dhiibtaan.

Dunidu ma waxay rumeysan kartaa, nin Faransiis ah, oo weliba calooshiisa u shaqeysta, baa doorashadiisa ku dhiibaaya Faransiis ma rabo, oo waxaan rabaa dadkaan gumeysto iney gobannimo helaan? Ha ka yaabin, laakiinse u daa xeeladaha foosha xun, ee gumeysiga Faransiisku wax dagay.

Xeeladda kale oo uu ku kacay waxay ahayd magaalo madaxdii Jabbuuti buu silig koronto ah ku wereejiyey, si aaney dadka Xeebta Jabuuti degaa, intooda magaala-madaxda debedda ka jirtaa doorasho uga qayb gelin, wuxuuna ka soo saaray 18,000 qof intooda badanina waraaqaha dhalashada qabeen, lagase gubey.



Waxyaalihii foosha xumaa, oo Faransiisku sun iyo boog kaga waraabshey, oo kula kacay dadka Xeebtaas, sida silcinta, macaluulinta, kufsiga ay ciidamadu jeelasha ku kufsanaayeen hablaha iyo dumarka Soomaaliyeed, marmarna ayba dhaceysey iney qaarkood rimeygii ka soo rideen naxariis la'idey kula kacayeen darteed.

Ragga sida xun loo halaagay, oo tusaale loo qaadan karo, waxaa ka mid ah geesigii Cabdiraxmaan Cadhoole, oo ka mid ahaa halgamayaashii Xeebta Soomaaliyed ka Kacay, oo wadnaha Faransiiska u galay, dibna uga laambi waayey biime kasta oo ka hor yimid.

Haddaba, markuu isticmaarka Faransiisku saas Cabdiraxmaan Cadhoole u ogaadey buu intuu qabtey wuxuu ku xiray gasiiradda la yiraahdo «Eroona», oo badda Jabuuti ku taal. Sida lagaga warrameyna, raggii lagu xiray nin dhifaa nolol kaga soo noqday. Waxaana la sheegay in gasiiraddaas Eroona ay daari ka dhisan tahay, daartaasna waxaa hoos mara iliil biya ah oo badda laga soo duwey, waxaana iliisha dul saaran shebeg bir ah oo, daldaloola.

Daarta gasiiraddaas Eroona ka dhisan, waxaa lagu deldeli jirey inta qoobabka laga soo xiro ninba, ninkuu ka halyeysan yahay xagga gobannimo doonka. Inta badanna waxaa la sheegay inaan qaarkood la deldeline lagu dhugtamay, oo rasaas loogu talagalay jidhkooda lala dhacay, dabadeedna dhiigga ka baxay kalluun ku soo ururay lagu jillaabtey.

Waa ayaandarro weyne, Cabdiraxmaan Cadhoole wuxuu ka mid noqdey 1967 raggii daarta Eroona lagu deldeley, hase ahaate wuxuu kaga duwanaa kuwaan raq iyo ruuxtoonna dib loo arag, soo celintii laga soo celiyey meydkiisii gasiiradda, oo la soo dhex dhigay, isagoo labada indhood goof madhan yihiin, sanka iyo labada dhegoodna go'an yihiin, qolay ku jireen dhowr qof, oo sidiisa si le'eg loo silciyey.



Askarta gumeysiga madow, ee Xabashiyeed oo ku tooganeysa rag Soomaaliyeed Webiga Hawaas, kaddib markay silcisay, gondahana ka xirxirtey.

Waa arrin urugo lehe, waxaa la sheegay ugu horreystii markay ahaladiis, iyo dadkii wax ka baafinaayey qolkuu yiil galeen, iney garan waayeen, sababtoo ahayd jidhkiisoo cadcad u googgonaa. Hase ahaatee waxaa aakhirkii lagu soo soocay, kaddib markii maro wajiga ka saarreyd laga rogay, laba tin oo cirra ah oo foodda kaga yiil caanna uu ku ahaa, iyo gub yar, uu fedha bidixda ku lahaa.

Facaayinkuu Faransiis ku hayey dadka Xeebta Soomaaliyeed ta u darri yaxay tahay, oo in taariikh ahaan loo taabto ah waxyaaluhuu ka dhigay tuulada Balbalo. Tuuladaas waxay Jabbuuti u jirta 16 K. M., oo silig bay magaalamadaxda kaga teedan tahay. Waayihii horena waxay ahaan jirtey ama weli tahayba meesha qashinka, xoolaha bakhtiya iyo kuddaafadda magaalamadaxda lagu daadiyo. Sifihii cadaabta lagu sheegi jirey bey leedahay oo waa meel kulul, oo guryo ma leh, biyona ma leh, oo waa meel omos ah, cuntana aan lahayn.


Haddaba tuuladaas iyada ah baa dabeecadda iyo dhibaha ay leedahay aawadeed Faransiis markay ahayd 1967 u doortey inuu dad badan, oo waddaniin ah ku go'doonsho kaddib markuu Jabbuuti ka saarey si aaney doorashada wax uga dhiiban. Isla markaasna wuxuu xeryo lagu urursho uga dhigay wixii damcay iney Jabbuuti miyigeeda ka soo galaan, iyagoo aan ulajeeddo kala lahayne dadkoodii u socdey, amaba waa dalkoodiye dano kale u lahaa.

Waxaa la sheegay, si ay u suuragal tahay allaa oge, ama «nin daad qaaday xunbo cuskaye» in dadku markay miliqdu ku kululaato, oo meeley hadh galaan waayaan, ay ciidda intey tuurtuuraan, oo dhulka ka soo faagaan ay hadhsan jireen.

Tuuladaas Balbalo oo uu Faransiis ugu talagalay inuu wax ku halaago, oo ku go'doonsho, waxay waddaniintii lagu urushey ku muteen sida war lagu helay harraad, gaajo indho



Xeryilii Balbala (Jabbuuti) oo gumeysiga Faransiisku ku halaagi jirey dadka reer Jabbuuti





Gumeysigii Faransiiska oo tooganaaya ri, kaddib markay gobannimodoonka Jabbuuti ku qoreen gumeysi ma rabno.

beel, silic iyo saxariir oo dhan. Aakhirkiina intey lafo soogan noqdeen bey geeri aan hore loo arag u dhinteen, lamana aasine haadku raqdodii wableeyey.

Tuuladaas Balbalo, oo gumeysiga Faransiisku dadka Xeebta Soomaaliyeed ku balanbalshey, warkeedu iyo wixii ka dhacay Soomaali keliya kuma koobneyn, ee caalamka iyo ragga wararka fidiya ayaa ka war helay, sidaas darteed baa markaas dadkii ajanebiga ahaa u bixiyeen «The Grave Yard of the Soomaali People» Qabrigii ummadda Soomaaliyeed.

Naxarisi li'ida iyo denbiyada culculus, oo gumeystaha Faransiisku ka galay dadka Xeebta soomaaliyeed waa tiro dhaaf waxaana adduunyada tusaale u ah, ridii bahaayinka ahayd, oo uu toogashada ku xukumey 1967kii kaddib markuu ku arkay dusheeda oo ay ku qorreyd «Faransiis gumeysigiisa ma rabno». Isla sannadkaas 1967 ayuu magacii loo yiqiin oo ahaa Xeebta Soomaaliyeed u beddelay magacyo qabiil, oo ah Cafar iyo Ciise.

Yaa og Faransiis ma'ahe, inta arrimo sidaas ah qarsoon? Inta la ogyahayse ilaa hadda siyaabahaas, bey ku sugneyd siyaasadda isticmaarka Faransiisku doorashadii uu Xeebta Soomaaliyeed ka dhigay 1967kii, oo ahayd «Haa ama Maya» (Haada, oo ahayd gumeysi baan rabnaa, iyo Mayada oo ahayd gumeysi mar rabno). waxaana dhalatay markuu kala haabyareyey waddaniintii, curyaanshey dhaqdhaqaaqyadii horusocodka ahaa, gowrgowraacay hanaddadii horkacaayey xornimada, awood siiyey ciidankisa caloosha u shaqeysta inuu doorashada ka qayb galo, bey u furraatey inuu wuxuu doonaayey helo, oo dhisto dabadhilifyo uu ugu weyn yahay Cali Caarif. Nin walboo madax noqdaa kaalin buu taariikhda ka galaaye, madaxdii kale, ee Afrika xornimey doorteen, Cali Caarifse u daa inuu yahay ninkii ugu horreeyey adduunka, oo sharafkay gobannimo leedahay, gunnimada la og yahay dullinnimadey leedahay ku doorsadey.



Sababa kasta, oo dhuuniraacnimo iyo dabadhilifnimo ka mid yihiin, Cali Caarif ha qabee, dembiyaduu ka galay Xeebta Soomaaliyeed dhabarkiisey saaran yihiin. Taariikhdana weligiis qancin karimaayo, oo waxaa halqabsi loogu xusayaa, Cali Caarifkii gobannimo nacee, gunnimo ku doorsadey.

Siyaasadda Xabashidu Xeebta Soomaaliyeed ka qabtey waxaa caddeeyey markay ahayd 28kii Ogosto, 1966 boqor ku sheeggii «Haile Salaasse» oo ku yiri «B.B.C.» maray ka wareysatey «Waxaan jeclahay in Faransiisku weligis haysto Xeebta Soomaaliyeed».

## DALKA SOOMAALIYEED EE GACANTA GUMEYSIGA XABASHIDA KU JIRA.

Intaan waxba laga sheegin gumeysiga Xabashidu gumeysato dalka Soomaaliyeed qayb ka mid ah, waxaa loo baahan yahay in taariikhda geeska Afrika dib loo raaco ilaa qarnigii 16aad, ee Axmed Gurey kacay. Waayo waxaa daaha ka qaadmeysa taariikh hor leh, oo qoto dheer, oo dadweynaha Afrikaanka ahi iyo dunida kale qaarkeed aaney xog ogaal u ahayn, sidey gumeystayaasha reer Yurub, ha ugu soo horreeyee Boortaqiisku, Ingiriis, Faransiis iyo Talyaanina gadaal imaad ha ahaadeene, ay gacan iyo garabgeliyo ugu siinayeen iney Xabashidu dalka Soomaaliyeed qabsato.

Sidey taariikhdu ku sugan tahay hadba heerkay joogtaba, waxaa shaki la'aan ah, in siyaasadda Boqortooyadii Xabashidu ee Menelig madax ka ahaa qarnigii 19aad, Xaylana uga dambeeyey ku habeysneyd dalballaarsi, mabda'eeduna had iyo jeer ahaa, inaaney innaba dhalan qarannimo iyo midnimo Soomaaliyeed. Si ay sidaasi ugu suuragashona waxay ku kaceen siyaabahan:



Gumeysiga madow, ee Xabashiyeed wuxuu gaarey heer uu ku silciyo, garbadduubna u xirxiro Soomaalidu laayo meydkooda. Taasna waxaa awood u siiyey gumeystayaasha reer galbeed, iyo huwanta manta gacanta ku siinaaya gumeysigeeda.

Maaddaama Soomaaliyi ka gacan sareesey Xabashida qarnigii 16aad, ee Axmed Gurey kacay, waxay ku kalliftey boqortooyadii Xabashida iney gumeysigii Boortaqiiska garabgelyo warsato, iyadoo ku beerlaxawsaneysa isku diin ahaanta waana ka heshay hiil iyo garabgelyo xoog leh, oo ay Axmed Gurey kula dagaalanto.

Hiilkaas Boortaqiisku u soo hiiliyey way ka faa'iideysatey, sababtoo ah xiriir hor leh ayey la sii yeelatey Boortaqiis iyo dawladihii reer Yurub. Xiriirkaasina wuxuu aakhirkii dhaxalsiiyey iney u oggolaadaan iney ka qayb gasho markay ahayd 1884 «shirqoolkii Berliin» ee Afrika lagu qaybsanaayey. Halkaasuuna gumeysigeedu, iyo dalballaarsigeedu ka bilaabmey, oo iyadoo la gacan hayo dalka Soomaaliyeed reer Yurub u gacan geliyeen.

Waxay haddaba su'aasha aaney ummadda Soomaaliyeed weli fahmin, isna weyddiisaa tahay, maxay gumeystayaasha reer Yurub, ee reer galbeed muddo ku siman Axmed Gurey cahdigiisii, ilaa waqtigan xaadirka ah, ay bareera u dhabar jebinaayey dadka Soomaaliyeed, uguna garabgeleyeynaayeen Xabashida.

Tan u horreysa waxay tahay mid la og yahay, oo ah in qarnigii 19aad iyo ka horba mabda'a keliya oo laysugu hiilin jirey ay diinta ahayd, oo hadba dadkii isku diin ah ayaa xiriir iyo iskaashi dhex mari jirey. Waayahaasna dawladaha kiristaanka ah, ee reer Yurub oo horumar gaarey una soo foofey gumeysiga Afrika iyo Asiya, waxaa inta badan horseed u ahaa baadderiyo iyo rag kaloo kenisadaha ku xirraa. Raggaasna dawladahay ka yimaaddeen waa taxgelin jireen, oo hadba sidey ugu war celiyaan baa lagu camal fali jirey. Markaas dalal badan oo islaam ah, sida Soomaaliya, iyo Soodaan jahaaddoo ayey kala hortageen, Xabashiduna maaddaama ay isku diin yihiin gacmo furan ayey ku soo dhoweysey, ama horseed u soo kaxeeya Afrika beyba u noqotey.

Tusaale ahaan waxaa loo soo qaadan karaa, markii Mahdigii Soodaan, iyo Seyid Maxamedba la jahaatamayeen isticmaarka Ingiriiska, Xabashiduna Ingiriiska ayey labada jeerba garab siineysey.

Afrika keliya Xabashiyi gumeystayaasha uma soo daaddihiin ee Eeshiyana sidaas si le'eg ayey ka fashay, oo 1950kii intey ciidamo u dirtey «Korea» ayey Mareykan, iyo huwantiisii gacan siineysey.

Taasoo ah markaas meeshay Xabashidu isticmaarka xiriir la yeelatey, gacma furannna ku soo dhoweyneysey iney gumeysigooda Afrika la soo galaan, dadka Soomaaliyeed sidaas ma yeelin ee, jahaaddo kharaar, oo ay ka mid yihiin kii Axmed Gurey, kii Seyid Maxamed iyo kuwii kaloo ka danbeeyey ayuu kala hortagey.

Halkaasay noqotey khasab in Xabashidu ka faa'iideysato iska hor imaadkii dadka Somaaliyeed iyo gumeystayaashay la jahaatamayeen. Waxaa kaloo iyana jirtey maaddaama ay isku hadaf ahaayeen Imbiryaaliyadii Xabashida, ee qarnigii 19aad iyo dawladihii gumeystayaasha reer Yurub, xagga dalballaarsiga, waxaa dhalatey iney markaas isku dan noqdeen, oo sidaas aawadeed u gacan qabteen had iyo jeer ayna daryeeleen codsashadeeda. Iyana waxaa wax ka soo qaad leh, waxna ku biirshey in gumeysigu dadka Soomaaliyeed dhabar jebiyo qabka qarannimo, oo hibo loo siiyey, oo ninka Soomaaliyeed, oo reer miyiga caadiga ahi, isla weynaanta ninka caddi la yimid aanu aqoonsan, aybana dhacdey inuu isagu quursado, oo weel wax kula cunin, gacansaarkana kala hawocdo, isagoo maro gacantiisa isaga dhiga ma' ahe. Isla markaasn isk daa ninka Soomaaliyeed qadderin uu qadderiyo ninka cade, uu rumeysanaa inuu mag ahaan marka loo qiimeeyo uu laba dalool ka naaqsan yahay. Meeshaasna is-maandhaaf ayaa ka yimid, oo isla weynow ninkii cadddaa, ee filaayey in loo gurguurto, ayaa isagii la takooray.



Halkaasna waxaa ka dhashay, in ninkii Yurub ka yimid collaad dheeraad ah u qaaday dadkii Soomaaliyeed imaatinkii horeba, sidaas darteedna uu kaga aargutay wax alla wuxuu wax ku yeeli karoba.

Siyaabahaas isbiirsaey, oo tan u horreysaa tahay, isku diin ahaanta ay Xabashida isku diin yihiin gumeystayaasha reer Yurub iyo isku hadafka ay xagga gumeysiga iyo dalballaarsiga iskaga hadaf ahaayeen, iyo isla markaas Xabashidoo ku soo dhoweyneysey isticmaarka soo galka Afrika, Soomaaliduna jahaad kala hortegeysey gumeysi naceybka ku tallaalan dartiis, ayaa guud ahaan dhaliyey in Xabashidu dhaxasho samaha gumeystayaasha reer galbeed, Soomaaliduna hesho saymahooda. Waana mid taariikhi ah, in weligeed Soomaaliyi dagaal kaga adkayd Xabashida, markay iskood iska horyimaadaan iyadoo aan midkoodna cidi taageereyn. Maxayeelay cahdigii Axmed Gurey Soomaaloo ka gacan sarreeysa, ayey Boortaqiiss u yeeratay. Qabashadii Hararna Talyaani, iyo Ingiriis ayaa gacan ku siiyey. Cahdigii Daraawiisheedna Ingiriis ayaa gacan siinaayey.

Iyadoo haddaba, taariikhda geeska Afrika marka la soo gaabsho ay sidaas ku sugan tahay, ayaa markay ahayd 1960 kii Jamhuuriyadda Soomaaliyeed dhalatey, oo canbaareeysey, xeerna ka dhigtey qodobada xeerkeeda ka mid ah, inaaney innaba aqoonsaneyn heshiisyadii xaqdarrada ahaa, ee dhex maray dawladihii isticmaarka, oo ay ku qaybsadeen dalka Soomaaliyeed, aaneyna dabreyneyn heshiisyadaas gumeystayaashu dhexdooda ka dhigteen, mar haddaaney dadka Soomaaliyeed waxba ka ogeyn.

Isla markiiba madaxdii dalka Soomaaliyeed waxay bilaabeen iney kala hadlaan dawladda Xabashida iyo Boqorkii Xaylasalaase, in si Afrikaannimo ah, iyo si nabadgelya ah, lagu dhammeystiro xuquuqda dadka Soomaaliyeed, oo xaqdarrada lagu siiyey, rabana iney ku soo biiraan walaalahooda xorni-

mada qaatey. Hase ahaatee waxaa ayaandarro, iyo qoommamo ah, in waxay gumeystayaashii reer Yurub garwaaqsadeen, Xabashidu garawsan weydey, iyadoo og iney dal iyo dad Somaaliyeed xaqdarro ku haysato.


Intaas waxaa soo raaca, meeshii dawladda Soomaaliyeed nabadgelyo iyo in O.A.U. du ama U.N. ku dhexdhexaadiyaan ku dedaaleysey, Xabashidu waxay bilawdey, iney Jamhuuriyadda Soomaaliyeed colaadiso. Waxayna isla markay dawladnimo Soomaaliyeed dhalatey 1960, xukun degdeg ah ku soo rogtey dadkii Soomaaliyed, oo gacanta ugu jirey, waxayna saartey wax la yiraahdo «Gibir», oo dil iyo dhac naxariis la'aan ah gaalaa bixisey maato iyo muruqleba. Kaddib markii dadkii u adkeysan waayeen, cadaadiskii ciidamada Xabashidu ku hayeen, ayna dad Xabashi ah, soo dejisey Hawaas iyo hareeraheeda, si ay u dabargoyso, dadka Soomaaliyeed oo halkaas ku noolaa, ayey khasab ku noqotay iney nafta huraan, oo jahaad galaan, dadka Soomaali Galbeed.

Inkastuu halganku soo taxnaa, ilaa markii S.Y.L. la asaasay, halkaasaa waxaa ka bilaabmay halgan hubeysan 1962-kii, ilaa 1965kii, kaddib markii shir ka dhacay Xodayo lagu guddoonshey, in gumeysiga madow, ee Xabashiyeed layska tuuro.

Waxaana abbaanduule ka ahaa halgankaas, suldaan Makhtal Daahir, halyeyada kale, ee iyana madaxda ka ahaa, waxaa ka mid ahaa Aadan Xadiis, Shiiiih Xasan Cabdulle Xasan, iyo Xirsi Xasan Bidde, oo isagu si geesinnimo ah ugu dhintay dagaal ku dhexmaray Jidhacle gobannimodoonka iyo Ciidamada gumeysiga Xabasha.

Goobaha kale, ee iyana dagaallo qarqaraari ku dhexmareen cidamada gumeysiga Xabashiyeed iyo gobannimodoonka waxay ahaayeen, Garasbuur, Gooratoro, Sardaale, Ceeldib iyo Fiiq iyo Sagag, oo gobannimodoonku gacanta ku dhigeen.





Gacan goyntani, oo Mustaxiil ka dhacday 1976kii, waxay tusaaleyneysaa sidu gumeysiga Xabashiyeed u cunsiiyo eydiis hilibka Soomaaliduu gumeysto.



Taswiirtani waxay tusaaleyneysaa sida naxariisdarrada ah, oo Ciidammada gumeysiga madow, ee Xabashiyeed ugu adeegtaan Soomaa-li Abbowda ay gumeystaan.

Goortay guushii dhaqdhaqaaqyadaasi gaari lahaayeen-laba geeddi u jirsatey, baa waxaa jahawareertay dawladdii Soomaaliyeed, oo ahayd meesha keliya oo gacan siin lahayd, kaddib markii khalkhal siyaasadeed ka bixi waayey, madaxdii-na saldanada ku loollan ma'ahe hawo kale dhigeen.

# Soomaaliya iyo Cahdigii ku magac baxay musuqmaasuq

«Isticmaarku meeshuu ka kaco, arami baa taale
Ragguu sii ababsaduu si dhigtaa, kaalintii adage
Irbaddiisu waayaha dambey, eebo kicisaaye
Waa waxa Afrikaba qarribey, ubax dillaaciiye».

Cabdullaahi Suldaan «Timacadde» 1968

Inkastoo, dadka Soomaaliyeed dawladnimadey u sid tirinaayeen u dhalatey 1960kii, oo farxad iyo niyadsami gashay, haddana isla markiiba wixii la haweysanaayey iyo wixii lala kulmay waxay noqdeen labo aan is lahayn. Calanka keliya baa wehel ahaa, baa la oran karaa. Dadweynihii gobannimada u hanweynaana welwel iyo walbahaar ayuu la asaddahay. Maxaayeelay hoggaan qabad xumo lala kulmay ka sokow, waxaa xorriyaddii la qaatey lugta jiidey, ha ahaato xagga dhaqaalaha iyo xagga siyaasaddaba e gumeysiga cusub oo midab hor leh la yimid, aanna laga gaashaaman. Gumeysigaas cusub oo ah kuu sheegay ragguu ka mid ahaa Madaxweyne Kuwaami Nakruuma, ugana digey dawladaha soo koraaya iyo dunida saddexaad.

Sidaas darteed, wuxuu dalka Soomaaliyeed dhaxlay, oo jah wareer ku ridey siyaasad iyo dhaqaale aanu u madax banaanaaneyn, oo ajnebi iyo kuwo la mabda ahi gacanta ku hayeen.

Isticmaarkii soo rogaal celiyey dibindaabyadiisii iyo lug jiidkiisi, waxaa ummadda Soomaalyeed ugu biiray, oo iney hore u marto ka dabreeyey siyaasiyiintii hoggaanka qabtey, oo intooda badani daryeelka danahooda aawadood dhiirri

gelinaayey, iska hor imaad, kala soocsooc qabiil, iyo wax alla wixii dad ku luufluufo. Waxayna gaartey noloshii dadweynaha nin siyaasi ahi ninuu gacanta hayo ma'ahe, inaan qof kale oo Soomaaliyeed shaqo iyo garsoor xagga bulshada innaba haweysan, ama qof waliba qofkuu ka mudane baarlimaan badan yahay kaga xaq yeesho, xagga shaqada, iyo xagga gacan qabatink dhaqaalahaba.

Taasina waxay dhalisay, markii noloshii nin siyaasi ah ku xirantay, in dadweynihii kalsoonidii ka xumaato, oo badankiis dani ku qasabtey iney meherad ka dhigtaan yar iyo weyn mudane baarlimaan noqo, haddaadan noqon kareynna dhiso mid ku gacan qabta, halkaasna indheer garatadii iyo nin kastoo wax yiqiin afmiinshaar laga daryeelay. Dabadeedna eexdii, laaluushkii, xaqdarradii faan noqdeen, oo lagu xalaashadey, nabadgelyadii dalka ku xumaatay, dilkii iyo dhacayna joogto noqdeen.

Iyadoo, siyaasaddii gudaha, ee dalka sidaas leegleegad u tahay, baa isla markaas dhaqdhaqaaqyo gobannimo doon ahi ka wada soconaayeen dalalka Soomaaliyed ee maqan, sidey uga sodeen dalal badan, oo Afrikaan ah, oo isticmaarka la jahaatamaayey. Taasina ma raali gelin Xabashida iyo kuwii la jiray Waxayna soo habeeyeen in dawladda Xabashidu ku soo duusho Soomaaliya, hase ahaatee intaan duullaankaasi dhicin, ayey dawladdii Soomaaliyeed, ee markaas dhisneyd u muuqatey iney hubey dalka ku daafacdo u baahan tahay. Waxaana la warsaday hubkaas 1962kii dawladda Mareykanka oo isla markaas Xabashida siin jirtey hubka, heshiisyana u dhexeeyeen.

Iyadoo haddaba Xabashidu Mareykankan la hadashey inaanu Soomaaliya hub siin, haddana dawladda Maraykanku waxay oggolaatey iney Soomaaliya siin kareyso 7,000, askari hubkood yaryar ah, oo difaaca dalka gudihisa wax ka tiri kara. Soomaaliyana kama oggolaan Mareykanka iney ka qaadato bastolado iyo hub dalka gudihisa keliya iyo bannaan baxyada lagu ilaasho.



Kaddib markii Soomaaliya ka soo hungoydey Mareykanka, oo hadhkii cadowga iyo isticmaarkii soo humbaalleynaayey, miscirirta ka muuqdeen, ayey markaas dawladdii Soomaaliyeed lahaan weydey iney sidaas ku joogto, oo markaas hub warsatey Itixaadka Soofiyeetiga. Itixaadka Soofiyeetiguna waa oggolaadey inuu xoogga Soomaaliyeed hubeeyo sidaasaana heshiis lagu kala saxiixday 1963kii.

Waxaase dhacdey, iney imbiriyaaliyadda Caalamiga tallaabadaasi raalligelin weydey, culeysna saareen in laga noqdo.

Hase ahaatee dadka Somaaliyed uma debcin, iyana in taas kuma harine, sida la maleynaayo waxay dabada ka soo riixeen dawladda Xabshida, iney weerar ku soo qaaddo intaaney xoogsan, oo hubka Itixaadku u soo gacan gelin, amaba ay tusaaleeyeen in Soomaaliya ay maalintaas qabasho lahayd, oo oo u dagganeyd.

Maaddaama waqtigaas, Soomaaliya siyaasad iyo doorasho baarlamaan foodda ku soo haysey hubna uu u ahaa hub Masar siisey, oo buntukh xakiimka ahi ka mid ahaa, diyaar uma ahayn dagaal. Hase ahaatee Xabashidu iyadoo taas og bey weerar ku soo qaadday dalka Soomaaliyeed 6dii Feb. 1964 iyadoo ay ta hay ramadaan, oo la wada soomman yahay. Dagaalkuna wuxuu ugu horreystii ka bilaabmay oo xabbaddii u horreysey ka qaraxday Tuulada Togwajaale, oo Gobolka Waqoyi Galbeed ah. Dagaalkaasi inkastuu hadba maalmo joogjoogsaday wuxuu socday ilaa maalintii dorashadu dhacday ee ahayd 28kii Feberwari 1964. Dadka Soomaaliyeedna iyagoo ku guubaabsan «Iney gacanna dorashada ku dhiibaan, gacanna ku dagaal galaan oo buntukha ku sitaan», bey dorashadii ku galeen maalintaas iyada ah, gumeysiga Xabashiyeedna jilibkaka u dhigeen.

Xoogga Soomaaliyeed, oo markaas xalaal ka ahaa siyaasaddii iyo labkii dalka gudihiisa yiillay, kana koobnaa tira aad u yar, oo isla markaas hubkiisu aanu u dhigmeyn marka loo eego kan ka soo horjeedey, goob walba oo layskaga hor yimid waa kaga guuleystey ciidamadii Xabashida, oo gardarrada ku soo duuley gumeystayaashuna soo guulgulaayeen.

Markii cidamadii Xabashidu sidaas u guuldarreysteen, oo wax ku taransan waayeen wuxuu Mareykan hub iyo maal sannado ku daldalaayey, baa waxaa war lagu helay dagaalkii kaddib in khuburadii Mareykanka Addis Sababa u joogey ku warbixiyeen «Inaaney libinta dagaalku ku jirin madfaca iyo dabbaabadaha, ee uu libinta hayo askariga ku dagaallamaaya». Iyagoo khubaradu taas run ku sheegay, ayey is halmaansiiyeen, iney iyana jirto, in xaqu had iyo jeer xaqdarada ka adag yahay, oo ka burji sarreeyo.

Guushaas xooggu iyo ciidamada kale, ee bolisku ka mid yahay soo hooyeen, cadawgiina isku hortaageen, waxay suura gelisey in doorashadii fusho, oo raggii la soo dooran lahaa soo galaan, hase ahaatee inkastoo doorashadii dhacday, waxba isma doorin siyaasaddii gudaha, iyo noloshii bulshada.

Doorashadii kaloo dhacey shan sannadood kaddib 1969kii 88 xisbi baa ka qayb gashay, musuqmaasuqiina wuxuu gaarey heerkii ugu sarreeyey ilaa intii Soomaaliyi jirtey. Wa xaana ummadda Soomaaliyeed aakhirkii dunidu ku magacaw dey «Qabrigii mucaawanada», kaddib markii wixii dunidu macaawimo ugu deeqday dalka iyo dadweynahaba, dhismo siyaasadeed iyo laaluush lagula kala tegay. Foolxumada tiilley mudanayaashu marka la soo dooranaayo dadka codkooda waa ka gadan jireen, iyana si le'eg markey baarlamaanka soo galaan codka kuma dhiiban jirin sidey la noqoto, ee waa gadan jireen. Iyadoo aan la soo koobi kareyn haddana fadeexadihii iyo ku gurashooyinkii ka dhacay Wanlewayn, Aadan Yabaal, iyo Buur-Hakaba sheekooyin baro leh



bey noqdeen, oo dadka Soomaaliyeed xumahooda xus gooniya bey u leeyihiin. Caddaalad darrada, musuqa joogay, xalaashii la xalaashadey maalkii dadweynaha mahadhooyin baa iyana ka haray.

Maalkii iyo wixii la bobaayey markay xad dhaaf noqdeen, waxay intii nasiibsatey markay tumasho isbahardaadinayaan ku halqabsan jireen heeso ay ka mid tahay:

«Geelaa markuu dararan yahay, laba nin duugtaayey

Wax kaloo la darandooriyaa, damac ma yeeshaane».

Sida la og yahay, ama aalaaba intaan af Soomaaliga la qorin jirtey in taariikhda Soomaaliyeed ku kaydsami jirtey murtida, oo waxaa ra'yiga dadweynaha cabbiri jirey ama tilmaami jirey maalinba waxa joogey, abwaanada murtida tiriya. Maxay haddaba ka yiraahdeen cahdigaas isaga ah. Ugu horreystii wuxuu Xaaji Aadan Afqallooc ka yiri:

«Kuwii guuray baa daaqaddii, nooga soo galaye
Gumeystaha jediidaa aroos, loo gelbinayaaye
Waraabihii gol qabatada yiqiin. geela waw halise
Goodadsey calankii dhulkuu, gaaro baw haraye»
Gobanimo xaqii ay lahayd. geed fog lagu laalye
Goblanse ma'aha maandeeq, haddey gabadin moodeene
Maruun bey sidii aar libaax, geydh la soo kiciye
Haddii geed darfuhu dheer yihiin, gooya baa xigiye
Xiddigii gumeysiga dhaciyo, kii gunneyn jireye
Gabbal gaabtey iyo baan arkaa, gaawe buuxsamaye
Gardarada qunyara xaal adduun. gelinba waa cayne».

Qaasimna wuxuu ka yiri:

«Dayaxaa la kala boobayaa, diriki cawleede
Dabajoogihii laga carceer, diillintii guba'e
««Dib baa laxaha loo eegayaa, sacana waa daafe

Dabeylaha la qaybsadey nin ogi, dib uga faallooye
Ma doorraato raadkaan dhigaan, dib ugu soo laabtey
Sidii aan deyeysanahay miyaan, dawgi ka habaabay
Daab gudimo weli soома jarin, wiilashaan diraye
Dusha midabka Soomaali baad, dugulka mooddaaye
Misana laguma diirsadee qalbigu, waa dirkii Karale (1)
Sidii baa dagaalow biyaha, loo daweriyaaye
Sidii bey u dooyeysan tahay, damashi weyneyde
Debnihii shakaallaa maruun baa, doodda loo furiye
Derridaas habaaska leh maruun baa, doog ka soo bixiye
Maruun buu dabolka iska rogi, doob la quursadaye
Markaaseynu deydeyi xaqii, naga daboolaaye
Ha yeeshee, dabkeedu ha ba'ee doqoni waa mooge».

Labada gabayaaba Xaaji Aadan iyo Qaasimba iyagaan waxba dhaafin waxay gabeyadoodaas tusaalaha ah ku muujiyeen sida dadka Soomaaliyeed hirkii u laacey, ee gobannimo ugu hungoobeen, gumeysiga cusubina lugta ugula jirey, waxayna labaduba oddorosaayaan waa cusub inuu Soomaali u beryaayo».

Wuxuu Oday Samakaab dhaawacii gaaray la adkeystaba, isagoo gibil Madow, markay soodhowaadkii ahayd, oo cirjiidhii nin joogiis le'eg tahay ayuu Goobdoon, oo isna qallinkii kaga dhegey labadi farood iyo suulkuu ku hayey, duruustii xiriirsaneyd u dhammeeyey oo ku yiri» Maandhow lahwigii laabta i ololinaayey waa iga ba'ay oo waa mahad Ilaahay mar haddaan kuu tebiyey iyadoo is-heysata waxaan ka hayey taariikhda ummadda Soomaaliyeed. Oogtii iyo uurkutaaladii caloosha i maaleyseyna caawaan ka bogsadey, geerideyna waa xalaal.

---

(1) Karal (Carrel) wuxuu ahaa Xoghayihii badhasaabkii Ingiriiska ee Waqooyiga dalka Soomaalida xukumi jirey, waayihii u dambeeyey.



Ogoobeyna taariikhdu waa sida muraayadda laysku eego kuna tusta sidaad u eg tahay, markaas sida aan muraayadda looga maarmin ayaan taariikhda barashadeedana looga maarmi karin. Khaas ahaan taariikha dalkaagu waxay ku tuseysaa qarannimadaadu waxay tahay, dunidana xin iyo xifaalatan joogta ah baa jira'e iyadaad kaalintaad kaga jirtid ku hilbo qaybsataa.

Teeda kale garo, in saddex xaalo, oo nolosha beni'aadanka saameeya garashadoodu lagama maarmaan yihiin sidaan hore kuugu sheegay, Ta u horreysa garasho u lahaanshada wixii tegay, waxa jooga, iyo wixii iman doona oddoroskooda. Waayo horaa loo yiri, nimaan waxa jooga garan waxa iman doona ma garto, run ahaantii sida waayoarag lagu noqdey waxaa jooga, iyo waxa iman doonaba, waxay sanacsadaan wixii tegay, oo sababahoodu ka dhashaan wixii xaal adduun ku sugnaan doona.

Sidaas darteed, dilka, dulmiga silica, kufsiga, halaagga gardarrada, iyo gebegebeynta joogtada ah, oo Xabashidu ummadda Soomaaliyeed ku hayso, caawana raadkeedii qoyan yahay, oo aan anigu dhaawaceedii iminka la jiifo, adna lugtu ku naafowdey, hoyadaana aad gacmahaaga ku bud dhigteyshaleyto. Yaa sababtooda leh ? yaase dalka Soomaaliyeed Xabashi keenay, illeyn sida taariikhda lagu hayo, markay ahayd 1878 boqortoyada Xabashidu gobolka «Shoa» ma soo dhaafsaneyne? Yey Soomaaliyi cersatey oo dalkeeda kala googooyey? Habilaawow iyo beenbeensiga dhegeystow, dhagartiisa ninkii qabey dhegtiisa u raariciyow, Ingiriis miyaanu ahayn kan taariikhaha kala geddisnaa oo kala ahaa 1884, 1897, 1948 iyo 1954 heshiisyada kula dhigtay Xabashida inuu dalka Soomaaliyeed maalinba intay soo qoondeysato siiyo, N.F.D. sida la og yahay ka yeelay?

Waa qoomamo iyo urugo'e, waxaa su'aal ah goormey dadka Soomaaliyeed awood iyo wakaalad Ingiriis u siiyeen inuu dalkooda qarsoodi ama bareere ku bixiyo, ama heshiisyo

kula dhigto dawlado shisheeye ah. Sow tey dadka Somaaliyeed inuu ilaaliyo keliya heshiisyo kula qorteen haragmaqaarka.

Waxaa kaloo iyana, is weyddiin leh, iyadoo la og yahay daqaraduu Ingiriis Soomaali u geystey xanuunkooda, ma budhcadnimaa loo qaadan karaa dal aanu yeddiisa lahayan, loona wakiilan ku tagrifalkiisa?

Waa su'aalo aaney weli jawaabtoodii helin dadka Soomaaliyeed iyo quruumo kale, oo uu sidaas u galay sida Falastiintuu Yahuudda dejiyey dadkii lahaana dhaxal wareejiyey. La yeeluhu ma illaawee, ubadka Soomaaliyeed, ee kici doonaa, iyo boggagga taariikheed qancin bey ka sugayaan yeelihii eelka dhigay.

Sidaas si le'eg miyaan Faransiis heshiis qarsoodi ah kula dhigaan Xabashida magaalada Addisbaba, markay ahayd 1897. Heshiiskaasoo uu ku daryeelay siyaasaddii Xabashida, ee dalballaarsiga ahayd, uuna ugu oggolaaday in xuduudkay hore ugu heshiiyeen, oo isba xaqdarrada ahaa, mari lahaase xaqdarro kasta ha ahaadee Biyoqaboobe, Geldasa iyo Harar ka shishow, in la mariyo Jaleelo iyo Jabuuti agteeda. Ka sii darane, miyaanu Talyaani markay taariikhdu ahayd 20-kii Feb. 1887 ciidamada Xabashida garab ku siin qabashadii Harar, taariikhdaasoo ahayd taariikhdii u horreysey oo Xabashiyi dalka Soomaaliyeed cagta soo dhigto. Gacan siintii uu Talyaanigu gacan siiyeyna, halkaas suurogal u noqon in Minigilig yiraahdo, «Maanta Axmed Gurey ka aargutey, calankaygana ka taagey magaalada Harar».

Isticmaarkii isu soo bahaystey gumeysiga iyo garbadduubka ummadda Soomaaliyeed kuma ekaan qarnigii 19aad, ee sidii iyo si ka daran bey qarnigii 20aadna wadajir Ingiriis, Talyaani, Faransiis iyo Xabashiyi waxay awood lahaayeen isugu geeyeen googgeynta, qaybqaybinta iyo burburinta qoomiyadda Somaaliyeed. Ka soo qaad markii Seyid Maxamed kacay,



wadajir joogta ah bey Talyaani Ingiriis iyo Xabashidu ula dagaallamaayeen, oo markay ahayd 1903 waxay saddexdaas cadaw kala saxiixdeen, heshiiska lagu magacaabey «Anglo-Italo-Ethopia Attack Against Darwiish».

Dunidu waa amakaagiye halkaas waxaa ka cad iskaashigey isu soo kaashadeen Somaaliya gumeysiga reer Yurub, iyo kan madow ee Xabashida. Wuxuuse yiri Cabdulqaadir Yamyam:

«Ma ledaa, dakane qabe
Kan la dilay, la duudsiiyey
La yeeluhu, ma daalaa».

Sida adduunkoo dhan ka dhacda, ilma walba markuu dhasho hoyadiis, iyo aabbihis ayaa magac ula baxa, sidaas si le'egna dal walba dadka u dhasha, oo leh ayaa magacyo ula baxa magaalooyinkiisa, tuulooyinkiisa, burihiisa, iyo webiyadisa. Markaas dalkaan magacyada ula wada baxnay sida dhasha, sax iyo maanna loo wada garanaayo, iney magacyo Soomaaliyeed yihiin, sida Hara-maayo, oo ah haro iyo maanyo, ama haro bad oo kale ah, Dirirdhaba oo ah Goobtii Axmed Gurey iyo Suldaan Abuubakar dirirta dhabta ahi ku dhex martay, Negiile, oo negaasho ah, ama meel lagu negaadey, Harar, oo harrar ka timid buuraheeda, oo harraran aawadood. Godey, Haadaamo, Qabridaharre, Awbarre, Ceelkare, Dhagaxbuur, iyo Hawaash waa muuqdaan iney magacyo Soomaaliyeed yihiin sharraxodana looma baahna. Si kale haddii loo eego, sida aaney innaba u dhici karin in dalka Ruushka, ama Ingiriiska laga helo meelo magacoodu Soomaali yahay baaney u suuragasheen haddii dalkaas Xabashiyi leedahay sidey ku dooddo inuu magacyo Soomaaliyeed yeesho. Sidaas darteed miyaa gumeysiga madow, ee **Xabasha ee sida lagu siiyey la garanaayo** laga garawsan karaa anaa leh. Sow taasi uma dhiganto hooyada ilmaheeda ula magac baxday, muuqna garaneysa, oo lagula murmay».

Halkaasuu Aabbe Samakaab ku joojiyey hadalkiisii isagoo yar taahaaya, oo hadalku dirqi kaga soo baxaayo. Gobdoon, baa markaas hadalkii qaatoo yiri, Waan kugu mahadinayaa duruusta dhaxal galka ah, oo aad ii dhigtey, waxaanse qoomameynayaa waxaan ogaadey iyo waxaan qabey, sida aaney isu lahayn!! Aabbe Samakaab ayaa ku noqdoo yiri, «Layaab ma lihid, oo ma ogid in gumeysigu Afrika ku soo galay ugu horreystii sahan ahaan, markii xigeyna ku soo gabbadey fidinta diinta kiristaanka. Maantana rabo inuu ku isticmaarsado Afrika dhaqan guurin iyo maskax habow». Isagoo haddana Samakaab sii wata wuxuu yiri, «Haddaan ogaa halkay kaa joogtey, dersiyadii wax ma ka fahantey waxaad ahayd, iyo wixii runtu tahay.

Ma kala sugtey isticmaarku wuxuu ummadda Soomaaliyeed u geystey, khaas ahaan afartaan sheegay ee shan u qaybsadey» Goobdoon baa hadloo yiri, «Waan fahmey dhammaantood» Markaasaa aabbe Samakaab yiri, «Yey adiga kugu ekaane tebi duruustaan ku siiyey, hawraarteydanna maqal:

Goobdoon dakaamaye, dareen laawidaadiyo
Doqonniimadaadaa. dacarteygu kiciyee
Balse kula dardaarmaye, intaad dunida nooshahay
Duruustaan ku siiyiyo, dabuubtey ha sii deyn

Meel daqar ku yaalloo, la diikaantey malaxoo
Dillaaceedu joogaad, iga daqantey caawee
Waxaan dib uga faalloon, dulmigii na helay iyo
Wuxuu dacati nagu falay, dooxatada gumeysigu

Damiir laawehcerow, damiin lama ahaadee
Away dakanadeennii. **Yaa loo daba gelaayaa?**
Yaa dalkeenni weynaa? shan dalool u qaybsadey
Sow tii la deyroo, Sow tii la degel rogey
Durufley Amxaara'a, dalballaarsigeedii
Ingiriis daryeeloo, daaddahayntii uu wadey
Debindaabyo hoosiyo, dabin qol inoo dhigay



Meyey idinka dedan tahay, adigiyo da'daadaba
Waxaa daafta ina dhigay, laba dible inoo xiray
Iney yihiin dir gaal iyo, **duulka reer galbeed**

**Derrin lala fariistiyo, daawo lalama yeeshee**
Waa laga diqoodaa, nin ku dilay adoo dagan
Oo haddana dubbeyn iyo, aan digasho kaa deyn

Dulmadoobidaadiyo, ninkii diirka kaa neceb
Dullinimada kula jecel, derejana aan kula rabin
Kuu daayey adiga'e, yaa daris la noqin kara?

Ku denbaabimaayee, deelqaafka Faransiis
Ku deldeli dadkeennii, waa doog abaaddoo
Damqashiyo xanuun lee, meynageyska daaweyn
Inta dogob la weyn shido, mise waa ku daa'imin
Dullinnimo ma fiicnee, darxumooyin joogta ah
Markuu doorarkii diley, diricyadiina hoobteen
Wey uu deyrka siligga ah, Balbala ku dacal xiray
Diiftiyo halaaggii, daa'imada carruurtiyo
Dumarkii ilmeeyeen, Faraans kula dub ma'ahe
Yaa dani ka haysaa, digta goor allaba go'in
Dabeylaha meleegani, **mar bey dogoxinaayaan**
Kan la dilay la duudsiye, mar buu dereg helaayaa

Markuu maansadaas gaaban dhammeeyey, ayuu isagoo sidii wax sahwiyaya ah, yiri: «Warankayga iyo gaashaankayga **qaadoo, berritona markay waagu beryo** Hargeysa aad, adoo hibanaaya halaagga gumeystayaashu iyo imberyaalilyaddu , wadajir ugu geysteen ummadda Soomaaliyeed. Hibashadaaduna yey ahaan midaad calaacal iyo calool xumo meel la fadhidid, ee ha ahaato mid ficil leh, oo hawlkar iyo naftiisa iyo maalkiisa huraa kaa dhigta, habeen iyo maalinba hawl baa waxtarlee ha fariisan jeeraad wixii boqol sannadood laguu geysanaayey ka gamadid. Markuu intaas yiri, Aabbe Samakaab, ayuu barkimadii iyo hal-

kuu ku soo tiirsanaa barbar uga dhacay, amminkiibase Goob-doon baa ku boodey, oo dhabta ku qabtey. Hase ahaatee in yar kaddib markii lagu soo ururay ayaa naftii ka baxaday.

Geeridaas urugada leh, waa tu u jogta ah dadka Soomaaliyeed, ee Xabashida gacanta ugu jira, markaas, Aabbe Samakaab dhaawacii gaarey ayuu u geeriyoodey, kaddib markuu dhaxalsiiyey Goobdoon oo hore u rajoobey haddana agoomoobey wuxuu cilmi lahaa, ama waayo-arag ku ahaa guyaalkii badnaa oo uu soo jirey. Dabadeedna markii waagii beryey ayaa la aasey, iyadoo dad badani ka soo qayb galay.

Maalinti Gobdoon aabbihiis bud dhigay habeenkeedii laba indhood isuma keenin, oo hadba siduu u soo xusuusanaayey siduu laba maalmood oo is xigta aabbihiis iyo hoyadiis u dhinteen, iyagoo waxay galabsadeen aaney jirin, ayaa waagii ugu galac yiri. Wuxuuna goostey inuusan joogin ee meesha urugadeeda iskaga tago, oo Hargeysa dib ugu noqdo, Gargaarana haddey yeesho kaxeeyo.

Markii waagii beryey ayuu warankii iyo gaashaankii aabbihiis qaatey, oo Gargaara ku yiri intuu u yeeray, «Gargaaray ina keen, oo Hargeysa ii raac». Iyana hadal kama celine waxay tiri «Goobdoonow habeen hore adiyo aabbahaa miscirirtaan idinka dhegeysanaayey, ee wuxuu ku dhigaayey sow ma xafidsanid» haa buu ku yiri «hadalkii bey ku noqotoo tiri», Waa tahay ina kaxee meel la jooga ma'ahe'e, innagoo cudud leh baan iman doonaaye, kolley deynmeynoo waa dalkeennii hooyo'e.

Halkaasaa, Goobdoon oo jaahil baxay, aadna uga beddelan sidiisii hore xagga garashada taariikhda geeska Afrika iyo siyaasaddaba Gargaari la socoto majarihii Hargeysa qaadey, si ay baabuur uga raacaan tuulo xad ku sheegga ku taal oon ka fogeyn. In saacado ah hadday socdeen, oo uu hadba duruustuu soo dhaxlay maankiisa ku soo dhaceyso, iyo sida uu mugdi ugu jiray, oo ileys iyo nuur ugu soo baxay, ayey ku soo baxeen xuduudka dadka Soomaaliyeed u bixiyeen «Gawracii gumeysiga» oo bari iyo bogox u kala dhereran. Markaasuu is dhex taagey, oo ku dhaygagay siduu u dhigan yahay intuu warankii iyo gaashaankii Gargaara u dhiibtey, waayo hore uma arag, maalintuu mareyna uma fiirsan inkastuu hore balaf ku maqlay in xudduud ku sheeg maro melaan Hargeysa ka fogey.



Hadduu haddaba in cabbaar ah, marna bari u raacay marna galbeed u raacay, iyadoo Gargaari daawaneysa, buu yiri», haa kani miyaa xuduudkii xaqdarrada ahaa iyo «Gawricii Gumeysiga, oo Ingiriis iyo Xabashiyi dadka Soomaaliyeed ku kala gooyeeen markay ahayd 1934?» Markaasey intey debenta qaniintey ku tiri, sidaasaa xalay aabbe kuugu dhigay oo anba waan maqlaayey» Markaasuu intuu galbeed u jeestey yiri:

«Waa maxay xudduudkani, marna bari u xulayoo
Xundhurtiyo wadnaha togey, marna bogox u xulayoo
Halkaas xabadka laabtiyo, kala xiiray feedhaha
Xurmo lehe xornimadu'e, gumeysigu Xaraaraa.

Isagoo Goobdoon khariidada dalkisa, oo dhan intaan gumeysigu qaybin u sawiran tahay, qabana tiiraanyadaas uu ka heesay iyo dareenkaas dhiigga dhaqaaja qof walboo Soomaaliyeed markuu arko xudduudkaas Hargeysa iyo Jigjiga kala xiray ayuu warankiisii iyo gaashaankii qaatay, oo intuu galbeed u jeensadey Gargaara ku yiri, «Gargaaray godobteen galbeed bey jirtaa, geyigeennii gumeysiga madow, ee Xabashiyeed haystey galbeed ayuu inaka xigaa, halgankeennii gobannimadoonku hadduu bilawday, ee baaqa gobannimo inoo qaad, Soomaaliyi hurdada ha ka kacdee, ha toostee, hubka ha qaaddee, markaasay isla qaadeen baaqan gobannimo:

«Gunnimow halaakiyo
Hoog iyo ba iyo ciil
Hiirtaanyo lihidaa

Gobannimow helkaagiyo
Hadh qaboobidaadaba
Waxaa hela halyey iyo
Kii hura naftiisee
Nin hurdaa ku hanan waa

Gobannimow hir doogliyo
Hooyada dhallankeed
Haaraan ka dhowrtoo
Halabada macaan iyo
Habid dhay ku korisaay

Gobannimow hooshaar iyo
Lihid haybad iyo sharaf
Anse hibashadeydii
Weli haaka maan oran
Oo waxay himiladay tahay
Soomaali heel weyn
Isu habarwaceedaan
Hootadow sitaayoo
Halgankeed u taagnahay

Baaqaas gobannimo, oy wadajir Goobdoon iyo Gargaari dadka Soomaaliyeed mid yar iyo mid weyn gobannimo ugu baaqeen,ayaa halgankii xoreynta Soomaalida galbeed iyo Abbow ku bilaammay, uuna ku socon doonaa ilaa lagu gaaro halka yoolku yahay, iyo webiga Hawaas.



# GEBAGEBEYN

Garasho u lahaanshada qof walboo Soomaaliyeed garasho u yeesho, uurkutaallada biirtey, ee dadka Soomaaliyeed, la taahaayey marka laga soo bilaabo Qarnigii 19aad, ilaa Qarnigan 20aad, iyo isla mar ahaantii fahamka uu fahmo, sababaha dhaliyey tabaalahaas Soomaaliya ka haysta, xagga shan meelood u kala soohdimeynta, ama u kal googgeeynta, dad isku mid ah, ab iyo isir ah, ab iyo abuullan ah, in isticmaarka dawladaha reer Galbeed Ingiriis, Faransiis, iyo Talyaani mas'uul ka yihiin, kaddib markay u gacan geliyeen gumeysiga madow, ee Xabasha.

Arrintaas iyada ah, oo damqashada iyo caloolxumada leh, waa dareen ku jira, baraarujiyeyna dadka Geeska Afrika xasiloonaantiisu ku xiran tahay. Waana mid bulshada Soomaaliyeed aaney ka bogsaneyn, maxaayeellay gumeysiga ay gumeysanaayeen ka sakow, waxay dawladahaas Reer Galbeed, Ingiriis dhagar qabaha u weyn ha haadee, u gacan geliyeen dadka Soomaaliyeed gumeysiga madow, ee Xabasha, taariikhaha kala ahaa 1884, 1887, 1897, 1903, 1948 iyo 1954 oo ay heshiisyo kala geddisan kula dhigteen, Soomaaloo aan wax ka ogeyn, iyagoo ku xadgudbaayey kuwey Ummadda Soomaaliyeed kala qorteen taariikhihii ahaa 1862, 1884, 1885, 1886, iyo 1896dii.

Heshiisyadaas, oo intooda badan Ingiriis Xabasha la galay, waxaa ku dhaawacmay is-haysadkii iyo midnimadii Ummadda Soomaaliyeed. Haddaba su'aashu waxay tahay, Ingiriis ma qomameeyaa dhagartuu dadka Somaaliyeed ka galay maantase, isagaa xog ogaal u ahe, ha yaraatee ama ha badnaatee, runta ma ka sheegaa, inuu isagu gumeysiga Xabasha, u

gacan geliyey dalka Soomaaliyeed qaarkiis. Jawaabtu waa ma-ya, weli runta kama sheegin, taasina tilmaanteedu waa ka tag-ganaan beni'aadannimo.

Ku daa markaas, weyda dhibbanaha, iyo is uur ogaansho la'aanta dhagarqabaha, tii abwaankii Ismaaciil mire tix-diisan ku sfeeyey, oo ku yiri:

«Isma oga nin urugeysan iyo, eelka kii dhigaye».

Wax ku qaadasho, iyo deris maanta ha u ahaatee, bul-shadaSoomaaliyeed mid xor ah, iyo mid kaleetaba'e, waxaa Qarnigii 19aad gumeystayaashaas u dhib yareeyey awood-doodii iyo xeeladahoodii ka sokow, iney dadka Soomaaliyeed shan meelood u qayb sadaan, kala qaybsanaantii, iska soo hor-jeedkii, iyo loollankii joogtada ahaa, ee dhex yiil salaaddiintii garaaddadii, iyo ugaasyadii midba meel dalka ka xukumaayey.

Waxaan shaki ku jirin markaas, iney Ummadda Soo-maaliyeed gumeysiga bir lab kaga adkaan lahayd, hadday isku mid tahay, oo madax iyo hoggaan keliya leedahay. Daraayiishi-na madax keliya ay lahayd, waa u tusaale heerkay ku gaartey 21kii sano, oo ay halganka kula jirtey, gumeysiga.

Ta ugu weyn , oo Soomaaliyi ka gami kareyn, illaaweyna, oy Afrikada kale kaga duwaneyd, waxaa weeye isu-gu biirkii ay isugu biireen gumeysi nin cad, iyo gumeysi nin madow, oo gumeysiga caddii garab iyo taageero siinaayey kan madow.

Sidase, taariikhda lagu hayo, dawladihii wax gumeysan jirey, ayna ka mid yihin Boortiqiiska, Faransiiska, Ingiriiska iyo Talyaaniga, waxaa u da' weyn Boortaqiiska, oo shan boqol, oo sannadood Afrika qaarkeed gumeysanaayey, isagana wixii ka gaarey iyo siduu ugu hoobtay, ugana haray reer Yu-rubta kale xag siyaasadeed, iyo xag dhaqaaleba, waa mahadho



taariikheed. Markaas sidaas si le'eg, ayaa aayaha gumeysiga madow, ee Xabasha ku danbeyn doonaa, haddaanu xoriyad u oggolaan qoomiyadaha kal duwan, ayna ka mid yihiin Soomaa-lida Galbeed, Abbow, Tigri, Cafar, iyo Eriteeriya. Suuragalna ma'aha in gumeysigaas dil, iyo dhac iyo saxariiris ma'ahe aan xirfad kale aqoon, in Geeska Afrika laga tirtiro waayo. Maxaa-yeelay gumeysigii caddaa, oo ka xoog iyo xeelad badnaaba Go-bannimodoon ka libeysey.

Teeda kale, muddadii ay haysatey, oy Xabashiyi addoonsaneysey Soomaali Galbeed iyo Abbow, wax horumar ah, dhaqaale ah, daawo ah, taclliin ah, ama daryeel dadweyne nooc kasta ha ahaadee uma qaban. Sidaas darteed, waxay keliyoo umuuqataa iney u joogto bahalnimo waxyeello. iyo haysasho millateri, oo maalintiina waa u wax dhac, wax dil, wax boob, habeenkiina dhagartay gashay aawadeed waa u gabbasho, iyo god gal.

Sideyse, saadaashu u muuqato god danbe ku badbaadi-meyso, oo Xabashiyi waa sida dundumo aboor candhuuftisa ku dhisay sidaas darteed, dadyowga gobannimo doonka u tocsay, sidii mayey roob dundumo u mayro ayey u mari doo-naan, Taliska Addis Ababa, ee hororka ah.

Afrikaanka xeerka dhigtay, iney gumeysiga la dagaalla-maan, hase ahaatee, aan maanta canbaareyn, amaba ay qaar ka aammuseen gumeysiga Madow, ee Xabasha, sow kuma gefsa-na. Maxaase, u dhexeeya gumeysiga nin caddii nin madow ku hayo, iyo gumeysiga nin madoobi nin madow gumeysanaayo, sow labaduba col beni'aadan ma'aha, sida furuq iyo fantada

«Magli inuu aflee yahay ninkuu muruqa go'oyaa og».

Tu kale layskuma hayo, in muddo saddex bilood ah gobannimo doonka Soomaali Galbeed iyo Abbow, ay jebiyeen kana libeysteen ciidamadi gumeysiga madow, ee Xabashiyeed

Sidaas darteedna, ay ku khasabtay iney qayshato, iney u soo hiiliyaan ciidamo huwan ah, oo ka kooban Ruush, Kuubbaan, Jarmalka Bari, Yuhuud iyo dawladda Carabta ah, ee Koonfurta Yaman (Cadan).

Haddaba ha ku dhignaato taariikhda Casriga ah, in dagaalka maanta Geeska Afrika ka taagani yahay mid layaab iyo amakaag leh, horena aan loo arag. Maxaayeelay wuxuu meel uga soo wadajeediyey Soomaaliya, oo dawlad yar ah, Xabashida ka sokow, Ruushka oo «Warso», oo dammi weheliso, Kuubba, iyo Yahuud, oo NATO dabada ku haysa, iyo waa nasiibdarro'e dawladda Carabta ah, ee Koonfurta Yamaneed oo Jaamacadda Carabta xubin ka ah, iyo Mareykan, oo si lama filaan ah dayactir millitari ugu deeqay, isla markaasna Soomaaliya hubku ugu ballanqaaday ka joojiyey, culeys siyaasadeedna saaray dawladihii kale ee gacan siin lahaa.

Inkastoo huwantaas Soomaaliya la dagaallameysa, xag millateri iyo xag siyaasadeedba, ay kala quluub, kala dano, kala diino, kala hadaf, kala mabaaddii, kala istraatiijiyad iyo kala ujeeddooyin yihiin, dhagar Qarannimona qaarkood dhextaal, lana oran karo, waxa Soomaaliya meel uga soo wadajeediyey waa ifafaalo cusub, iyo **guur aan xalaal ahayn.** Haddabana siyaasadda caalamiga ah, ee Ruushkiyo Mareykankuba kula dhaqmaayaan **dunid saddexaad, khaas ahaan** arrin maanta geeska Afrika ka taagan, waxay u muuqataa iney heshiis ku yihiin, in mid waliba midka kale, wixii danihisa ah, u daryeelo, xaqdarro iyo dulmi cid kasta ha ku ahaatee. Waxayna u muuqataa in miiskii Berliin, ee 1884kii Afrika lagu qaybsaday sidii u goglan yahay, qalinkii iyo xaashiyadihiina dul saaran yihiin, Ummada Soomaaliyeedna tahay midda keliya, ee maanta mar labaad u garbadduuban quwado cusub iney u heshiiyaan.

Miyaaney malayn kareyn labada dawladood, ee waaweyni in ummadda Soomaaliyeed maanta xaqeeda u halgameyso, eyna mareyso marxalad ay labadooda shacbi soo mareen dagaalkii gobannimodoonka, ee Mareykan ka dhacay, iyo dagaalkii labaad ee Ruush xornimadiisa u halgamaayey.



Soo dhexgalka ay soo dhexgashay dagaalka geeska Afrika, huwantaas kala quluubta **ah ee ka kooban Ruushka,** Jarmal-ka Bari, Kuubba, Yamanta Koonfureed iyo Yuhuuddu, gacanna ay ku siinayaan, xag millateri iyo xag siyaasadeedba gumeysiga Xabashidu inuu dul yaallo, Siliciyo, addoonsado, cadaadiyo dadyawga geeska Afrika ku nool, taariikh madow uun bey u ahaaneysaaye, xal u noqonmeyso xasiloonaanta gobolkan, una cabiidin karimaayaan dadka Soomaaliyeed ee qalbiga birta ah, iyo mabda' gobannimo keliya leh, geeriduna derejo u tahay.

**Ugu dambeystii,** inkastoo ay si kastaba qarnigii 19aad, ilaakan 20aad, isticmaarku wadajir qarannimada Soomaaliyeed uga soo horjeedeen, Xabashiyina xooggeeda dul dhigtay, iyadoo isticmaarka Yurub gacan siinaayo, maanta la kaashaneysa Ruushka iyo Kuubbaanka, inaaney waqeed Soomaali weyn abbuurmin, haddana innaba dhimanmeyso qoomiyadda Soomaaliyeed xoog kasta oo ka hor yimaadda.

Qoomiyaddaasoo ah, tii Axmed Gurey seeskeeda dhigay, Seyid Maxamedna udbaheeda dhidbay, ururadii S.Y.L. iyo S.N.L. ka mid ahaayeenna dhig dhexaadsheen, maantana uu hoggaanka u hayo, Jaalle Maxamed Siyaad Barre, iyo X.H.K.S., kuna dhisan isku ab iyo isirnimada, oo dhegtey wadajir gumeystayaashu u jareen, weli daloolkeedii baa harsan. Galab carrow iyo guure ku gaartayaaba, ummadda Soomaaliyeed waa tii gaarta himilooyinkey higsaneysiyo hirka gobannimo buuxda. Waxaana u hoggaan iyo halqabsi ah, tixda Seyid Maxamed uu ku yiri:

> Haddii laygu caashaqo, caskar iyo maraakiib
> Haddii ciidan farabadan, laygu soo carcooriyo
> Hadday soo cabaadaan, cadcad iyo Saraakiil
> Haddaad soo cafuutaan, cidda masaalqeed
> Cimrigey intaan jiro, cadow hadduusan ii turin
> In kastoo carootaan, ama aad curraaftaan
> Marna inaan cabiidsamo, caqligiinna yey gelin».

WAXAA LAGU DAABACAY
WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA
MUQDISHO, 1978